# MADAXWEYNE HA LAYGA DHIGO

(Sil. Siyas. Lam:5)

W. Q:

**QAASIM HERSI FARAH**

**(Duullaan jecel)**

Daabacdddii Koowaad, Malaysia, 1996 kii

Dhammaanba Xuquuqda kitaabkani waxa ay u xajisan tahay Qoraaga;

**Qaasim X. Farah**

WAXAAN U HIBEEYEY:

**Aabahay, Xirsi Duullaan-jecel.**

بسم ا الر ن الرحيم

## GOGOL DHIG

Haddaan aniga, adiga, iyaga iyo anaga oo idilba u waalanahay madaxweynenimo, waan wada heli karnaa ee aan ku hanuuno wadadiisa.Nin walbaaba waa uu noqon karaa madaxweyne, si dhab ah iyo si dheelalaw ah intaba - xaqiiqi ama majaazi. Waxaa la hubaa in nin walba ay ag taallo mas'uuliyad ugu filan jago madaxweynenimo. Nebiga NNKHA ayaa ina baraya taas oo inagu adkaynaya weliba in aan xilkaas si dhab ah u gudano. Wuxuuna yiri:

عبد الله بن عمر رضي الله عنه قال: سمعت رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول: " ثم كلكم راع وكلكم مسؤول عن رعيته، الإمام راع ومسؤول عن رعيته، والرجل راع في أهله وهو مسؤول عن رعيته، والمرأة راعية في بيت زوجها ومسؤولة عن رعيتها، والخادم راع في مال سيده ومسؤول عن رعيته، وكلكم راع ومسؤول عن رعيته"

Inb Cumar allaha ka raalai noqdee wuxuu yiri: in Nebiga NNKHA uu yiri;

"Qof walbaa waa mas'uul oo xil baana dusha ka saaran, oo waa la weydiinayaa mas'uuliyadaas

Ninka madaxda ah waa mas'uul "waxaana la weydiinayaa xilkii loo xilsaaray fulintiisa" Ninka iska caadiga ahna waa mas'uul oo waxaa la weydiinayaa sidii uu uga soo baxay xilkiisii qoys ahaaneed iyo qof ahaaneedba, Naagtuna waa mas'uulad - guri joogta oo waxaa laga weydiinayaa siday u agaasintay guriga iyo caruurta ninkeeda. warde hadalkoo dhan qof walbaa waa mas'uul waxaana laga weydiinayaa siduu u gutay hawshii loo xil saaray ee amaanada ahayd, koley naftiisa ku tahayna waxaa ka saaran waajibaad culus.

Haddaba akhristow kulligeenaba waxaanu nahay madax ee maxaa naga maqan? ma intaan xaabadii hore qaadi weynay baan tu kale sii saaranaynaa?.

Akhriska Mawduucaan waxaad ka dhadhaminaysaa waxa ay tahay dawlad, siyaasad, madaxtinimo, qaran, qabiil, dagaal iyo waxyaalo kale oo aan u wada baahanahay kulligeen. Waxaan kuu sheegayaa sidii aad ku noqon lahayd madaxweyne hadaad u bogto ee ha la yaabin, ogsonowna in shuruudaha aan ku xirnay haatan ayba yihiin kuwa bilawga ah ee aan laga maarmi karin

ee beri hore waxay ahaan jirtay wax taa aad uga sii adag waayo dadkii hore ayaa laga heli karay kuwa soo buuxiya waxaas oo idil. Bal eeg markii ay taariikhdu ahayd, 1050 m=463, waxa ay culimdii muslimiinta ee uu ugu caansanaa Alkhadiib- Albaqdaad, ku xiri jireen shardiga imaamnimada muslimiinta iyo xataa qaalli noqoshadaba, ha ahaato mid qaran hase ahaato mid gobole in uu qofku noqdaa Mujtahid, oo maanta aan inagu gebigiisba dunida ku la'nahay. Waxaa weliba taa uga sii caansanaa Imaamkii la oran jiray Maawardi oo isagu kaga sii adkaa dhintayna, 1058 m=450.

## HORDHAC

Kitaabkan oo ka mid ah silsiladdii taxanaha ahayd ee lagu baadi goobayey dib u soo celinta dawalad Soomaaliyeed ee uu ku hawlanaa Dr; Qaasim waxa uu mawduuciisaan ku soo ban dhigayaa falanqayn iyo dhiraan dhirin cusub oo cilmiyeysan kuna salaysan warbixin lagu xasiliyey si ka dheer maldahnaan iyo ka gaabsi. Waxa uu qoraalkani ula hadlayaa saaxiibada Soomaaliyeed ee ay madaxtinimadu derdertay si furcaddi ah oo uu ugu hanuuninayo tu u dhaanta tan ay maanta faraha kula jiraan. Qoraalaku waxa uu xusayaa dambiilayaasha ugu waa weyn ee dalka iyo dadka Soomaaliyeed u eedaysan, wuxuuna isla markaas ka codsanayaa shacabka Soomaaliyeed in ay usabraan, iyaga oo ugu cudurdaaraya sababo fara badan oo jira, una arkaya sidii in aysan wax dambi ahba ka gelinin.

Waxaa ah mid aan laba cali is weyndiinaynin in ay balaayada madaxnimo jacaylku tahay

Cutubka Shanaad waxa uu u dhaadhacay ujeeddooyinkii xasaasiga ahaa ee buugga, wuxuuna toos kuu dhex gelinayaa in aad u kala gar naqdo guud ahaanba beelihiii

Soomaaliyeed oo isku haysta gambarkii madaxtinimada, wuxuuna cutubku ku dhegeysiinayaa maxkamadoodii oo socota si aad qudhaaduba u kala xukmiso.

Cutubka Lixaad isagu waxa uu la baxay magac laga yara anfariirayo, hase ahaatee waaqiciga ayaa ah in uu la baxo oo waxa ay taasi ka waramaysaa dareenno jira, laakiin uurjiifto aan laga waramin ah. sidaa awgeed cutubkani waxa uu kuu kala saarayaa macnaha qabiil iyo qaran, wuxuuna kuu soo ban dhigayaa xaqiiqadii ka jirtay nidaamkii Barre ee fidnadu ka kacday. Waxa kale oo uu cutubku fasir kooban oo kaafi ah kaa siinayaa macnaha dawlad.

Wuxuuna cutubkani kugu barayaa culuuntaas dawladnimo iyo nidaamkaas siyaasadeed, dhacdooyinka aad ka daba tagi karto iyo cilmi Islaami ah oo indhaha kuu sii kala furaya, kaas oo uu mar walba garab socdo cilmiga kale ee casriga ihina.

Cutubka Todobaad isagu waxa uu la gooni noqday qeexitaanka dagaalka iyo arimaha la xiriira ee sababa. Waxa uuna dagaalka uga waramayaa si niyad dhisad iyo sabirsiin ku qotonta, isaga oo tilmaamaya in uu haddii lagu wax qaatana barwaaqo horseedayo, haddii loo dhegooleeyana uu hoog iyo halaag sababayo. Haddaba waxaa ka mid ah waxyaalaha uu kaga waramayo; macnaynta dagaalka, is difaacidda, faa'iidooyin uu dagaalku dhalin karo iyo horumarino laga dhaxlo intaba.

Labada Cutub ee sideedaad iyo sagaalaad iyaguna waxa ay marka hore macno kooban oo kaafiya kaa siinayaan, waxa la yiraahdo dawladnimo, siyaasad, madaxweynenimo, iyo waxyaalo kale oo iyaga ku lifaaqan. ka dibna waxa ay si gaaban u falanqaynayaan waxa ay tahjay Soomaalidu, guud ahaanna waxa uu fatashayaa halka iyo sida ay ku yimaadeen qabiillada Soomaalidu, isaga oo uga soo haraya meel fog, kuna tilmaamaya been hawaasnimo ku askunsan huf iyo been. Waxaa Cutubkaan lagu taabanayaa qabiil kaste oo ka mid ah qolooyinka ay sheegtaan dadka Soomaaliyeed.

Ugu dambaystii Cutubka ugu dambeeyaa waxa uu soo afxeerayaa doodihii iyo wararkii qubanaha ahaa ee daba iyo dacal soo hufayey buuggu, isaga oo leh; Waar haddaba maxaa inoo dan ah? halkee bay talo nagula abaaran tahay? iyo maxaa xal inoo ah?.

War iyo dhammaantiis, akhristow waxa aan kuu rajaynayaa in haddii aad buugaan si degenaan iyo xasilooni ku dheehan tahay ku akhrisid aad ka

kororsanayso in badan oo caqli, cilmi, macluumaad, talo, tusaale, waano iyo wacdi isugu jirta. Laakiin waa goorma ayey su'aali tahay marka aad ka faa'iidaysanayso? jawaabteeduna waxa ay ku gaaban tahay; Waa marka aad u akhriso si ka dheer Caro iyo is qaad qaad, xanaaq iyo cuqdad, xumaan qod qod iyo qola qolaysi, iwm. Sidaa darteed waxa aan kaa codsanayaa in si kaste ee uu kaaga xanaajiyo akhriska kitaabkani aadan is ciil kaambin ee u sii sabirtid dhamaynta akhriskiisa xiisaha leh.

Waxaan Allaha wax walba xukunkooda haysta ka baryahayaa in uu shuqulkaan ka dhigo mid aan fasahaad dhalin, balse ka soo horjeedka dhaliya nabad iyo caano lagu naashoodo tan iyo maalinta ugu dambaysa dunida ee la isugu aruurayo xagga Eebbe weyne.

Waxaa qoray, allifay, isku duba riday, xuquuqdiisa oo dhamina ay u noqonaysaa:

M.A: QAASIM XIRSI FAARAX.
(DUULLAAN-JECEL).

## Cutubka Koowaad.

## KEENNEE GAR DARAN? WARAYSIYO DADBAN

Mar aan marti qaaday dhawr nin oo ka kala socda qabiilooyinka Soomaaliyeed, qado ka dibna aan gooni gooni iyo guud ahaanba ugala sheekaystay xalladda murugsan ee dalka, iyadoo iyaguna ay dhexdooda is weydaarsanyeen doodo furnaa ku saabsanaa isla arrinta, nimankaas oo aan ku kala qiyaasayey inay ka mid yihiin kuwa ugu wax garadsan marka loo eego sida ay Soomaalidu u taqaan wax garadnimo ayuu si dadban oo aan toos ahayn.

Laakiin hadal qalbi ka soo go'ay ah mid walba iigu caddeeyey fikraddiisa sida uu ugu arko inay qoladiisu xaq ugu leedahay in ay iyagu ka taliyaan dalka taasoo macneheedu yahay ninkii hela jagada

madaxweynenimada qoladiisu waa kuwa ka taliya dalka marka loo eego rumaysadka Soomaalida.

Hadaba waxaa naxdin iyo uur ku taallo igu noqotay markay boqolkiiba boqol is waafaqeen, haba is ku khilaafeen hab asluubeedkee fikirkii iyo ictiqaadkii ay qabeen odayaashaasi iyo kay qabeen caamadoodu,

Taas oo ah sababta ku keenaysa in ay qola walba qorigeeda deegta u ridato oo raadsato xuquuq ka maqan iyadoo isku tilmaamaysa mujaahidiin xaq ku dirir ah oo gurigoodii daad ugu soo galay, kuwa ka soo horjeedana ku tilmaamaysa mutamaridiin mutaystay in lagu jihaado oo Ilaahayna ku caasiyoobay ardigana fasahaadinaya.

Si kastaba arintu ha ahaatee anoo garta soo aruurinaya ayaan qola walba doodoodii ku soo gaabiyey sidatan soo socota, haddaba gargoynta xaajadani waxay u taallaa ummadda Soomaaliyeed ee dhibanaha ah, sidaa darteed akhristow garo keennee gar leh keenneese gardaran?.

## HANA LOO GAR NAQO

**Iidoor:**

waxaanu nahay dadkii Soomaalidaba u horseeday ilbaxnimada, calankii iyo xorriyaddii ugu horaysayna inagaa helnay, daacadnimo iyo soomaalinimo nagu jirta awgeedna intaan calankeennii la soo orodnay ayaan koonfurey idiin keenay idinkuna darsanay oo weliba idin siinay Madaxweynenimadii, magaala madaxdii, maamulkii, iyo wax kastoo dawladi lahaan jirtayba idinkoo weliba nagaga dambeeyey gumaysi iyo badawnimo.

Waxaase naxdin iyo muruga leh in taa naloo kaga abaal guday xabbad, xasuuq, dhac, boob, kufsi iyo kala cayrin, tiiyoo aysan Koonfuri noola kala harin, waar miyeynan ahayn in maanta nala ku maslexeeyo madaxweynenimo.

**Ogaadeen:**

waddankani la guban maayo waxaan ahayn xaq darrada iyo inkaarta nala ka galay, waxaannu nahay dadka mar

walba u heellan difaaca iyo waardiyaha dalka, maadaama aan ku hareersanahay dalkoo dhan oon dacallada ku hayno waddamada deriska nala ah ee ay cilaaqda aan go'ini na dhex taal, waxaa lagama maarmaan ah inay xabbad kastaa inaga na soo ballayso.

Tan kale waxaan nahay qabiilka ugu faraha weyn qabiilada marka la isku kaaya daro sidaa darteed tiradeenu waxay leedahay tayo wacan oo dhan walbaan dalka ka dhisnaa. taa keliya maahee waxaanba nahay dadkii Soomaaliba aabbaha u ahaaye soo saaray, Sayid Maxa'd buu ahaa ninkii ugu horeey ee laga maqlo magac Soomaali weyn,

Nasiib darrase waxay noqotay in kolkii la gaaray mira dhalkii jihaadkiisii loo weeciyey faa'iidadii reer kale oon shaqaysan. eegga waxa keliya ee meejatani ku degi kartaa iyadoo inaga nala ku xaal mariyo madaxweynenimada.

**Majeerteen:**

Nimanyohow waxaa la yiri; caada la gooyaa cara allay leedahay, caalim taladiisoo la diidana taraan turo ma hurto, haddaan ninaan talin jirin taliyana nimaam tagi jirin baa taga. waxaannu nahay dadka Soomaali ugu tacliinta badan uguna ilbaxnimada dheer,

Soomaali ma aqoon xukun tawrad, iyo maamul aanaan anagu wadin, SYL, kuwii dalka xoreeyeyna innaga unbay ahaayeen, bal u fiirasda oo soo hela qiimo ay Soomaali gaartay oo aan Majeerteen hormuud ka ahayn. waxaan hagaajina mooyee waxaan hallaynana lama arag,

Waxaase naxdin lama filaan ah noqotay markii inta nala ka boobay xilkii aan sharafta ku haynay, nala xumeeyey halkii naloo kaga kaalmayn lahaa gudashada xilkaas aan ummadda u haynay.

Waxaase taas oo dhan ka sii daran anaga oo ahayn mucaarad ku kaca ina Siyad Barre kuwii ugu horeeyey uguna awoodda badnaa ee taba baray mucaaradadii ka dambeeyey oo dhan ayaa halkii la rabay in nala ku sharfo taliska nala ku gubay guri kastoo aan ku jirnay sida Gaal-kacyo, Kismayo iyo Xamar siiba C/casiis. Haddaba, war miyeynan ahayn in lana ku qanciyo madaxweynenimo.

**Mareexaan:**

Soomaali weyney ma arintu ahayd ninkii taliya qoladiisaa talisa, mise arintu ahayd nin walba wuxuu galabsado ha laga gudo?.

Hadday tahay ninkii taliya reerkiisaa taliya; Anagay ahaayeen kuwii Soomaali magac iyo sharaf u yeelay gude iyo dibadba, kana dhisay dhan walba hadday tahay xag ilbaxnimo iyo h/mar dhaqaalaba, waxaanan ku baaqnay sinaan iyo cadaalad cid walba gaarta oon horay loo arag. waxaan duugnay qabyaaladdii, waxaan qornay Afkii hooyo, waxaan ka dhignay wadanka mid qiima ka leh sokeeyaha iyo shisheeyahaba agtooda,

Wuxuu wadanku gaaray inuu helo quwada ugu saraysa Afrika isagoon weli qaan gaarin, waxaan ku guulaysanay barnaamijyo badan oo mira dhalay sida; dejintii danwadaagaha, garaash boora garaam, (crash programs), iskaa wax uqabso, Aasiddii qabyaaladda, iyo malaayiin kale oo wada malab ah, waxaana u daliil ah taas waxa dhacay dabadeed.

Haddayse arintu tahay waxaa amaanan ama eedaysan dawladdii talinaysay, anagu waxaan ahayn cidda ugu dulman uguna dullaysan dalka waxaana kuu daliil ah deegaankeena iyo dadkeena oo maanta weli ku jooga halkay somalida kale ku joogeen 69 kii, eeg; (Muslin iyo Marexan miyaa?),

Waxaana taa noo wehliya in ay Soomaaliyoo dhami isugu kaaya tagtay, bal eeg markii naloo kugu tashaday gurigii Djabuti sannadkii 1991 kii, oo bal car sheega qabiil aan nala dagaallamin iyo sanad keliya oo aan dagaal ka nasanay. War bal qoodhiin iyo xeradiin miyeysan gar ahayn in maanta nala ku maslaxeeyo madaxweynenimo.

**H/gidir:**

Waxaan wax ku lahayn xornimo dhalintii, xusuuso C/llahi Ciise iwm. Waxaanu nahay kuwii ku guulaystay saaritaankii Ina Siyaad iyo dadkiisii naf iyo maal badan baana taas nooga baxday. Waxaan tanya tii ku soo jirnay gumaysi Daarood, marna ma illoobi karno tii; Cali yusuf, Keenadiid, Sayid maxamed, Maxemed Siyaad iyo kuwa kaleba.

Waxaan qayb libaax ka qaadanay dhismaha dalka ee dhan walba leh. waxaan nahay lambar fara badan oo lagu hilmaamay duur qaraxa. Tan kale ummadda Ilaahay ninba marbuu taliyaa oo la raacaaye maa anagana kalkeena lana raaco oo nala ka war sugo? waxaasoo dhan iyo wixii naf naga go'ayba marka la isku daro, Ilaahay ka cabsadee ma waysan ahayn in lana ku raalli geliyo madaxweynenimo.

**Abgaal:**

Niman yohow lama arag lamana maqal  cid inta gurgeeda loogu yimaado lagu xukumee, bal aashiina, ha noqonina marti dulum waddee, midda kale unukuba dhismaha waddanka waqti kastaba waxaan ku lahayn, bal xusuuso G/Da'ud iwm.

Warkuse wuxuu ku dhan yahay anugu goofkeyga anaa ka taliya ha la guugu taliyana yeeli maa, hadaba maslaxo waxay ku imaa kartaa ayadoo marti edeb qabta la noqdo oo aniga la iiga leexdo wixii ah madaxweynenimo.

**Raxan-weyn:**

Waxa dhan oo wadanku la degi la'yahay oo meel walba cadaabku noogaga shidmayaa waa inkaarta ka timid xaq darrada nala ka galayo, Soomaaliyoo dhami anagay dulsaar nagu yihiin oo ma lahan wax ila dhaqaale ah oon ka ahayn badarkeena iyo biyeheena,

Waxaana awal naloo kaga qaadan jiray si gumaysi dadban ah oo caqligaa nala ka haystay haddoon soo toosnayna waxaa nala ku marinayaa qori caaradiis, oo waxay isku haysataan Hawiye iyo Daaroodba waa kala bililiqaysiga dhulkeenna, sidaasayna nooga dhigteen waddo halaqya mareen oo ay marba dhan isugu cayrsadaan.

Dalkeena iyo dadkeenuba waa kuwa ugu weyn ee waddanka isla markaasna ugu faaiidada badan, xagga barwaaqada keliya maahee waxaan kaloo nahay xudunta Diinta iyo cilmi raacashada. Si kastaba ha ahaatee Soomaali anaga la'aanteen ma jiri karto waxaanan nahay kuwa aan la aaminsanayn inay jiraanba. Hadaba Ilaahay haddii laga cabsado sow Ilaah dadkiisa isku si uma

abuurin ? oo sow inay xisaab iyo aakhiro dambayso lama oga maa nala ku sharfo madaxweynenimo.

Taasi waxa ay ku timid waraysi aan u qasday oo aan arintaan ku xog barayey, laakiin bal aan fiiriyo kuwa aanan u qasdin ee igu soo gaaray sida dheg duulka ah. kuwaas oo ay ka mid ahaayeen tii aan ka faa'iidaystay mar aan aniga iyo koox saaxiibaday ah, kana kala yimid qabiillo kala duwan aan ku xifaaltanay miiskii aan ku shaah cabbaynay. Waxa aan isku soo hadal qaadnay, sida caadiga ahayd ee aan badanaaba ka doodi jirnay, arinta murugsan ee Soomaaliya. Markaa ayuu mid walbaaba kelmado kaftan iyo yool baar isugu jira tuurtay, saa waxaa ka mid ahaa hadaladoodii oo ay kulligood ku soo gaban gabeeyeen in uu qabiilka Marreexaanku keenay fidnada oo dhan iyaga oo leh; kulli fidno cinda Marreexaan.

1- Kii **Abgaal:** Anaga waxaa waddankeenii naga bara kacshay oo jabkaan oo dhan inoo keenay Marreexaan, sababtuna waxa ay tahay; anaga iyo H/gidir isma aqoonin, ismana arki lahayn ee waxaa noo keenay Marrexaan oo soo dejiyey dalkeennii.

2- Kii **Majeerteen**: Anaga iyo Daarood oo dhanba waxaa jebiyey Marrexaan, oo waxa ay nagusoo faruureen H/gidirtii aan Hangoolka adag isaga haynay.

3- Kii **Reer Xamar:** Horta inkastoo ay nimankaan aad Mareexaanka iyo H/gidirta ku kala sheegaysaan iyaga oo is bursanooya naga soo galeen gobolada dhexe, kadibna ay guryeheenii dumiyeen, anigu waxaan aaminsanahay in ay cidahani is leeyihiin oo ay anaga uun noo heshiiyeen. Tusaale; markii ay Daaroodku ka carareen Muqdisho, haddii ay hawiayaha kale soo qabtaan qof Marreexaan ah, waxaa isku dhejin jiray qof H/gidir ah oo dhahaayey; waa abtigey, walaashey, iwm ee car yaa taabta. Hawiyaha kalena waxay isku kalifaayeen sidii ay qof Marrexaan ku soo qaba lahaayeen, sababtoo ah waxaa laga dhaadhiciyey in iyaga aad loogu dhaarsanaa.

## INTA AAN QABIIL KU DOONAYN

Caata qaatayaasha qabiil ku dirirka ah waxaa iyaguna garab socda kooxo kale oo fara badan, kuwaas oo kulligood u wada malabsanaya madaxweyne Soomaaliyeed, ha ku dooneen si qaldan ama si toosane horta qola walba waxa ay naf iyo maalba u huraysaa sidii mar uun loogu magacaabi lahaa madaxweyne, waxaanan kuwaas kale u kala saaraynaa sidatan soo socota;

Kuwa ka dhashay qolooyin taag daran, iyo kuwa aan garanayn meel ay isku xisaabiyaan iyaga qudhoodu ma ahan kuwa sabirsan ee waxa ay ku adkaysanayaan sidatan: Ma intiinaasaa ummaddu maxaad hadalka isugu cel-celinaysaan keligiin? ma ogtihiin inaad intiinuba geel jirayaal reer baadiye ah tihiin? oo aadnaan waxba ka aqoon xukun iyo dawladnimaba?

War niman yohow warkaas intaad u kaadisaan ood bani aadminimada dhawrtaan dadka kale fursad siiya oo weliba idinku waxna ma taraysaan mana heshiinaysaan ee fadlan na dhaafa. Sidoo kale la garay inaad gumaysi doon tihiin weligiinna aadnaan waxba wanaajinayne maruun bal noo daaya madaxweynenimada.

Aqoon yahnka fayow; War bal suga heedhee arintu saad u malayseen maahoo meesha dhaxal lagu qaybsan mahayee wuxu waa dawladnimo, oo waxaa keliya oo hogaaminteeda xaq uyeelan kara ninkii ka bixi kara xil gudashadeeda, kaas oo ay qasab tahay in uu soo buuxiyo dhammaanba shuruudaha u dhigan ee lagama maarmaanka u ah.

Markaas ka dibna waa in uu u soo banbaxaa doorasho dimoqraadi ah tiiyoo aan lagu xulanayn in uu yahay reer hebel ee lagu xulanayo allaylehe waa leeyahay aqoonteeda, hadday tahay xag arimo dibad iyo arima gudaba iyo hadday tahay xag mustaqbal iyo xag waqti taaganba. Sidaas darteed war annaga unbaa hawlahaas naqaane nooga hara madaxweynenimada.

Culima'udiinka fayow; Walaalayaalow waxa na haystaa waa ciqaab Alle oo ka ratibmay dunuubtaan galnay iyo sidaan u dayacnay ku dhaqanka diinteena ee aan dhaqso

ugu noqono kitaabka Eebbe, oon ka qaadano xukunka isaga uun, waayo waa inagaas la' xal kale, ee yeynaan ku sii jirin iska indha tirka xalka cad ee Alle na tusay (nasiib darro iyagu uma bisla inay mideeyaan maamul adduun iyo mid aakhiro) sidaasayna ku rabaan madaxweynenimo.

Si kale marka loo qoro hadalka waxa ay dad badani arkaan in tan aan la degi la'nahay ay tahay sida soo socota;

1- Qaran dumis Iidoor.

2- Qab weyni Harti, iyo munaafaqnimo Majeerteen.

3- Quudhsi Mareexaan.

4- Qalalaaso Ogaadeen.

5- Qamuunyo Hawiye.

6- Qur'aan quudhsi Shiikhaaleed.

7- Surin gooya Xawaadle.

8- Guraabaas Raxan weyn.

## JAWAABO RUNTA LAGU TAABTAY

Haddaan isku soo duuduubno aragtiyadii habawsan ee ay qola walbaa isku qanciso iskuna garsiinayso, waxaan waraysiyi aan arinta ugu kuur galayo la kala yeeshay kuwii aan un arkay in ay yihiin wax garadyadii ka kala socday labadii kooxeed ee fidnadu ka kacday bilowgii Muqdisho, waxaana ka mid ahaa su'aalihii aan labadooda kala weydiiyey;

S. aqoonyahankii Hawiyow maxaa idinku kallifaya dagaalkaan aad abaabulaysaan ee aan ka fiirsiga lahayn?
J. xaqeenii baa nalaka duudsiiyey, waana lana laayey oo dhulkeenii iyo hantideeniiba nala ka dhacay.

S. laakiin maxaa deegaanada wax ka dhacayaan qudhooda ku keenay in ay isku hawlaan jidgooyada iyo jabhadaynta dad laynta ku dhisan ka hor intaysan imaanin arintu dawlad iyo dadweyne, sow taasi nama tusinayso in ay iyagu damceen xukun uun?
J. oo xukunka cidda haysa ma qori baa ugu dhacay tan iyo waagii Wiil waal?

S. horta wixii horeeyey oo dhan naga daa ee aan ka hadalno waaqica maanta yaalla, waxaanan anigu arkayaa in maanta iyada oo balaayo aad intaa isla buustaani aysan meesha oollin aad idinku fidnooyin hor leh kicinaysaan, kuwaas oo laga yaabo in ay dadka dib ugu celiyaan dhaqan baadiyoodkii iyo jaahiliyaddii laga soo galab carraabay.
J. war sow adiga arka ma ahan sida aan Muqdisho keliya ugu dullaysan nahay oo aan ugu jirno faqriga iyo tabar darraysiga?

Intaas ka dib saaxiibkeygii aan qaraaba hoosaadkana ahayn waxaan isla galnay in aanu isla xisaabino waxa aan ka ognahay miisaaniyadda dawladda, taas oo uu isagu iigaga xog ogaalsanaa, maadaama uu ahaa mas'uul sare oo haya sirta dawladda,

Waxaanan falanqayn ka dib is tusinay nolosha Tujaarta sare ee Hawiye, tan madaxda sre ee Hawiye, Daaraha Muqdisho ee ay dhawaan ragga Hawiyaha ihi ku dhisteen sida aan la caddayn karin iwm, waxaanan la barbar dhignay nolosha dhawr qabiil oo kale. Sidaa darteed waxa uu saaxiibkey hadalkiisii ku soo afjaray;

J. Dhab ahaantii wax naga maqan oo nolol iyo xornimo ihi ma jiraan, waxaase nala kala daba hari waayey Hawiye wax ma xukumi karo, iyo kelmado kale oo wada yasitaan ah ayna caadaysteen reeraha xukunka hayaa. Sidaa darteed waa in aan kelmaddaas reebnaa oo is xoraynaa annaga oo Daarood tabartooda tusinayna.

Intaas ka dib waxa aan waraysi kale la yeeshay oday aan u arkayey in uu ka mid yahay kuwa ugu waaya aragsan uguna aqoonta roon odayaasha Daaroodka, waxaanan weydiiyey;

S. Maxaad ugu diidan tihiin xukunka sow iyagu xaq kuma lahan?
J. war nin war haya ma aad tihid ee nimankani xukun kuma haboona mana astaahilaan.

S. oo maxaa dhacay ee ay u astaahil la'yihiin?

J. sababta oo ah ma lahan shucuur wadaninimo iyo xornimo oo waxaa laga yaabaa in ay dalka gacanta u geliyaan gumayste.

S. Maxaad ku caddaynaysaa arintaas?
J. Taariikh ahaana waxaa u jirta in Daaroodku ay weligood dhisayeen dhulka, hawiyena weligood burburinayey oo gumaysi u adeeg ahaa.

S. ma iigu faahfaahin kartaa warkaaga tusaaleyaal iyo caddaymo la taaban karo/
J. Haa, waxaa Soomaali u kacay Halgamayaal fara badan oo heer sare wada gaarsiiyey dalka xag dhaqaale iyo cududba, kulligoodna waxay ahaayeen Daarood, waxaana wada jebiyey Hawiye.

S. wax ma iiga sheegi kartaa halgamayaashaas aad sheegayso?
J. Haa, waxaa ugu horeeyey Axmed Gurey oo ka dhigay Soomaaliya cududa looga cabsado geeska Afrika, waxaana ugu dambeeyey Cali Yusuf oo ka dhigay Soomaaliya dawladdii ugu horeysay ee Afrika qori iyo rasaas ku yeelata, xagga dhaqaalahana waxaad haddaba arki kartaa in Shillinka Soomaaligu uu ahaa kan keliya ee looga adeegto
guud ahaanba Afrika.

Ka dib markii ay wixii la shirqoolayey qarxeen ama ha laga guul gaaro ama ha lagu fashalmee waxaa ii cadaatay in ay soo if baxday cillad ka daran tii markii hore eelka kicisay ee ahayd is yasidda iyo is xoraynta.

Cilladdaas oo aan dareemayo in aanay maanta dadka intooda badani dareemin waxa ay tahay baqdin ay qola walbaa ka baqayso in laga aarsado iyada oo xusuusan intii ay dambi gashay.

Sidaa awgeed ay cid waliba go'aansatay ama tali ama tiran, waayo marka ugu horaysa ee aad is dhiibto ayaa dabaadigaaga u dambaysa oo reer hebel oo fursad idiin helay hilbihiinna unbay kidfayaan, oo halkaa unbaa kadabkiin ku ko'i.

## YAA ISKU KEEN GUBAYA?

Marka aan dhan kale ka eegno arinta waxaan laba isku diidaneyn in kulliba qab-qablayaasha dagaalku ay ka mid yihiin mujrimiinta ugu waa weyn ee taariikhda caalamka soo martay tan iyo bilowgii, ayna u xasuuqeen oo mood iyo noolba uga dhawreen ummadda Soomaaliyeed si axmaqnimo ah oon weligeed Bani Aadam loo xumayn.

Hadaba arintaas ayey Soomaalidu, inkastoo ay isku raacsan yihiin guud ahaan, Haddana ay isaga khilaafsan yihiin xagga dambi kala badsashada oo waxaa la arkaa in ay qola walba yara dahirto kooda (waa inta yara fayow ee burcadda lagu adeegtaa kumaba sii jirto),

Laakiin iyada oo ay taasi iska caddahay ayaa waxaa haddana lama huraan ah in aan qalbiga laga saarin in ay meesha ay ku jiraan quwada shisheeye, oo naf iyo maalba u hura sidii ay ku burburin lahaayeen dalkeenna, Kuwaas oo ay ushooda koowaadi tahay qabqablayaasha dagaalka, waxaa mudan in aan hal ama laba tusaale u soo qaato waxaan goob joog u ahaa ee ka midka ahaa gurmadkii loogu jiray riditaankii dawladdii Siyaad Barre, iyo shiditaankii fidnada weli maanta taagan ee dami la', waxaana ka mid ahaa waxyaalihii aan xaadiray;

Waxaan shaqo weydiistay nin saaxiibkey ahaa oo u dhashay Maraykan, 1984 kii. Markaa ayuu iigeeyey dhawr nin oo dhawaan timid dalka, waxaana la iiga dhigay shaqo in aan baro Qabaa'ilka Soomaaliyeed, laakiin nasiib darro waxaan arkay nimankii oo wax badan iga badiya Qabiilka Soomaalida, sidaa darteed waxaa la ii sheegay in aanan ka bixi karin shaqadatan.

Laakiin mar kale ayaan ka sii raajiciyey shaqo waxayna ugu dambaystii iga ogolaadeen in aan baro Af Soomaaliga oo ay qudhiisa si rasmi ah ugu hadlayeen, ugu dambaystiina waxaan garawsaday in ay nimankaasi u yimaadeen fulinta hawlaha isku dirka Soomaalida oo keli ah.

Maalin kale aniga, wiil iyo gabar Soomaaliyeed ayaa ka mid ahayn koox dad ah oo ay dood aan caadi ahayni ku dhex maraysay Golihii dhaqanka Faransiiska ee Muqdisho, 1987 kii, waxaanan ka doodaynay dhaqaalaha Afrika.

Haddaba Goergy oo ahaa ninkii xukumay golahaas ayaa wuxuu soo jeediyey fikrad uu ku caddeeyey in ay tahay caqabadda keli ah oo hortaagan dhaqaalaha Soomaaliya, hal qabiil oo xukuma dhammaanba dhaqaalaha iyo dhaqdhaqaaqa waddanka awgeed, wuxuuna tusaale noogu soo qaatay Soomaaliya oo ay xukumaan Mareexaan, kuwaas oo lagu amaanay beryo dhaw in ay dadka Sacuudiya ka soo shaqaystay u ogolaadeen wadashada nooca baabuurta la yiraaho XL,

Kolkaa ayaa waxaa hadalkiisii aad u ayiday kooxo kale oo ajnabi ah, laakiin markay arkeen intanadii Soomaalida ahayd oo ka biya diidan sheekada aanaan u hayn wax aan ku rumayno ayuu mid la soo booday waxaa laga yaabaa in aadnaan idinku fahmin siyaasaddaas sare ee bal miyaad weligiin aragteen qof aan Mareexaan ahayn oo wata baabuurka Land cruiser?,

Nasiib darrase waxay dhacday markaan dhexdeenii taa isku khilaafnay oo uu wiilkiina yiri; waa runtiin, aniga iyo gabadhiina aan beenaynay, laakiin sidaas na laku marsiiyey cod badni iyo nahaabnimo dirqis ah awgeed.

Hase ahaatee waxaa kale oo iyana taas la yaabkeeda iigaga sii daraysay in aniga oo la igu sheegayey Mareexaan (aanse halkaa la iga ogeyn) ay marka horeba maskaxdaydu marba dhan u baxaysay.

Waxa iigu weyn ee aan ka fikirayeyna ay ahayd dhibaatooyin badan oo iga soo gaarayey xukunkii jiray, kuwaas oo intooda badani ay kolkaa igu furnaayeen oo aan xal u doon doonayey, iyada oo guud ahaanba xaqayga iyo xaqa reerkeyga oo dhan lagu dhacayey laaluush dhiib inaguna aanaan haysan wax aan laaluush u dhiibno si aan xaqeenna u soo celsano.

Waxay kale oo ahayd middii fikirka kale ee laba qalbiga ah igu haysay in aan isla saacaddaas ku wel welsanaa in aan toban shilin oo aan ammintaas haystay biyo ku

cabbo, maadaama ay dadka oo dhami wax cabbayeen anna aan harraadsanaa iyo in aan Bas ku raaco iyo weliba in aanan Basna raacin, biyana cabbin ee aan berrito Bas ku raaco.

## KUWA INOO EEDAYSAN

Si kastaba arintu ha ahaatee waa in aannu imminka wax ka falanqaynaa, dambiyada ay eedaysanayaasha ama qabqablayaasha dagaalku ka galeen dalka iyo dadka.

Haddaba si aan arintaa ugu dhaba galo ayaan in badan waraysiyo aan caadi ahayn la kala yeeshay ashkhaas fara badan oo ka kala mid ah kooxaha is haya waxaanan ku soo aruuriyey anoo isticmaalaya qiyaas tira koobeed (sample statistics) fikradahoodii in ay mujrimiintu sidatan u kala dambi badsadeen soo socota;

1. Dambiilaha koowaad ee Soomaali cunay waa Caydiid. Wuxuu dilay oo qudha ka jaray hal malyan ku dhawaad u badan Soomaali, isagoo ku kala dilay; xabbad, gaajo, cudur, naxdin, shil iyo bahal cuna oo buu isagu uloogay, taasoo ay kaga cabirayeen in loo haysto isaga habartii iyadoo sakaraad ah ka qaxday Muqdisha ee dhex silic noocuu doonaba ha ahaadee ugu dhimatay,

Taas oo hadana macneheedu yahay in alla iyo intii aan si caadi ah ugu dhiman gudaha iyo dibadda dalka ee loo arkay in uu ku dadaalay soona dedejiyey sababta dhimashadooda tan iyo waaguu dagaalka bilaabay.

Waxaana markaas lagu qiyaasayaa taas qiyaastii tirakoobeed ee lagu qiyaasayey dhimashada iyo dhalashada (*mortality amd fertality*) dalka.

2. C/llaahi Yusuf oo ah fidnoolihii na fahamsiiyey fidnadaba. Ninkani waa dambiilaha ka dambeeya daadashadii dhiiggii ugu qaalisanaa, iyo xasuuqii ugu murugada badnaa ee sababay in ay wiil iyo aabihiina is gawracaan, hooyo iyo inanteediina is gawracaan. Dambiilahan oo ah kan mar walba isku taxalujiya sidii uu u hurgumin lahaa boogaha bagsan lahaa, waxa uu

nafta isaga qaadaa dalka iyo dadkana Xabashi uga gataa si uu mar uun madaxweyne u noqdo.

3. Dambiile Caato (cadaabta Allaha geeyee) oo ah ninka kaligiis rartay oo bililiqaystay dhammaanba hantidii dalka tiillay hadday tahay mid guud iyo mid gaar intaba, ka dibna ku soo gaday hub oo ku maal geliyey si loogu gumaado marrasta iyo maatada, hantidii cadaydna aan uga harine hadana xaabsaday guud ahaanba kheyraadkii berri iyo badba bilkaxnaa, welina u sii bisin bisyoonaya.

5- Moorgan oo ah wiilka ku ababay xasuuqa maatada, ahna kii gubay Waqooyiga Somaaliya, hadana weli la taagan dabkiisii.

6- ina Jees oo ah mid caqligiisu ku shaqeeyo istiinka uu khamrigiisu tusiyo iyo dubaabka uu qaadku tusiyo ilaa maantana aan la garanayn hadafkiisa, isla markaana dhan walba ka cunay boqolaal ceeb ka saliin ah.

7- Qanyare. Inkastoo dambiilahakan ay dad badani isaga tiriyaan qof qalinka damiga laga kor qaaday, hadana waxaan shaki ku jirin in uusan sharci ahaan taas uga bixi karinin faldambiyeedyadiisa oo lagu soo taago maxkamad cadaaladeed. Qanyare oo ah nin ku khafiifay colaad Daarood, waxaa ku sababay colaadaas cayrintii ay dawladda Kenya ka soo cayrisay dalkeeda si ay amaanka gudeheeda usugto. Halkaas oo uu markaas ka mid noqday Soomaali badan oo ay dawladaasi iska soo gudbisay ka dib markii ay u aragtay in ay dalkooda fasaadinayaan. Waxaa naxdin leh in mujrimkaan oo intuu soo fagtay dhamaan fiilooyinkii korontada, tuubooyinkii biyaha, iyo guud ahaanba agabkii adeeg ee dalka oo ay ugu weyn yihiin Wershadihii, taallooyinkii xasuussed, maacuuntii iyo qalabyadii guri iyo xataa guryihii dawlada iyo kuwii dadweynaha uu weli maanta dalka ku sii beerayo xashiishad badahana ku sii daadinayo sun. mujrimkani marnab ama ogola in Soomaaliya wax nidaam ihi ka askumo oo waxa uu ogyahay inta uu dambi umadda ka galay.

4. Dambiile C/raxmaan Tuur; oo ah ninka aan weligiis faraha kala bixin in uu iska horkeenayo Soomaali, uguna horeeyey kuwii fidna kicintii weyneyd ka sokow laga fariisan waayey, siina qurmiyey carro hor leh

10. Muuse Suudi. Waa oday sidii uu reer baadiye u ahaa ku caqliyeystay boob iyo bililiqo ka dibna dib ka ogaaday in bililiqada lagu gorgortamo si loo gaaro madaxtinimo. Inkastoo uu yahay nin masayray hadana waxa uu ku dadaalaa sidii xumaanta ugula tartami lahaa ragga dhigiisa ah ee fadaroobay. Waxaa intaas u sii dheer dambiilaha in uu mooryaantiisa u kireeyey tuug isku tilmaantay culimo ka dibna u fatwoota mooryaanta in dhaca iyo boobka ay ku jiraan uu yahay jihaad diini ah oo ay ka helayaan ajir iyo xasanaad.

11. Ina Cigaal oo ah kan dabka ku shiday gurigii waqooyi ee dib u cusboonaysiinta lagu hayey, welina ula sii ciil qabay cadaabka aysan kasban rayidkaasi.

. Cumar Xaaji Masalle. Inkastoo uu dambiilahakani la'yahay tabar uu wax ku laayo oo aan weli lahaynin weerar qabiileed uu hogaamiyey hadana waxaa ka muuqata in uu xumaan oog culus yahay. Waxa uu dhib iyo jiir kaste u maray in badan sidii uu xukun ku gaari lahaa. Taasina waxa ay sababtay in colaad oog noqdo.

## XAAJADA INA BARRE

Waxaan door bidayaa in aanan xaajada ina Siyaad Barre halkaan ku falanqayn karin arimo dhawr ah oo jira awgood. Arimahaas oo lama huraan ka dhigaya in eedaha loo hayo ina Siyaad Barre iyo kuwa loo hayo Qabqablayaasha dagaalka ay kala duwan yihiin kalana mudan yihiin, sidaa darteed aysan haboonayn in isku meel looga hadlo ama la isla bar bar dhigo.

Sida ay aniga iigu muuqato dulmar ahaan Maxamed Siyaad waxa uu bilowgii ahaa shakhsi aan la heli karin, si dhab ahaana u kobciyey Soomaaliya intii karaankiis iyo garaadkiis aqooneed ahayd. Hase ahaate khaatumadiisii way xumaatay sababo badan oo aan la dhaafi karin awgood, ayna ugu weyn tahay kelitalinimo ay ku keentay takooridda iyo kali noqoshada kaga timid xagga madaxda dawladda iyo weliba dadweynaha oo keligii saarayey eed walba oo ay habar Daarood ihi gasho.

12. Cali Mahdi oo isagu si waalli iyo nacasnimo ah u qasay xaaladda Muqdisho mar ay degi lahayd, ka dibna

ka dambeeyey dagaalladii Muqdisho ee 1992.kii.iyo kuwii ka sii horeeyey intaba.

Wax kastaba ha ahaatee, waxaan umalaynayaa in la igu wada raacsan yahay fikradda sheegaysa in Maxamad Siyad Barre uu mar hore indhaha saaray oo ay malaha ishii bikaacaysay ee Guulwadayaashu diiradda ku soo qabatay dhammaan mujirimiintaan aan xusnay, marka laga reebo Mr. Yalaxow oo isagu xilligaas reer baadiye ahaa. Haddaba dhab ahaantii isha Guulwaduhu way ducaysnayd. Waxaa is weydiin leh haddii kuwii uu Kacaanku xiray kuwaan ahaayeen sidee ayey ahaayeen kuwii uu toogtayna?.

Haatan anigu waxan is leeyahay malaha dambiga ugu weyn ee uu Barre umadda ka galay waxa uu ahaa in uusan toogan ee bulshada dib ugu soo celiyey ka dib markii uu kuwaan gacanta ku dhigay.

Dhan kale hadaan dooda u dhigno, ma kula tahay akhristow in aan nimankan yeyda ah iyo Barre isku miisaan saarno oo xataa isku bog uga wada hadalno? Waxay ila tahay hadaad taas ku fikirayso in aad rabto in malab iyo dacar isku bakeeri lagu shubo.

Waa la hubaa in qaar badani ay igu diidan yihiin in aan wax wanaag ah inaba haba yaraatee ku sheego Barre, oo waxa ay taagan yihiin in uu bilow iyo dhamaadba nin xun ahaa. Qaar kale oo ka fara badan kana xujooyin culus lagagana kalsooni badnaan karo ayaase waxa ay igu diidan yihiin in aan ku tilmaamo maamulkiisii mid khaatumadii gefay. Sidaa darteed dacwada Max'ed S. Barre waa mid aan lagu falanqayn karin si fudayd iyo deg deg ah, sababtoo ah in ay tahay mid aan weli meel ku salaysnayn oo aan lagu heshiin dambi lagu soo eedeeyo, maxaa yeelay dad badani waxa ay rumaysan yihiin in uu keligiis ka mas'uul yahay dhibka maanta yaalla.

Halkaas ka soo horjeedkeedase dad badanina waxa ay rumaysan yihiin in uu ahaa wadaniga keli ah ee dalka soo maray, kaas oo ay leeyihiin wuxuu nooleeyey jiritaanka Soomaaliyeed oo shaki iyo ciriiri ku jiray, xaaladeeduna ay mid tan la mid ah qarka u saarnayd iyo markuu ka qarsoomay oo ay dhacday lama arag iyo lama maqal awgeed.

Hadana isla kuwa eedaynaya qudhoodu waxay isaga soo horjeedaan sidii ay ugu yeeli lahaayeen dambi ay ku eedeeyaan, oo waxay ku kala eedeeyaan qodobyo aad isaga soo horjeeda iyo kuwa aan eed noqon karin balse iyaga uun danahooda qaldan ka soo horjeeda, kuwaas oo iyaguna isku wada liqdaaran, tusaale;

Markii la weydiiyey Nuurto oo ahayd tan keliya ee dhab ahaan u haysay xogtiisa xagga sharciyada, kol hadday kala shaqaynaysay oo ay ahayd sharci yaqaanka Dawladda in ku dhaw 16 sano, dambiga ugu weyn ee aan lagu cafin karin ee uu dalka ka galay Barre,

Waxay sheegtay in dambiga ugu weynaa ee uu galay ahaa ku dhawaaqiddii uu ku dhawaaqay sinaanta ragga iyo dumarka, "iyada oo u waramaysa si aan innaba haba yaraatee cilmi ku dhisnayn ee la mid ah sidii ay u hadli jireen ari raacatadii hore" oo waxa ay tiri; wuxuu ahaa sharcigaasi mid khilaafsan shareecada iyo qaanuunkaba, (eeg; bogga; 115 aad ee انهيار
سيد احمد خليفة -الصومال.

Laakiin waxa ay ila tahay in haddii Nuurto qodobkaa lagula doodi lahaa ay ceeb iyo nuqsaan la carraabi lahayd, ayna soo if bixi lahayd in loogu jawaab celiyo; Nuurto waxa keliya ee uu tusinayaa hadalkani jaahilnimadaada kaa haysata aqoonta shareecada iyo qaanuunka labadaba, sidaa awgeed haddaan laaxinkaaga kuu toosinno waxaan dhihi karnaa; Nuurtooy:
Dambiga Barre sidaa aad u sheegtay ma ahayn ee wuxuu ahaa keliya in uu adiga iyo kuwa kaala mid ah xagga aqoon darrida uu u dhiibay maamul ka dibna ay jahligoodii qaran dumisnimo ku sababeen, illeen mar hadduu Alle qoon halaag la doono wuxuu madax uga dhigaa jaahiliintooda ee. Hadaba waxaa adiga iyo inta kula midka ah laga rajaynayaa in aad dib isugu noqotaan oo aad dhab u xaqiijisaan cilmiga aad sheegataan.

Sidaa oo kale qoraaga caanka ah ee Dr; Cali Sheekh Axmed ayaa isku shuqliyey in uu soo bandhigo dembiyadii uu galay Barre, waxuuna ku eedeeyey Qoritaankii Afka Soomaaliga ee uu qoray (eeg; bogga; 62-64 aad ee kitaabkiisa; الصومال وجذور الماساة الراهنة

Laakiin sida muuqata arintaas waxa ay u egtahay in Sheik Ali uusan ku eegin il degenaan ka fiirsi dheer leh iyo hab caddaaladeed, maxaa yeelay ma uusan eegin duruufihii waqtigaas taagnaa ee kalifayey in wax uun la qoro ayna ka midka ahaayeen;

1- ku heshiin la'aan habka loo qorayo afka, oo ahaa muran soo taxnaa in ku dhaw hal qarni (1898 kii) eeg (Politics, Language, and Thought The Somali Experience. Bogga; 1- 115), iyo (Katekisemka dabta Kristanka). ee ka soo baxay (Vicariato apostolico-Mogadiscio).

2- baahidii cuslayd ee loo qabay in afka hooyo la qoro.

3- in la heli karay teebka lagu qoro afka Laatiinka ah oo keli ah, ayna yarayd rajada laga qabay helitaan aaladda wax qoraal ee ku diyaarsan AfCarabi.

4- in aan dib loogu taba bari karin Afcarbeed shaqaalihii dawladda oo ku soo tababartay afafka Laatiinka ah.

5- in ay reer Galbeedku dirqinayeen oo maal gelinayeen in hab laatiini ah loo qoro Afka Soomaaliga, Carabina ay warmoog ka ahayd tartanka.

6- in ay Barre iyo dawladdiisuba ahaayeen dad ku soo tababartay tacliin reer Galbeed, oo ka jaahil ah arimo badan.

7- in uu Barre u baxshay tiro culima'u diinkii ilbaxnimada lahaa ah si ay u soo saaraan qoraalka afka. eeg; (Qaamuuska Af Soomaaliga. Bogga 484- 485. iyo bogga 416-418 ee (Politics, Language and Thought).

8- in ay dhawr dhawaaq oo shaqal Soomaali ihi aysan aqbalaynin qoraalka Af Carabiga, taasina ay keenayso in loo baahdo qalab qoris oo ka sii baxsan kan lagu qoro afka Carabiga, taas oo ah tan ay maantaba qawmiyado badani ku dhib qabaan, gaarsiisayna qaarkood in ay iska badelaan hab qoraalkaas oo ay hadda dib u soo bilaabaan qoristii taariikhdoodii iyaga oo dooranaya in ay hab Laatiin wax ku qortaan, waxaaba ka mid ah waddamada ay taasi qabsatay dalka Malaysiya.

Waxaana ka mid ah codadkaas af Soomaaliga ah ee aan marnaba af Carabiga aqbalaynin ( e, o,g,iwm). sidaa darteed la arkay in loogu dhawaaqo xarfaha higaadda sida af Carabiga laakiin loo qoro sida Laatiinka.

9- in laga nabad galo eed ay tirsadaan wadaniyiintii ku muransanaa sidii afka loo qori lahaa oo isugu batay habkaan.

Waxaa kale oo ka mid ah waxyaalaha uu Cali Sheekh ku eedeeyey; Dagaalkii uu ku qaaday Ethiopia, kaas oo uu ka dhigay cilladdiisa, diyaar garow la'aan ka sokow, in uu Ina Barre doonayey in uu dadweynaha ku mashquuliyo dagaalkaas si uu ugu sii helo xukunkiisa muddo dheerayn.

Dhab ahaantiise tani waxa ay u muuqan kartaa qiyaas aan caddaalad lagu eegin, waayo waxaa iska caddayd in dagaalkaasi uu ahaa uun natiijadii dad iyo dawlad xamaasadysan oo si seef la boodnimo ah ugu dhacay weerar aanay ka fiirsan. Haddaba taa iyada ah ma oran karno waxa uu ku yimid niyad munaafaqdeed ee waxa keliya oo aan ku ceebayn karnaa "haddiiba la ceebaynayo" cillado farsamo xumo, oo ay sababtay aqoonta curdunka ah ee ka jirtay guud ahaan dalka.

Sidaa awgeed waxaan hubaa haddii uu Sheekh Cali si caddaalad iyo dulqaad leh uga baaraan dego duruufaha qoraalkaan kalifay ee ku cad kutubta badan ee aan soo xusnay iyo kuwa kale oo fara badnba sida;

محمد محمود أحمد محمدين ـدراسات في الآذب الصومال.
ـسياسات الثقافية
ـممدوح حقي ـالصومال واللغة الصومالية (مقال).

iyo P.XIII - XIX - Hordhaca Qaamuuska Afka Soomaaliga ee Yaasiin Cusmaan Keenadiid. uu u garaabi lahaa ciddii ku soo afjartay murankii aqoonyahanadii Soomaaliyeed ee ku xarig jiitamayey aniga tayda hala qoro iyo aniga tayda hala qoro, xilliga ay baahidaas iyo xasaasiyadaas culusi jirtay war bal wax uun la isku af garan karo ha la qoro.

Sidaa oo kalena uu ku gaabin lahaa aarinta dagaalkii Ethiopia; waxaan qaadnay ol ole xornimo doon, waanan ku guulaysan wynay tabaryaro awgeed, taas oo ay keentay hiilladdii quwadaha shisheeye oo aanaan ku tashanaynin.

Tan kale waxaa haboon in wax kaste aan ka eegno dhanka wanaagga ee aanaan u badan dhanka xunta, sidoo kale in ka eegno arin kaste halka uu ka eegayey

ama ka taagnaa qofka kale, iyo in aysan caro na qaadin, aysana nagu xambaarin caddaalad darro. oo Ilaah baa yiri;

( ياءيها الذين أمنوا كونوا قوامين لله شهداء بالقسط ولايجرمنكم شنأن قوم علي الاتعدلوا اعدلوا هو أقرب) المائدة:8

(Kuwa (xaqa) rumeeyow noqda kuwa u heellan dar Eebbe oo ku marag kaca caddaalad ahaan, yeysanna idinku xambaarin carada qoom inaydaan caddalad falin, ee caddaalad fala iydaa u dhaw dhawrsashada ee, Ilaahayna ka baqa, Ilaah waa ogyahay waxa aad falaysaane) Al-maa'idda; 8.

Mar kale haddii la dhex galo bulshada si looga dhex helo dembiyaddiisii waxaad helaysaa iyada oo dadka intiisa badani ay ka cabanayaan oo leeyihiin waa kii na halaagay, hase ahaatee way adag tahay in aad heshid qof xujjo cad haysta,

Waxaase la arkaa in ay ku hal qabsadaan erayo ay u yeeriyeen Qabqablayaasha dagaalku ama waxyaalo ka hor imaanaya fahamkooda gaaban ee ay ka haystaan dawladnimo, tusaale; dadka qaarkood waxa ay ku eedaynayaan wuu na boqna gooyey oo waxa uu nala simay reer hebelkii naga hooseeyey, dad kale waxa ay ku eedaynayaan xaaraantimayntii Qaadka iwm.

Si kasteba arintu ha ahaatee waxaan shaki ku jirin in uu keligii taliye ahaa, inkastoo uu ku andacoonayey dad aan aamini karo ayaan ila shaqaynayn. Hadana dhab ahaantii shaki kuma jiro in uu ninku dambiyo badan dalka iyo dadkaba ka galay, waxtar uu sheegtaaba ha garab socdee.

Hase ahaatee waxaa war ka joogaa yaa ku eedaynaya dambiyadiisii, yaase warkooda la qabtaa oo run sheegaysa/ maxaase lagu caddayn karaa cid waliba waxa ay sheeganayso. Taas awgeed arinta Ina Barre ma sugna, mana lahan qaab iyo jid loo raaco oo lagaga hadlo.

Sidaa darteed arrinta odagani waxay qoris leedahay markii furaheeda la helo, oo ay Soomaali si isugu raacdo iyaga oo cuskanaya caddaymo la taaban karo, ee aan lahayn ku tiri ku teen iyo naf jeclaysi.

Haddiise ay cid waliba ka qorto sida ay iyada la tahay, iyada oo aan waxna ku caddayn karin waxay taasi dhalinaysaa qaladaadyo laga galo, aadaminimada, Soomaalinimada, Shacabnimada, caddaaladnimada, qoraanimada, iwm.

## DAMBIGA GUUD EE FIDNOOLAYAASHA

Inkastoo ay dambiyada lagu haysto eedaysanayaasha isku soo wada laa laabanayaan hadana waxay dadku ugu kala badinayeen inta uu mid walba ku dadaalay in uu ku guulaysto ficil shareedkiisa iyo sida uu iskugu dayayey in uu cirib tiro cid alle ciddi ka soo horjeedda.

Dambiga ugu weyn ee ka dhexayn kara qab qablayaasha dagaalkana wax uu yahay; Maxay u bilaabeen qaska iyo dagaallada mar haddaysan garanayn sida dawlad loo helo iyo waxa ay dawladi tahay?, waxaa hubaal ah in la wada dareensanaa qaxarkii keligii taliyihii, laakiin waxaa keli ah oo isku dayi karay wax ka qabadkiisa ninka garanaya jidka loo maro helitaanka xal isaga kiisa dhaama.

Tan kale waxaan marnaba muuqan nin u kacay in uu si daacadnimo ah uga badbaadiyo ummadda Soomaaliyeed dhib haysta. ee waxaa mid walba ku cad in ay madaxweynenimo derdertay oo uusan fiyoobayn uuna ka masayray Maxamed Siyaad, uuna hadafkiisa ugu weyni yahay bal mar uun shilin gacanta ku dhig, magacaagana Idaacad uun halaga dhegaysto.

Sidaa uun si la mid ah ayeyna igu raacsiisan yihiin Siyaasiyiin, Indheer garad, Nabad doonno iyo aqoonyahanno badani, waxaa igu filan in aan tusaale u soo qabsado hadallada iyo miisaalada aqoonyahanka Soomaaliyeed ee Xuseen Maxmed Adan, oo ku qoray kitaabka; (Conflict and peace in the horn of Africa, by Peter wood ward and Forsyth), bogga; 120 aad, (Waxay lahaayeen indho Barre lagu rido oo keli ah, laakiin ma lahayn garaad kale oo dawlad lagu dhiso).

Dr; Xuseen wuxuu ku miisaalay fidna walayaashaas dagaalka huriyey sidii; nin intuu soo dhex galey gegi

dayuuradeed, xaday buug ay ku qoran tahay sida dayuuradda loo kiciyo, oo intuu markiiba dayuuraddii gudaha u galay duuliyey, laakiin markuu hawada galay ka dib u baahday in uu soo dejiyo, mise maba yaqaan meel uu ka taabto, buug kale oo u sheegana ka ma soo xadin garoonkii.

Haddii loo eego Sharciga Islaamkana waxaa la helayaa in guud ahaanba dambiilayaashu ay mas'uul ka yihiin dilkii in Alle iyo intii Soomaali ku dhimatay si aan caadi ahayn, tan iyo intuu waddanku kala haaday oo la kala faniinayey, iyo weliba intii dhalan lahayd ee baaqatay iyada oo la cuskanayo tirakoobihii iyo qiyaasihii lagu waday tirada dadka, lana sii eegayo qorshe sanadeedyadii la saadaalinayey ee la xiriiray xagga horumarka dhan walba leh iyo heerarkii dhimasho iyo dhalasho ee la qiyaasayey (fertality anad mortality).

Sidaa si la mid ah Sharciga Adduunkuna waxa uu ku xukumayaa kulliba qabqablayaasha dagaalka in ay ka dambeeyeen dilkii intii Soomaali ku dhimatay sabab aan caadi ahayn, taasoo laga reebayo sababta iyada qudheedaba ay sababeen dagaalladu sida; kan ay Dhilmaanyo ku cuntay halkii uu u qaxay ee loo arkayo in uusan awal tageen halkaas haddii aan kala haadku dhici lahayn.

Sida uu dhigayo Qaanuunka Caalamiga ihi waa; Bajintu waa dilis, marka uu D tusiyo V cadawtinimo iyo guulguul ee uu V iska cararo, uuna ku dhinto xaaladdii cararka ama uu dhaawac ku gaaro inta uu isku dayayey in uu D ka baxsado, waxaa D loo arkayaa Gacan ku dhiigle, waxaana lagu soo eedaynayaa dilkii uu geystay. (C.F.Towers- 1874, 12cox530), (*Criminal Law*), by; Howard 4th edition.

Waxaa kale oo iyaguna dambiilayaashaas la wadaaga eedda cid kaste oo ku caawisay fal dambiyeedkaas ka baxsan aadaminimada ahna kan ugu weyn ee la aqoonsan yahay ilaa hadda, shirkiga ka dib, sharciga Islaamkuna wuu wadaajiyaa xukunka kuwa ku shirkooba fulintiisa; qaade, qarshe, qaban qaabiye, qal qaaliye, qorshe dejiye, qoorta soo qabte, qawl siiye, iyo qale intuba waa isku dambi.

Sidaa si la mid ah ayuuna qorayaa qaanuunka adduunku, wuxuuna tusaalaysanayaa; Hitlerba ma galeen gardarro, kol haddaynan taageerayn ganacsadayaal, siyaasiyiin, hogaamiyeyaal, kaaba qabiillo iwm. eeg; (Supra, notes 36, at 364-5 (*Principle one and Commentary*).

Waxa uuba sharcigu eedaynayaa kii intuu arkay naf go'aysa aan isku taxalujin bad baadinteeda ee hortii uga dhaqaaqay, Waxaana tan lagu yiraahdaa qaanuunka caalmaiga ah af qalaad ahaan (action and inaction ama doing and allowing), oo waxa ay la mid tahay qaade iyo qarshe.

Qoraa ahaan mawqifka aan arintan ka taaganahay waxa uu yahay is la sida ay dad badan oo walaaladey ihi ay ka taagan yihiin oo ah;

Eedaysanayaashu waa dambiilayaal aan dacwadooda xukun u go'a laga heli karin waqtigan dunida, maxaa yeelay haddii la dilana weli lama goyn tii ay galeen oo malaayiin naf baa weli xaqoodii ku sii harayaa, haddii mag laga qaadi lahaana shey xalaal ah oo ay haystaan baan jirin, sidaa awgeed waxaan leeyahay ha la isu daayo iyaga iyo abuurahoodii isaga ayaa ka aari doona oo garanaya habka uu uga gudayo xaqqii aadanaha ee.

Marka aan ka eegnase arinta xagga dambiyada la kala galay ee naf iyo hantiba leh, waa hubaal in rux waliba uu farta hoos ka qaniinayo oo uu soo xasuusanayo noocyo hanti oo laga dhacay, ha ahaatoo hanti yar ama mid weyn tay doonta ee, hase ahaato mid guurto ah ama mid aan guurto ahayne, hase ahaato mid muuqata ama mid aan muuqane. Sidoo kale ha ahaato mid shan cad looga qaaday ama mid dayac looga baylihiyeye, guud ahaanba waxa aan laga fursanayn in si rasmi ah la isaga illaawo wixii hanti ah.

Si taa la mid ah, waxaan la hurayn in ruux walbaa uu iska illaawo guud ahaanba intii walad iyo walaal uu waayey. Haddaba taas oo dhami waxa ay lagama maarmaan ka dhigaysaa in la adeegsado sabir iyo calool adkaysi, tiiyoo lagu qancayo in ay taasi haysato ruux kaste oo Soomaali ah, balse ay haysato ruux kaste oo hawlo Soomaali ku lug lahaa.

Xagga hab dhicii dagaalladii ka holcay xarunta dalka, eedeeda lama hayo cid kale oo loo saariyo, keliya fidnoolayaasha ayey eeddu isugu soo aruuraysaa, waxaana hubaal ah in ku kaste oo arkayey kuwii dagaallamayey uusan waxba eedeeyeen iyaga ee uu isku dayi lahaa sidii uu iyaga qudhooda uga badbaadin lahaa silica ay ku noolyihiin, uuna lacnad dusha uga ridi lahaa kuwii soo adeegsaday wax ma garatadaas bahaahinka lagu xisaabi karo oo naftooda iyo nafta dadka kaleba gubay,

Sidaa awgeed laguma qiyaasi karo dagaalkii Muqdisho ka dhacay gaar ahaantiisa mid ay qabiillo isaga hor yimaadeen, mana ahayn dawlad iyo shacab is dagaalay ee keliya waxa uu ahaa; Reer baadiye reer magaal cinqilaabay, markii dambana wuxuu ahaa; tuugo maato boobaysa. mar uu aqoonyahanka weyn ee Soomaaliyeed Shariif Cabdi Nuur oo yimid (six street mosque - Nairobi) ka hadlayey dagaalkaan oo uu goob joog u ahaa ayuu ku sifeeyey caynkaas.

## MAXAA ISKA KEEN HORKEENAYA?

Ummaddeena Soomaaliyeed in kastoo ay yihiin dad dagaalka quuta belwadooda horena ay tahay in la is laayo, hadana waa walaalo, oo midkoodna ma doonayo in uu kan kale dhibo ama uu ka gardarnaado, laakiin dabeecaddaas dagaalka oo ay kala mid yihiin ummado badan oo ay dhaqan iyo dabeecad wadaagaan sida kuwa sidooda oo kale ku nool saxaraha iyo dhulalka kulaylaha ah ee xoolaha lagu raacdo ayaa ku jirta xilli ay is beddelayso oo ay u dillaacayso hab kale iyo weji cusub.

Taasina waxay lama huraan ka dhigaysaa dhaawacyo iyo dhimashooyin dhaca, waxa keliya oo ay taasina tahay isla tabta ay wax walba u leeyihiin xanuun marka ay is beddelayaan, tusaale ilmuhu marka uu saddex bilood ku gaaro uurka hooyadiis wuxuu u dillacaa hab dhismeed dad. laakiin taasi waxay ku keentaa hooyadiis dhibaatooyin badan oo ah jirro culus, sidoo kale marka uu ilig cusubi u soo baxayo ilmaha ama uu ka dhacayo ee uu u soo baxayo mid cusub waxa uu kala kulmaa dhib iyo xanuun, Laakiin taasi waa liibaantiisa,

Haatan sidaa si la mid ah Soomaalidu waxay ka baxaysaa taariikh reer guuraanimo oo waxay gelaysaa mid reer magaalnimo iyo deganaansho, sidaa awgeed waxaa dhacaya waa uun xanuunkii xididadii ilbaxnimo ee u soo baxayey, iyo xuub dillaacsigii darareed.

Inkastoo ay qola walba ka xishooto oo geeri ka xigto in laga adkaado ayna ku faanaan weligeen nala kama rayn. haddana kuma ay dhiiradaan faduusha, tusaale habka ay ugu tarbiyeyaan ilmahooda dagaalka waxaa ka mid ah; marka uu ilmuhu dad gardarraysto waa la xanjafiyaa sida badan, laakiin haddii laga soo adkaadana waa la xanjafiyaa oo weliba aad baa loo canaantaa iyadooba laga yaabo in laga cayrsho guriga, waxaana lagu eedeeyaa sidee buu kaaga adkaan karaa inan kula fac ihi dhiigga Alle kaa siibyee?.

Laakiin taas oo jirta ayeysan marnaba joogin qabiil Soomaaliyeed in ay dagaal kula jiraan qola kale mooyee, taasina waa mid ay sababto deegaanka ay ku nool yihiin iyo xiriirada wada dhaqan ee ka dhexeeya, taas oo ah dhammaanba hab dhaqan dhaqaaleedka dabeecadeed ee ay ku meersan tahay noloshoodu. Waayo qola walba ee Soomaaliyeed waxay ku tallantaa in ay reer hebel ka sarayso, waxayna isku qancisaa in ay ka sareeyaan reer hebel kale,

Taasina waa tan dhalisa in ay kala dhiidhiyaan, oo ay qola waliba ka taxadarayaan wax alla iyo wixii ay u arkaan in ay dhaawacayaan sharaftooda, sidaa darteed waxay qola waliba aruurisaa hadalada uu ku hadlo mid ka mid ah qolada kale ee ay ficiltan dhoocileedka la leeyihiin, dabadeedna dib ayey ugu soo aruuriyaan oraahyadii xifaalada ama jees jeeska ahaa ee uu beri hore nin ku kaftamay, waxayna ugu goodiyaan in ay tahay cuqdad raagtay oo raggeedii iminka u soo kacay, halkaa ayeyna ka abuuraan guluf colaadeed waaya dambe jiitama, unugiisana dib loo waayo,

Sidaa awgeed noqda xarig aan guntintiisii la hayn oo middi lagu gooyo, inta ay colaaddaasi ka dhex taagan tahay labadaas beeloodna waxa ay isla maraan xaaladaha kuwa ugu kharaar oo qola walba qolada kale ayey ku durtaa gaalnimo iyo waxashnimo, laakiin isla marka uu

heshiis rasmi ihi dhex maro waxa ay qola walba qolada kale ku tilmaantaa dadnimo iyo sharaf.

## SIDEE LOOGA GAASHAANTAA FIDNO DAMBE

Haddii aan ka taxadarayno dagaallo iyo colaadyo dambe oo na asiiba, waa in aan hanuunba ka hortagnaa ilaha fidno ee laga cabsi qabo in ay burqadaan, iyadoo taa laga amba qaadayo ayey habboonaatay in aan halkan ku soo aruurinno wax ka mid ah fikradaha ku dhex wareegaya bulshada ee ah waxyaalaha laga wel wel qabo, waxaana ka mid ah kuwaan;

1- is ka hor imaad dhaqan, taas oo ay dad badani arkaan in ummadda Soomaaliyeed ee maanta ku kala qaxday dacallada dunida ay la soo noqon doonaan dhaqamo iyo caadooyin kale, kuwa gudaha ku noolna ay ku sii fogaan doonaan dhaqan baadiyeedkii iyo caadooyinkii hore, taasina ay keeni doonto is la qabsan waa.

2- isku dhac diimeed, waxaa laga wel welsan yahay in marka uu dhamaado dagaal qabiileedku ay foodda is daraan qabiillada iyo mad-habyo wadaadeedyo badan oo iyaguna u soo hanqal taagaya xukunka, aanana u dul qaadan doonin in ay xukumaan kuwa iyo mabda'yada maanta dalkoodii iyo dadkoodii cardaadiqaha ka dhigay.

3- gumaysi shisheeye, dad badan baa ka wel welsan in dibadda gumaysi uga yimaado, maadaama ay fogaatay isla heshiin Soomaaliyeed, waxayna arkaan in hadday taasi dhacdo ay Soomaalina is difaaci doonto, ka dibna la waayi doono nafyaalo kale oo badan.

4- isku dheelli tir la'aan aqooneed, taas oo macneheedu yahay; waxaa jira qabiilo aqoon yahannadoodu ay ka badan yihiin caamadooda, iyo qabiilo ay aad ugu yar yihiin ama aan lagu arag mid keliya oo wax bartayba,

Haddaba hadday dhacdo in la isku tix geliyo aqoon waxaa hubaal ah in ay dhacayso in la waayo mid ka yimaada qoladaas aan wax baran, taasina waxay sababaysaa in laga dalbo waxay qoladaasi tiqiin oo

dagaal ahaa, waayo mar hadduunan qofku cilmi baran waxa uu bartay waa dagaal iyo dullinimo la mid ah.

Wayna adag tahay in cid lagu qanciyo kii aad aqoon yahan ahaan u soo dirsateen imtixaan baa lagu reebay oo kursigiisii waxaa aqoon ku qaaday mid reer hebel ah oo ka aqoon badan, maxaa yeelay waxaa keliya oo aqoon dareema kan isagu walax bartood oo aqoon ah leh.

5- xukun u bislaansho la'aan, sida in badani ay qabto soomaalidu ma aysan gaarin heer dawladeed oo ma aynan fahmin macnaha xukunka, waana taas tan ka masayrsiinaysa marka ay arkaan nin maamul sare haya ama nin dhaqaale badan leh.
6- qabyaaladda dhaqan baadiyeedka ah oon weli laga waantoobin ayaa iyana dawr culus ka cayaari karta iska hor imaad dambe.

7- shaqo iyo ila dhaqaale la'aan ay aqoon li'ina la jirto, sida iska cad hadday ummaddu heli lahayd wax ay ku mashquusho ama xataa wax ay ka sheekaysato oo kale ma ay dhacdeen is hardintoodu, tusaale hadday dadku u badan yihiin aqoon yahanno waxaa dhici lahayd in intii isku cilmi ihiba ka sheekaysato oo ku doodo cilmigooda iyo laamihiisa, inta yar ee kalena iyaga ayey ku dayan lahaayeen oo ku kala xirnaan lahaayeen,

Waxaana la kala ahaan lahaa kooxo Injineero ah, kooxo dhaqaala yahanno ah, kooxo taariikh yahanna ah, iwm, iyo ardaydood. sidoo kale hadduu nin walbaa haysto hanti ku filan wuxuu Eebihiis ka magan geli lahaa dagaal iyo fidno dambe oo dhacda.

8- Aakhiro xusuus la'aan, taas oo la arkayo ka dib markay hiyi kaceen ummaddu oo ay ku baraarugeen iyaga oo daaqsato caydha ah iyo bulshooyinkii caalamka oo horay u maray ayey dhacday in ay damcaan in ay xoog ku kasbadaan wax walba oo lagaga hormaray, tanina ma ahan mid ay weli ka waantowday Somaalidu, waayo waxaa weli nool oo hawl gal ku jira kuwii tusay halaagga, boobka iyo bililiqada,

Si taa la mid ah waxay u kala hororsanayaan madaxweynenimada si ay u dhacaan hantida ay dawladdu yeelato oo ay halkaa uga hodmaan, taasina waa mid ay ka dhaxleen xukumayaashii hore ee indhaha

u furay, ee haday mar uun arki lahaayeen madaxweyne aan qaadanaynin wax aan xaqiisa ahayn, xalaashana Alle ku yaqaan waxaa hubaal ah in aan nin dambe oo badani sii dooneen xukun, ayna dhici lahayd in la isku baryo, nasiib darrose waa in taasi aysan in badan dunidan soo marin.

9- in uu waddanku weligiisba ahaado gole ay juhaladu ku legdamaan oo uusan dhur iyo dhaqan dambeba yeelan, waayo waxaa aad uga qaxaya aqoon yahannadii, wadaadadii Diinta, wax garadkii iyo ardaydiiba iyaga oo baadi goobaya halkay naftooda iyo sumcadooda uga badbaadsan lahaayeen halaagga dhacaya,

Waxaana beddelkooda ku soo qaxaya magaalooyinkii waa weynaa reer baadiyihii reer magaalnimada u malabsanayey, tuugadii isaga kala imaanaysay dhan walba, iyo wuxuushtii dagaalka ee sidii dhuugga ama jirrida ku noolayd dhiigga Aadanaha, sidoo kale qabasho la'aanta qab qablayaasha ama mujrimiinta dagaalka waxay dhiiri gelinaysaa in ay kuwa kale ku daydaan.

10- waxaa cirka isku sii shareeraysa nafjeclaysigii iyo anaaniyaddii, oo waxaa la isugu faanayaa wixii la bililiqaystay, waxaana naclad iyo ceeb dusha looga tuurayaa kii maanta wax ka heli waayey boobkii iyo dhicii.

11- faham la'aan is gargaarid, waxaa Somaalida caado u ah in ay isku dul noolaadaan, oo nin walba uu ku tashado xoolaha nin ay isku cid yihiin. Haddaba taas ayaa laga baqayaa in ay keento isu hiillin joogto ah, maadaama uu ninba ninka kale ku manna sheeganayo.

Arintaas oo asal ahaan ka timid caado jaahiligii ahaa (u hiilli walaalkaa hadduu gar daran yahay iyo haddii laga gar daran yahayba) oo aysan weli dadkeenu ogaan in Nebi Muxamed NNKHA uu u beddelay (ugu hiilli walaalkaa marka laga gar daran yahay inaad xaqiisa u dhiciso, uguna hiilli marka uu gar daran yahay in aad gacanta ka qabatid oo ka joojisid gar darrada), waa tan ugu horaysa ee ku reebtay dadkeena faqriga iyo dib u dhaca.

Laakiin haddii uu ruuxii damca ama jeclaysta in uu tolkiis u gargaaraba uu waxyaalaha kheyrka ah ugu gargaari lahaa, sida isaga tusiya jidkii ay ku gaari lahaayeen liibaantooda aakhiro iyo adduunyaba, uuna ku gudan lahaa waajibaadka noocaas ah ee saaran ee uu xag Eebbe iyo xag aadanaba kaga helayo abaal marinta.

12- Faham la'aan aqoon yahan, waxaa oogan waqtiga xaadirka ah in qof walbaba uu sheegto aqoon yahan, iyada oo weliba haddii loo baahdo uu gacantiisa ku samaystay warqadihii cadaymaha ee jaamacadaha iyo macaahidda. sidaa darteed uu mid walbaba ku doodayo aqoon yahanku waa aniga, uusanna ogolayn tartan iyo kala reeb. tusaale;

Waxaa isku mar u soo wada shaqa doontay xafiiskii UNOSOM laba nin, waxaana la ballamiyey in ay berri u soo noqdaan jawaab, haddaba soo noqodkoodii ayaa loo sheegay in midkood la qaatay midkii kalena aan la qaadan, markaa ayuu kii aan la dooran dagaallamay oo dooday isaga oo ku andacoonaya, maxaa anna la iiga tagey isna loo qaatay?,

Laakiin waxaa la damcay in lagu qanciyo ninkani waxa uu sitaa Ph.D, shahaadada ugu saraysa ee wax barashada, markaa ayuu ku qayliyey, Anna waxaan haystaa RKBD oo ah magicii uu xambaarsanaa,!!!.

13- Tan ugu weyn ee ay fidnada maantana ay la dami la'dahay waxaa u horseed ah baqdinta ay cid walbaa ka baqayso in laga aarsado dunuubta wuxuushnimada ah ee ay gashay, hadday hoos maraan oo ay noqdaan la xukumayaal.

14- Isku kalsooni la'aan ay qola waliba isla nafteeda ka qabto iyada oo is leh, armaa xaalku idinka xumaadaa oo la idin ka soo galaa meel aadnaan ka filanayanin.

15- ku kalsooni la'aan ah in ay qola waliba qolada kale ka fiigsan tahay oo ay ka qabto cuqdad iyo weji fool xun oo ay ka aaminsan tahay, taas oo macneheedu yahay in qola waliba ay qolada kale kaa aaminsan tahay; cadaw, cunaa, xasad, khayaano, diin la'aan, ballan darro, jaaahilnimo iyo in ay yihiin wax aan dawladnimo iyo dadnimo toona u
qalmin.

16- waxa aan la hurayn in ninkii loo daayo madaxweynenimada la isku maan dhaafsan yahay oo hawl ka bilaabi doono bililiqaysi ku salaysan aarsi xukun, taas oo ah in uu aaminsan yahay in ay kuwii hore ahaayeen dad halka u joogay in ay xoolo ka xaabsadaan oo keli ah.

Sidaa oo kale waxay la imaan qoladiisii aragti ah Waar hooy hashu maanta uun bay xerada inoogu jirtaaye aanu maalno, waxayna markaas damacooda ku salaynayaan tuhun hore oo ay qabaan, ayna ku aaminsan yihiin in ay qoladii hore iyada oo aan u kala harin ka raratay dalka wixii mood iyo noolba yiilay.

17- Waxaa abuurmi doona "faarig" ama kala dheeri aqooneed, "educational gup" oo usoo if baxaysa si karaar ah, taas oo ay keentay in markii uu xaal xumaaday ay dadkii wax xoogaa aqoonta ihi u bilownayd ay isku maaweeliyaan in ay wax barashadooda sii wataan inta ay xaaladdu qasan tahay, ka dibna uu waqtigii la dheeraado oo ay Jaamacadba Jaamacad uga sii gudbaan, halka ay kuwii kalena ku sii xeel dheeraanayaan jahliga iyo dullinimada, taas oo keeni karta in la kala fuulo banaan iyo buur dheer oo aan weligeed la is fahmin.

18- Waxaa abuurmi doonta ama socotaba in uu waddanku noqdo xarun jahli iyo badawnimo oo ay weliba sii dheer tahay cayrnimo iyo colaad la isu dardaarmo. Taasna waa midda uu abuurkeedii ka socdo; la'aanta fursado wax barasho, fursado deegaan iyo xasilid, fursado ilo dhaqaale, iyo niyad jabka cirka isku sii shareeraya. Dhan ahanna waxaa intaa sii garab socda waanada iyo dardaaranka ay ka sii tegayaan wuxuushta dagaalka kicisay, oo iyagu aan marnaba ku fikirin wax aan ahayn Aanno reer hebel.

19- Waxyaalaha kale ee diiday in uu dagaalka Soomaaliyeed salka dhulka dhigo waxaa ka mid ah; sida ay ukala duwan yihiin hab dhaca dagaalkan cusub iyo hab dhicii dagaalladii hore. Tusaale:Beri hore kolka ay colaadi goob ka dhacdo waxa ay dadku uga kala qixi jireen sida ugu sahlan, iyaga oo markiiba ka bus kicin jiray duni kale, halkaana waxa isaga qaboobi jiray dagaalkii oo qoladii baqataana waxay qiran jireen in laga

adkaaday, qoladii wax bursataana way isku xishoon jireen oo markaa ayey xoog saari jireen sidii ay ku soo cara celin lahaayeen walaaladoodii ka qaxay.

Waxayna taasi lahaan jirtay xeerar oo qoladii la sheego in qolo kale ay ka carartay ayna u gashay qolo kale waxaa lagu xukumi jiray xaal, haddii ay bixin waayaanna waxaa taariikhda loo gelin jiray waa kuwii uu tolkood ka toloobay, ee yaan lala dersin, tiiyoo lagu soo rogi jiray cuna qabatayn dhaqaale iyo mid siyaasadeed intaba, iwm.

20- Waxaa kale oo ka mid ah is beddelada xoogga leh ee maanta yimid, siina daba dheereeyey colaaddii Soomaaliya; Berigii hore haddii qolo laga adkaado oo lagu qabsado deegaankoodii waxa ay ahaan jirtay laba mid;

In ay isaga qaxaan heeladka hadday awoodaan oo u toloobaan qolo kale, tiiyoo ay magan gelyo siyaasadeed weydiisanayaan, halkaan ay qoladaasi ku siin jirtay megan gelyo buuxda, oo ay ku difaacayeen iyaga oo siinayey aqoonsi wada dhalashanimo, oo ay kaga mid noqdaan beeshooda. Mar hadday taasi timaaddana ma dhici jirin is cayrsi dambe oo dhex mara labadaas qolo, ee way kala quusan jireen.

Haddiise ay dhacdo in aysan qixi karin waxa ay dantu ku kallifi jirtay in is dhiibaan oo sida ugu dhaqsaha badan uga tanaasulaan magacoodii iyo sharaftoodii, ayna sheegtaan magaca qolada qabsatay, waxaana markaa la siin jiray magaca ah "sheegad", tiiyoo loo tix gelinayo sidii qayb ka mid ah qabiilkaas.

Laakiin maanta arintii is bedeshay. Waxaa meesha ku soo biiray kafaalo qaad shisheeye (Sponsorship), oo haddii qolo laga raayo waxa ay si fudud uga tallaabaysaa xadka waddankaas, waxayna soo dhaweyn Bani aadaminimo ka helaysaa Qaruumaha midoobay, ka dibna waxa ay fursad u helaysaa in ay dib u soo hubayso dhallintooda, rayadkuna ay ugu sii jiraan gacan ammaan ah. Sidaa si la mid ah waxaa Isposor looga soo dirayaa waddamo qalaad, halkaa oo laga yaabo in ay ka helaan nolol ay ka door bidaan toodii hore, waxayna dantu keenaysaa in ay sii huriyaan dabka si ay kab ugu helaan hawlohooda.

***Cutubka Labaad*.**

## MUSLIN IYO
## MARREEXAAN MIYAA

## WAA MAXAY DAWLAD?

Inkasta oo uu habka casriga ah ee loo isticmaalo magacakan uu dhawaan soo gaaray dalal fara badan oo ay ka mid tahay Soomaaliya, hadana waa mid guun ah oo tan iyo bilowgii aadanaha soo jiray isaga oo marba hab ula saan qaadayey, lana macaamilayey hadba xiisadda kolkaas oogan,

Sidaa awgeed waxa ay dawladdu dunida ku soo martay heerar iyo marxalado kala duwan kalana durugsan oo ay mid waliba wadato hab dhaqankeeda, hab cilmiyeedkeeda, hab siyaasadeedkeeda, hab cibaadeedkeeda iwm. oo tan iyo markii Xaawo iyo Aadan dhulka la soo dejiyey waxaa dunida ka jiray dawlado iska daba dhacayey xaq iyo baadil tay doonaan ha ku dhisnaadeene.

Cid kale iskaba daaye Fircoon waxa uu ahaa dawlad qaran ah oo taagan, in uu kibirkiisii gaarsiiyey Ilaah sheegasho mooyee, waxa uu dhisay dawlad macno leh oo hawlo wax ku ool ah ku lahayd waqtigeedii,

Weliba ilaa maanta la gaari la'yahay qaar ka mid ah farsamooyinkeedii iyo xiiladeheedii sida; kuwa ku sharaxan Madxafka caalamiga ah ee Al-Ahraamta ilaa maanta qod loo bixiyo la garan la'yahay. eeg ; 120, (لبرهان غليون. نقد السياسة الدولة والدين).

Taa waxa aan ula dan leenahay waa; kulan kaste oo la isugu yimaado, lagu midoobo, la isku afgarto, lagu wada wax qabsado, la isku kaalmaysto, la isku ixtiraamo, lagu kala dambeeyo, waxa uu hooyo u noqdaa horumar iyo wax soo saar, isaga oo isla markiiba ka hinqiya halka ay qoonkaasi baraaqeen.

Aan tusaale u soo qaadano qaar ka mid ah umadaha maanta nala saaran doonidan ee ku baraaray sababta is

maqalka iyo kala dambaynta sida; China, iyo kuwa kale oo badan.

Waxaase ka sii nuxur badan oo aan la wada heli karin waa kuwii iyaga oo aan caabudin kan u talinaya kaga tala qaata wanaag iyo samafar isna ka hanuunsan yahay xag Alle, oo uu daacad u yahay dadkiisa, diintiisa, iyo dalkiisa. Quruumaha maanta loogaga dayan karo wanaagaas ay ku hormareen ayaa waxaa ka mid ah; Bruneai iyo kuwa kale.

Ma ahan Insaanka oo keli ah waxa ay noloshoodu ku xiran tahay is garabsiga iyo isla wada noolaanshaha, laakiin noole kaste waxa ay isu bahaystaan bah bah iyo jifo jifo, iyaga oo ka eega dhalasha siintooda xagga midabka, dhaqanka, caadada, caqiidada, fikirka, ujeedada, duruufaha, danta iyo hab nololeedka dhaqan dhqaale. oo bal eeg ab Habardugaag oo idili waxa ay u wada noolyihiin bah bah, oo Goroyo lama noolaan karto Libaax, Qooleeyna lama noolaan karto Baqalyo iyo Tuke toona.

Sidaa awgeed Shimbirba Shimbirkiisa ayuu la duulaa oo ka dugsadaa cadawgiisa kale. Laakiin kol haddii ay Shimbiraha raxan raxanta u yaaca ee beeraha diirta, galabtiina isla carraabaa ay iyagu dhexdooda is laayaan oo ay kala xiriir goostaan waxa ay baylah u yihiin inta Gorgor iyo Dafo ah, waxaana dhab ahaan halkaa ku dhamaanaya jiritaankii noocooda,

Waase Eebbe mahaddii in uu garaadkoodu sareeyo oo ay ka feejigan yihiin wax alle iyo wixii carqaladaynahaya wada noolaanshahooda. maahmaah Faransiis ah ayaa oranaysa:(*Les Oiseoux ne mangent pas entre eux*) oo macneheedu yahay (Shimbirtu dhexdeeda iskama cunto). taasina waa tu ay inooga fiican yihiin oo aanaan maanta ku gaari karin haddii nala ku tartansiiyo.

Sidaa darteed qola waliba iskeed ayey ul iyo diirkeed u tahay si ay isaga caabiso ama ula loolanto qolada iyo caynka kale ee la ficiltama, taasina waa hab nololeedka Ifka, waana tan ay ku timaado dawladi oo marka iyada la sugo ayaa lagu fikiri karaa in dawlad la haweysto.

Eebbe weyne oo inagu boorinaya in aannu midowno oo is kaashano ahaanana dawlad Islaami ah oo ay rukumadeedu u adag yihiin ayaa Qur'aankiisa inoogu sheegay;

( واعتصموا بحبل الله جميعا ولاتفرقوا واذكروا نعمة الله عليكم اذكنتم أعداء فألف بين قلوبكم فأصبحتم بنعمته اخوانا وكنتم علي شفا حفرة من النار فأنقذكم منها) العمران:103.

(Qabsada Xariga Eebbe (Islaamka) dhammaantiin hana kala teginina, bal eeg oo xus nimcada Eebbe ee korkiina ahaatay, markaad colka ahaydeen oo uu isu keenay qalbiyadiinii, ee aad noqoteen walaalo nimcada Eebbe darteed, idinka oo ahaa kuwo Boholo Naar ah dul taagan, ee uu idinka badbaadshay), Al-cimraan; 103

Aabaha falsafadda (Aristote) wuxuu yiri; Runtii Insaanku waa xayawaan bulshay ah marka laga eego dabeecaddiisa ma guurtada ah, mana uu awoodi karo in uu keli keli u noolaado, balse waa qasab in uu ruux kaste la noolaado ruux kale isaga oo la dhex galaya bulsho ama beel dhisan oo ku taagan siyaasad iyo nidaam (*L'etat*).

Xaqiiqadiina Ilaah ruux kaste waxa uu u abuuray sababta mujtamac siyaasi ah, si uusan u noqon karaahiyo xaaraan ah. Kii ka maarma mujtamacna ama waa mid ka sareeya aadanaha ama waa mid ka hooseeya aadanaha. Kaasina ma ku fakiro mana sababo wax aan ahayn dagaal iyo kharaab, waana kuwa sidaa uga hooseeya aadanaha kuwa fidnooyinka ku kacshaa.

Faylasoofku waxa uu ku masalay qaab dhismeedka dawladda sida qof taagan oo ay xubnihiisu u dhamays tiran yihiin, oo xubinba ay xubinta kale caawinayso, haddaba waa kee kan aan ku kale u baahnayni? ayuu weydiinayaa, dhabtii kan gooni isu tagoorayaa waa uun laba mid; ama Ilaah ama Waxshi (yeey). eeg bogga; 130-134 ee kitaabka:

( لدكتور -النظرية العامة للقانون: سمير عبد السيد تناغوا. منشأة المعارف بالاسكندرية) .

ama (*Aristote Politique Bibliotheque de la science Plitique*, Paris 1950).

Haddii aan dib ugu soo noqono tafsiirka Dawlad waxaa nagaga filan in aanu sidatan soo socota ku soo gaabino:

Aristotal waxa uu u qaybiyey dawlad saddex heer oo kala ah; Boqortooyo (Monarchy), taas oo ah qaranka ama xukuumadda uu ka taliyo baqor ama hal madax weyne oo isaga uun amarkiisa la qaato aanana laga daba hadlin, hab keli talisnimo ama hab tala dhiibasho.

Dabaqadda sare ee magaca iyo martabada leh (Aristocracy), kuwaas oo ah in la iska aamino qolo gaar ah in ay yihiin kuwa iyagu maamuli kara xaqna u leh qarankaas, sidaa darteed isaga darban hogaankaas iyaga oo aan cod dambe urursan.

Midda saddexaadna waxa ay tahay; Dimoqraadiyadda oo ah in talada loo daayo shacabka qudhiisa iyada oo ay hey'adaha hawlfulinnadu wakiil ka yihiin dadweynaha iyaga horay u soo doortay. eeg bogga; 35 ee (The world book Encyclopedia) vol; 13.

Qoraa Soomaaliyeed oo lagu magacaabo Axmed I. Samatar ayaa isaga sharrixiisa ku cabbiraya waaqica Soomaaliyeed, isla markaasna qoraalka ku caddaysanaya ra'yigiisa ku sharraxay macnaha dawladnimo bogga: 100 aad, ee kitaabka (The Somali Challenge from Catastrophe to renewal) wuxuuna ku macneeyey Qaran (State) in uu yahay dhismo bulsheed ay sameeyaan Bani-aadam una sameeyaan Bani-aadam, wuxuuna u kala saaray sidatan soo socota:

1- Aristocratic, xukun u gaar ah oo aan lagu qabsan qolo yar oo looga dambeeyo xag dhaqaale, aqoon, dhaxal, caado, iwm.
2- Republicanism, xukun yara fur furan oo Dimoqraadiyad ku lug leh.
3- Liberal, xukun xoog saara xorriyadda shakhsi ahaaneed, kana hor mariya xorriyadda bulsho ahaaneed.
4- iyo amar ku salaysan dabaqadayn iyo kala sarayn goobo iyo qofaf.

Ugu dambaystiina waxa uu qoruhu u soo ban dhigay dadka Soomaaliyeed fikraddiisa isaga oo xusaya saddex jaran jaro oo kala ah: Liberal, Marxist iyo Post-clonial, taas oo uu leeyahay waxaan rumaysanahay in ay nagu caawinayso falitaankii laamigii wada hadalka iyo uga sii gudbiddii hab nololeed qaran ahaaneed.

Si kastase arintu ha ahaatee waxa aan leeyahay  Dawlad waxaa nidaam iyo hab qorsheed dheer ka dhisa urur ama koox naftooda u hura sidii ay horukac u gaarsiin lahaayeen bulshadooda haddii ay daacad yihiin.

Taasina waxa ay waafaqsan tahay in dawladdu ay ka dhalato hantida gaarka ah ee shacabka. eeg (Archism; marxism). Haddii kale oo taa la waayana waxa ay kooxahaasi noqonayaan laqdaba-wadayaal, waxayna umadda u horseedaan fidno iyo fawdo aan damin in laga gacmo qabto mooyee.

Haddiise ay daacad qabaan oo dawlad la yaqaan dhisaan, kana soo dhalaalaan waajibaadyadooda, iyaga oo sacabada ku sita kalsoonida shacabkoodii soo dhistay oo la soo saxiixday heshiiska iyo ballan qaadka horumarineed, ka dibna soo hela aqoonsi caalami ah, waxaa la arkaa in ay ka dhabeeyaan damacooda oo ay dawlad noqdaan.

Laakiin kuwaas oo dhan ka hor ayey haboon tahay in la is weydiiyo dhawr su'aalood oo ay ka mid yihiin;  waa maxay asalka dawladnimo? maxay dawladnimadu muhiim u tahay? maxay kala yihiin noocyada dawladi? maxay qabataa dawladi? muxuu yahay xiriirka ka dhexeeya dawlad iyo dadweyne? maxay dawladi ku duntaa? sidee bay dawladi ula dhaqantaa dadkeeda iyo dadka ajnabi? sidee baa loo dhisaa dawladda? yaa hogaamiya dawlad? sidee baa loo qaybiyaa derajooyinkeeda? ilaa iyo intee bay dawladi haysan kartaa kalsoonida shacabkeeda? sidee bay shacab ku xaqiiqsan karaan wax qabadka dawladooda?.

Su'aalahakan iyo kuwa ka sii dheerba waxay lama huraan u yihiin in ay is weydiiyaan qola kaste oo haahaabanaysa hawada dawladnimo ka hor inta aynan isku hawlin tabaabusheheeda, uusana hanqaldaagoodu hiyi kac habaaran ku ridin.

Sida ay dawladaha dunida maanta ka jiraa u badan yihiin waxaa la qumanaaday nidaamka wada tashiga oo xagga Islaamka loo yaqaan Shuurada, xagga Cilmaaniyaddana loo yaqaan Dimoqraadiga. Taasise waa marka laga reebo tafsiirka bidcada ah ee ah in lagu dhiso dimoqraadiyadda khayaano iyo Xornimada waallida ah, ee aan  loo daynin sidii uu u fasiray soo helihii aragtida Aristote.

Fasirkaas oo ahaa shacabka ayaa xukunka iska leh, uuna ula jeeday in aan shacabka lagu qasbaynin xukun aysan ka raalli ahayn iyo cid ayna ka raalli ahayn ee loo raacayo sida ay ku niyadsan yihiin, ayna ku jirto maslaxadoodu, taasina ma ahayn in ku walbaa uu qasto waxa uu qasanayo, sababta oo ah haddayba arintu sidaa tahay waxaa meesha ka bixi lahaa magaca xukun iyo maamulba.

Sidaa darteed ujeedada dhabta ah ee ay ku timid dimoqraadiyadu keliya uun waxa ay ahayd mid ku qotonata heshiis iyo wada tashi ka dhexeeya xukumayaasha iyo la xukumayaasha, loona sii badiyo in laga tala iyo amar qaato la xukumayaasha. tiiyoo lagu adeecayo waxa ay dantu ku jirto oo keliya. Waxayna taasi waafaqsan tahay Aayadda Qur'anka ah ee Eebbe wax walba oge, awoode ku leeyahay:

(وأمرهم شوري بينهم ومما رزقناهم ينفقون) الشوري:38

(Waana kuwa ajiibay Eebbahood oogayana salaadda amarkooduna tashi yahay dhexdooda, waxaan ku arzaaqnayna wax ka bixiya) Shuura; 38.

Kolka caynkaa loo fasirana waxa ayba waafaqaysaa isla fasirka Shuurada iyo doorashada, laakiin haddii laga eego dhanka macnaha ay maanta tusinayso waxa ay noqonaysaa waalli la dhiiri geliyo iyo isku dulnoolaansho dabaqadeed.

Nidaamkaas Dimoqraadiga oo ku salaysmay hadalkii Faylasoofadii ugu waa weynaa Cilmaaniyadda ee soo allifay qaanuunka dad sameega ah, waxa uu dhab ahaan u ayidayaa una garab taagan yahay xukunka Rabbaaniga ah ama Shareecada Islaamka oo ay ku tirtirsiinayaan in la adeeco iyada uun oo xukunka looga dambeeyo Eebbe.

Hadalladaas ay dhabta ku qiranayeenna waxaa ka mid ah kuwii uu yiri Thomas Akweni; (Runtii nidaamka caddaaladdu waxa uu ka yimaadaa xagga Eebbe weyne, waayo Ilaah ma sameeyo mana samayn lahayn wax ka baxsan caddaaladda, suu maba sameeyo wax ka baxsan nidaamka dabiiciga ah.

Runtii wax kaste oo qaanuun rabbaani ah ku dhisanina waa xaq, qaanuunka Ilaahna waa mid la is amray illeen wuu wanaagsan yahaye, waana mid la iskaga reebay suu

waa xun yahaye. waana midka mudan in la adeeco, suu waa kan dhabta taabanaya ee) eeg bogga; 137 ee kitaabka, Dr; Samiir Cabdisayid ee aan kor ku soo xusnay.

Hadaba haddii la isku raacay in sharciga Ilaahiga ihi uu yahay kan keli ah ee lagu wada kalsoonaan karo, waxaa nala gudboon in aan tusiyaha koowaad ka dhigano Sharecada Islaamka, taas oo aanu ka qaadanayno xukunkeenna si aan dhidibada ugu aasno dawlad dhab ah oo ku istareexno, naguna hagta tubta toosan ee aan ku gaari karno dabaadiga iyo caaradka dawladaha dhisan ee naga cad goostay mudada ka badan qarniga.

## QARAABO XIRIIRINTA IYO QABYAALAD ABUURIDDA

Kol haddaan isla yara garanay macnaha dawladnimo bal aan u soo yara noqono, ujeeddada cutubkeenna oo ahayd sidii aan u magac bixinay Muslin iyo Marreexaan miyaa?, taas oo ah wadada aan u marayno kala qaadaan dhigidda qabiil iyo qaran.

Haddaba si aan taas ugu dhaadhacno waxaa ila haboon in aan xusuus ahaan usoo qaadano wax ka mid ah waxyaalihii ka socday dalka mudadii uu xukumayey Barre oo lagu leexinayey Marreexaan, waxaanan tusaalaysanaynaa dhawr dhacdo iyo qiso oo dhab ah, kuwaas oo ay ka mid ahaayeen:

1- maalin Jimce ah oo la soo gutay khudba jimcaadkii, wadaadadii masjidka Sh/Cali Sufi ku tukaday ayaa damcay in ay ku maraan wadada mudaaharaad xasilooni iyo nabadi ku jirto oo ay ku cabirayaan in ay ka xun

yihiin xiritaanka koox culima'u diin ah oo uu imaamkii masjidkaasi ka mid yahay,

laakiin nasiib darro looguma simin ee waxaa is la dhaqaaqay ciiddi iyo geedihii oo waxaa lagu wada qayliyey (war jihaadaay, war jihaadaay, maanta arintu waa Muslin iyo Mareexaane, kii ka harow ogow in aad ehlu naar tahay iwm), taasina ma ahayn mid cusub oo markaa mudnayd in lala yaabo waayo in qofkii sheegta Marexaan loo aqoonsado gaal waxay ahayd mid ka caadi ah dadyow badan dhexdooda.

Sida la wada ogsoon yahay Soomaalida waxaa ku cusub xukun iyo dawlad taasina waxay keentay in ay kala saari waayaan macnaha dawladnimada iyo macnaha is addoonsiga. Waxaysan si fudud uga marnaan karin in ay u qaataan in qabiilka uu ka dhashay ninka madaxda ihi uu yahay kan kulligood shakhsi shakhsi u xukuma.

Sidaa si la mid ah qabiilkaasina waxay rumaystaan in ku kaste oo iyaga ka mid ihi uu xaq u leeyahay in uu xukumo kan kale ee qolo kale ah, waxaana markaas lagu magacaabaa foodleyda ka dhalatay reerka xukunka baylahda ah loo tiiriyey waa Ina boqor.

Jaahilnimadaas waxaa u sii dheer dadweynaha Soomaaliyeed iyo kuwa kaste oo la mid ahba in ay maskaxdooda ku adeegtaan dhawr nin oo calooshood u shaqystayaal ah, kuwaas oo ka dhaadhiciya wax kaste oo ay ku gaari karaan danahooda dhuuninimo iyo xukun jacayl, sidaa awgeed waxa ugu horeeya ee ay caada qaatayaalkaasi adeegsadaan waxaa ka mid ah;

Xukunakani waa mid ay gacanta ku haystaan reer hebel oo keli ah, waxayna soo been abuuraan kumanaan cilladood oo ay ku kacsadaan wax ma garatada. Halkaasna waxaa ku luma jiritaankii heykal dawladeed iyo shacabkeedba waxaana ka soo baxa dabaqad sare oo gumaysata dabaqad hoose, taasina waa in ay lama huraan ka dhigto dagaal iyo weerar xornimo doon ah iyo dagaal derajo iyo mansab difaacasho.

Mar haday arintu gaarto heerkaas baraka laayda ahna waxaan la hurayn in la isku baaba'o iyada oo ay qola

walba u haysato in ay xaq ku taagan tahay, tiiyoo ay qolana xaq doon tahay qolana xaq difaac tahay.

Si taa la mid ah waxaa meesha ka baxaya markiiba xuquuq shakhsiyeed oo dhan walba leh, waxaa dhacaysa in wax tarkuu nin lahaa loo ergo qolo, tiiyoo laga yaabo in ninkaa iyo qolada amaantiisii la siiyey aysanba is aqoon, isla sidaasoo kale waxaa loo tiiriyaa xumaantii uu qof keensaday qolo oo waxaa dhab ahaan u dhacaysa in ku kale oo war mooge ah loo qabsado eeddii uu kaasi keensaday, halkaasna lagu asiibo mid beri ka ah oo ceeb ka saliin weligiisba ka ahaa xumaanaha lagu eedaynayo.

Barbarka kale waxaa iyaduna dhacaysa in qof uu ku faano wax tar uu la yimid mid loogu sheegay in ay isku cid yihiin uun, wuxuuna qirtaa in uu isagu galay dambiga lagu eedeeyo mid ay isku cid yihiin, waxaa weliba taa sii dheer in uu qof ku faano derajo loogu sheegay in ay qoladiisu waa waayada ka mid ah lahaan jirtay, illeen marka lagu dhawaaqo qabiil hebel ma ahan wax la taaban karo ama la tilmaami karee. Tusaale haddaan ku cadayno taas waxaa ka mid ah:

Waxaa laga yaabaa in aad in badan maqasho; naagtaas yaa qaba ama yey u dad dhashay? waxaa qaba ama ay u dad dhashay reer hebel, baabuurkaas yaa leh? waxaa leh reer hebel, waxaaba wax lala amakaago ah marka la doonayo in nin loo guuriyo naag waxay ku gudoonsiiyaan qoladii ay ka dhalatay erayga ah; (reer hebelow gabadhaa hebla ah waan idin siinay).,

Haddaba erayadaas macne wareeriska ah oo laga yaabo in kan warmooga ka ihi uu u fahmo sida ay u cad yihiin ee ah in naagtaas ay qabiilkaasoo idili wada qabaan, baabuurkaasna ay wada leeyihiin oo ay isku yihiin shirkad ayaa ah kuwa sii fogaynaya xaqiiqada waxa jira ee ku dhisan in la kala saaro qof iyo qolo.

Isku soo duuduube waxaas oo dhan ayaa ah kuwa keena in bulsho ay ku noolaato khiyaali iyo dhalanteed aan dhab iyo suurta gal toona u dhaweyn. Taasi waa tan maanta ku sababtay ummadda Soomaaliyeed in ay isku laayaan oo isku haystaan wax aan la taaban karin oon la fahmi karin.

Waa yaabe iyada oo ay xaaladdu heerkaas tahay ayaanan weligey arag oo maqal qof leh ama la leeyahay waxaa wax u taray qabiilkiisa, oo weliba intaan arintaas u dhaba galay ayaan soo helay in qof walba uu leeyahay; weligey wax tol iga qaado mooyee wax tol isiiyo ma arag, xataa ma aanan arag qof yiri waxaan helay qaaraan la ii soo aruuriyey, waxaana la ogsoon yahay in qaaraanku uuba joogto yahay xaalad kaste oo lagu jiro.

Hadaba waxaa taas laga fahmayaa in Soomaalidu ay isku kaalmaystaan sharta ee aysan marnaba isku kaalmaysan kheyrka, taasina waxay si cad uga soo horjeeddaa amarkii Eebe ee ah:
(وتعاونوا علي البروالتقوي ولاتعاونوا علي الآثم والعدوان)المائدة:2.
(Isugu kaalmeeya samaha iyo dhawrsashada hana isugu kaalmaynina dambiga iyo collaytanka) Al-ma'idah;2.

Aan u soo dhaadhacno dulucda qoraalkee waxaa jirtay in Soomaaliya uu ka ahaa madaxweyne nin la yiraaho; Maxmed Siyaad, wax kastaba ha ahaado maamulkiisuye waxaaba nasiib darro noqotay markuu waayey cid ku amaanta wax qabadkiisii, kaas oo loo leexiyey qolo aan warba u hayn waqti uu jagadaas helay iyo halkuu ka yimid toona,

Sidaa darteed waa in uu ninkaasi qaadaa hinaanso iyo cuqdad waana in uu is baraa dadka oo si uu u tusiyo awooddiisa waa in uu kaadida ku dhejiyaa ilaa ay ka qirtaan hadday is difaac maagaanna waa in uu ka aarsadaa kuwa xaqiisii duudsiiyey iyo kuwa xaqiisii bililiqaystay intaba. (sida ay la tahay).Waxaase taas ka sii daran in dad war moog ah oo ka dahiran xumaan lagu galo oo naf iyo maalba lagu dhaafsiiyo eed ninkaas loo haystay,

Haddaba anaga oo caadadaas caqli xumada iyo cilmi darada ah ee ay Soomaalidu ku fogaatay ka amba qaadayna aan is weydiinee ma Marreexaan baa mise waa dawladdii Maxamed Siyaad hogaamiyaha ka ahaa cidda loo aanaynayo dhibkii gaaray Soomaaliya ama lagu amaanayo horumarkii gaartay soomaaliya?

Sidoo kale waa lama huraan in aan is weydiinaa haddiiba aan ku eedayno in Mareexaan uu waddankii qasay yaa ka dambeeyey falfal xumadaas soo ban

baxday? muxuuse doonayey qof kaste oo gurigiisii dab geliyey? kolkuu gurigiisii soo gubayse muxuu ku galay guryihii dadow?.

Si aan u helno jawaabaha su'aalahaas waa inaan tusaale ahaan u soo qaadanaa wax ka mid ah qisooyin qosol iyo anfariir leh oo la xiriira arinta kuwaas oo aan ku soo aruuriyey dhegahayga iyo dhaayahayga, waxaana ka mid ah;

2- **QISADII MADEXEEY:**

Madexeey waa nin maskiin ah oo darawal u ah nin taajir ah, inkastoo ay derajadiisu tahay in uu wado baabuurka ka shaqeeya beerta oo keliya, hadana waa suurtowdaa in loo ogolaado wadista baabuurta magaalada ee quruxda leh si uu ugu shaqeeyo haddii aysan waqtigaas taagnayn wadayaashii kale ee ka sareeyey isaga,

Madexeey wuxuu harjadaba wuxuu ku guulaysatay in uu guursado, ina adeerkiisna wuxuu u ogolaaday in uu si ku meel gaar ah u sii dego qol cariish sii dumaya ah oo boos celis ugu ahaa Waxara cadde, taas oo macneheedu yahay ii waardiyee booska.

Aniga iyo ina adeerkey Da'udna waxaan ku sheekaysanayney gurigooda (reerka Da'ud) oo halkaa ku yiillay, laakiin waxaan kula jiri weynay qolkii sukaha ahaa ee ciddoo dhan ka dhexeeyey ciriirigiisa ka sokow dhib naga soo gaarayey cidda uu gurigoodu garabka ku hayo qolkaas cariishka ahi oo ay daartoodu tahay dhagax aad loo dheereeyey oo sagxaddiisu ay ka bilaabato dhakada qolkaan ku jirno,

Haddaba waxaa naga soo gaaraya deriskaas biyo dac ah, candhuuf iyo hadal xumo daaqada lala soo istaagayo oo nalaku durayo; ciddaan midgaha ah ee sheegata Marreexaanka may midgohooda iska sheegtaan ma waxay rabaan in aan hadhaw ku darno gumaadka Marreexaan? IWM.

Taas ayaa hadaba nagu kalliftay in aan fariisano jikadii oo ku tiillay geeska kale ee booska iska qaawanaa ee uu qolka keliyuhu ka dhakoolay, laakiin intaan Jikadaas fadhinay ayaan ka maqlaynaa sheekadaan gurigii Madexeey oo jikada dhinaca ku hayey:

Islaan deriska ah: Maandheey waxaan maqlay ninkaagu waa Mareexaane ma runaa?

Xaaskii Madexeey: Haa eeddo,

Islaantii: Yaheey runta ii sheeg waa la dhimaahe,

X/M/xey: wallaahi eeddo waa runtay,

Islantii: Allaahu akbar !!, waa yaab Allee xaawaleydu maray run sheegtaa? hebla iyaa ii sheegeen oo waa ka beensaday waxaanan iri oo xaw ku falaayey ninka Marreexaan,

X/Mdxey: qosol gaaban, ka waran hee eeddo asagaa i jeclaadee.

Islantii: oo kaalay waxaan ku weydiiyey baabuurtaan kala nooc noocaa oo uu marba mid wato waaba arkee, xaad guri weyn u dhisa weydeen sida Marreexaanka kale.

X.M: Eeddo Madiinuu hadda laba guri nooga dhisoo anaa iri kuwaas ma rabee halkaan mid weyn oo kale iiga dhis, marka ayaantaanoo dhanba taasaan ku muransanayn, haddase wuu iga yeelay oo mar dhaw dhismaan bilaabi doonaa.

Islantii: Ilaahay ummaddiisa u kala roonaa, gabdhihii ilama adeertaa ahaayoo kaa qurxoonaana maanta baadiyey xoolo dhib badan ku raacaan adiguna inta Ilaahay nin Marreexaan ku indhasaabaad Janno isaga dhex jirtaa, Yaheey nasiibsataye aamus minuw caawa ku furana magacaa ku raacee !!!.

3. **QISADII FAARAX**

Faarax oo ahaa inan aad ugu dadaala wax barashada wuxuu ku guulaystay tartan shaqo ka dib markuu laba sano baagamuudeeyey dugsigiisii sare ka bacdi, laakiin markuu xaafiiskii tagey ayey shaqaalihii kale u aqoonsadeen Mareexan, waxayna ka dhigeen takoor iyada oo ay arintiiba u ekaatay in la yiri nin walbow waxa aad ninkaas ku dhibtid waa sed ajir ah oo aakhiro kuu jira,

Marka Agaasimihiisa la weydiiyo maad shaqo u dhiibtid wuxuu ku jawaabaa ha fuliyo shaqadii loo soo dirsaday (tif tifnimo), darawalku kuma xisaabsado shaqaalaha xafiiska oo wuxuu leeyahay kolley isagu hadduu maqnaado waxba laga jari mahayo, shaqaalaha la simanina markay arkaanba waa is ciil kaambiyaan iyagoo faruurta dhexda ka qaniinaya waxayna ku eedeeyaan shaluu baadiye ka yimid, aqoonta uu ina

dheer yahayna waa mid si deg-deg ah guriga loogu baray.

Nasiibkiisa waxaa laga dhigay xisaabiyihii waaxda ka dib markuu xisaabiyihii hore fakaday, shaqaalihii kalena ay meelo kale ku kala jiraan, agaasimihii waaxdana loo sharciyeyn waayey ninkii kale ee uu reerihiisa ka soo watay, soona codsaday in loo ansaxiyo shaqaalenimadiisa cusub.

Hadaba si uu u aarsado ayuu bilaabay in uu shaqaalihii isu tusiyo nin dawladda sare toos ugu xiran oo wuxuu doono bi'in kara. Wuxuu aroortii ku ballansadaa xaafiiska saaxiibadiis, qaraabadiis, iyo macaamiil uu lacag ka soo deynsaday,

Wuxuuna la soo galaa xafiiska lacag badan oo uu ka soo aruuriyey asxaabtiisa, kuna dhex daraa khasnada dawladda, ka dib markay asxaabtiisii iyo dadkii lacagta ku lahaa u yimaadaan ayuu inta albaabka furto oo u yeero qaar ka mid ah shaqaalaha si ay u arkaan oo uga sii sheekeeyaan waxuu sameynayo u furaa khasnada qofkii u yimid oo u cantoobiyaa (xisaabtisii),

Isla markaasna wuxuu ugu sheekeeyaa saaxiibadiisa la shaqeeya in uusan bishaan waxba ka hayn xisaabtii dawladda oo uu ku tagri falay, iyaga qudhoodana wuxuu ku caawiyaa wixii uu marba uga heli karo jeebkiisa. Mararka qaarkoodna waxaad arkaysaa kiiyoo deyn raadinaya oo leh mid ila shaqeeya oo iga mushaar badan baa wax i weydiistay oo waxaan rabaa in aan isku xoreeyo.

Waxay arintii sidaas ku socotaba waxaa la dallacsiiyey agaasimihii guud ee wasaaradda oo laga dhigay Wasiir iyadoo loo sheegay in shaqaalihiisu ay warbixin fiican ka soo bixiyeen, sidaa darteed wuxuu aaminay in uu ninkani ka warbixiyey oo jagadiisa u sabab ahaa, markaa ayuu is yiri ha kugu sii xajiyo xukunka ee wanaaji wuxuuna ka deeqay dhan walba. Sanad ka dibna wuxuu u magacaabay xilkii agaasimanimo ee waaxdiisii, tiiyoo uu shaqadii ka cayriyey ninkii horay u hayey.

Faaraxna intuu kibray oo fahmay macnihii dalka ayuu bilaabay in uu baado wasiirada iyo Generaalada isagoo ugu goodinaya in uu yahay Sargaal nabad sugid iyo

agaasime Mareexaan intaba, mararka qaarkoodna wuxuu dadka ku ballamin jiray xaafiisyada Madaxtooyada oo uu ka dhaadhicinayey waxaan ku leeyahay xaafiis aan ku maamulo sirta dawladda.

Waxaanu maalin maalmaha ka mid ah wada geli rabnay Dekadii Muqdisho. Markaa ayuu waardiyihii oo diidanaa in saacaddaas meesha la galo na weydiiyey; war yaad tihiin idinku? (wuxuu arkay anagoon baqayn oo gudaha u soo galnay baabuur qurxoona wadana, sidaa awgeed wuxuu nagu qiyaasay dad mas'uuliyiin ah, suu damcay in uu na weydiiyo; Maxaad tihiin?, suu waa hafay oo yiri: “war yaad tihiin”?).

Farax wuxuu judhiiba la soo booday, waxaan nahay Mareexaan, waardiyihiina si hal haleel ah ayuu nooga wareegay. Farax inkastoo uu heer ka gaaray turufeyntii madaxda haddana wuxuu aad isaga dhawri jiray ninkii Marexan ah, isaga oo ka baqayey in sirtiisa laga daba tago. Marar badan oon kala sheekaystay sida u ku helo fursadaha ayuu ii sheegay in uu mar kastaba ka helo dadka ku colaadiya qabiil ahaanta; talooyin, dhiiri gelin, akhbaaro, iyo sirar badan ooy ula jeedaan iyagu in ay isaga ama ku dhibaan ama ku eedeeyaan.

Sidaa si la mid ah ninka la yiraahdo Aasey waxaa lagu magacaabay Gudoomiyihii bangigii dhexe. Madaxdii kale ayaa haddaba bilowday in ay kaga cabsadaan Marexanimo, sidaa darteed waxay la galeen heshiis hoosaadyo ay ugu ballan qaadayaan malaayiin lacag ah, oo nin walba uu siinayo inta uu xado nuskeeda,

Hadaba Aasey oo ahaa nin gaajo ku soo koray kama dayrin, kamana cabsan, kamana xishoon ee wuxuu isticmaalay indha adayg uu ka helay dhiiri galintoodii oo wuxuu la bililiqaystay hantidii dawladda.

## ARAGTIDA CULIMA'U DIINKA EE LA XIRIIRTA FIKRADDAAN

.

Waxaa is ka caadiyowday in culimada diinta ha ahaadeen kuwa casriga ahaa ama kuwii horabee ay geeska geliyaan oo iska takooraan ruuxa mareexaanka ah ee ku jira, iyaga oo xujjo ka dhiganaya in uusan marnaba dar Alle u tukanayn ee yahay jaajuus, weliba aad ka dareemayso rumaysad ah in aan qofkaas lagu tilmaami karin Muslim ama mid nasiib ku leh maalinta qiyaamaha, kuna dheefsaday nasiibkiisa dunida, rumaysadkaas oo ku salaysan in qofna aakhiro la siiyey qofna adduunka la siiyey.

Waxaan galab casar liiq ah si hal haleel ah uga soo gaaray Masjidkii xaafaddii aan degenaa, kolkii aan weysadii soo dhamaystay ayuu nin waayeel ahaa i weydiiyey; Oo mana dukee? Haa ayaan ugu jawaabay, laakiin intuu fajac iyo amakaag la fara taagay ayuu i sii weydiiyey Sow wiilkii cidda Mareexaan ma tihid? Haa ayaan ugu celiyey, markaa ayuu isagii oo sii dhaqaaqaya igu yiri; soco hee si lagaaga aqbalaana ma aqaane.

Kolkii aan salaaddii ka soo baxay ayaan ayaan mar kale irridii Masjidka ka helay odaygii iyo Imaamkii Masjidaka ee ay isku reerka ahaayeen oo isla taagan, waxaanan ku dhiiraday in aan weydiiyo sababta uu uga shakisan yahay salaadayda.

Haddaba waxa uu su'aal kula noqday Imaamkii oo uu weydiiyey Sheekhow Sarwaal salaadu ma ku ansaxdaa? Imaamkiina wuxuu ugu jawaabay; ma fiicna oo waa dhar gaaleed laakiin in ay salaaddii lagu tukaday ansaxday iyo in kale Allaahu Aclam.

Intaas ka dib ayaan isa sii waraysanay wuxuuna hadalkii nala gaaray in uu odaygii ii sharaxo sababta aan salaadi iigaga ansaxaynin, wuxuuna cillado culus iigaga dhigay dhawr arimood oo ay ka mid ahaayeen;

1- In aan Surwaal ku labisanahay.

2- In aan kubbaad soo cayaaray oo ay taasi iga soo daahisay salaaddii casir.

3- In aan Mareexaan ahay, oo aysan dhal Mareexaan hanuunsamin diina ab iyo isir u lahayn.
4- In la igu koriyo xaaraan iyo dad dhiigood, oo aan ducaba laga aqbalin qof ay calooshiisa xaaraani ku jirto.

Si kastaba arintu ha ahaatee tani waxa ay ahayd mid aan laga laba labayn ee lagu dhiirado, waxaana iska caadi ahayd in Wadaadada is yara qabtaa ay cidla ka eedaysanaha ugu dhiibaan hadalo noocaas ah si kaftan loo ekaysiinayo, laakiin ah (Waayeel kaftan buu hadalkiisa ku dhamaystaa).

Waxaan maalin u tegay beesha Shiidle ee degta tuulada Shanlow ee ka mid ah D/Balcad, waxaanan bilaabay in aan ku waaniyo salaad dukashada, laakiin kii ugu ilbaxsanaa dhallinyaradooda ayaa soo booday oo igu yiri;

(Adduun iyo Aakhiro tooko ber tooko waaye, oo innagu ama aan tukanno ama yaanaan tukane kor iyo hoosba waxaan galeynaa Jannada, waxaanan idinka dhiganaynaa Faras, idinkuna tukada ama ha tukanina ee waxaad gelaysaan Naarta, illeen Adduunka ayaa la idin siiyey annagana aakhira ee).

Sheekooyinku kun iyo kow ka badane isku soo duuduub ahaan dulucdu waxay tahay waa bulshada kale kuwa kicinayey marexanka, taas oo ka imaanaysay tuhun been ah oo ay ka qabeen, waxay bulshadu ahayd mid ku beerta qofka Marexaanka ah oo warmooge ah dhiillo iyo colaad, isna markuu u adkaysan waayo waxa lagu hayo ayuu geli jiray dadaal iyo kacdoon dhiifanaan leh oo uu is leeyahay bal ku gaar waxa lagugu sheegayo,

Waxaana hubaal ah in inta badan qofka Marexaan uu garab ka dhigan jiray qof cid kale ah iyadoo uu qofkaasi is leeyahay barruu ku anfacayaa, wuxuu cunuga Marexaanka ihi ku kori jiray cuqdad iyo uur ku taallo uu ka helayey jugtii lagu hayey tan iyo toban jirkiisii ka hor. wuxuuna mid walba is lahaa kolley adiga iyo qoyskiinna unbaan dawladda ku xirnayne intii kale noolaatay, sidaas awgeed waxaad arkaysaa tiiyoo ay cid walba cidda kale eedaynayso.

Somali waxay eedaynaysay Darood, Daarodna marexaan, Marexaana Reer Diini, reer Diinina reer Koshin, reer Koshina reer Xasan Koshin, reer Xasan koshina reer Barre, iyaguna Bah khadiijo, Khadijana Max'ed Siyaad, isna marka hore madaxdiisa la shaqaysa marka dambana Somaali weyn.

Eedahaas isku tuur tuurka ah oo socda ayaa hadana waxaa la helayey qabiil kaste qof ka mid ah reer Barreba kolay ku tahay oo dacdaraysan kuna dulman xukunkaas, iyo qabiil kaste qof ka mid ah somaaliba ciddii uu doono ha ka ahaadee ku tamashlaynaya sedbuursiga hantida dawladda.



## SIDUU U DHACAYEY XAALKII XUKUUMADDU

Hadaba taas macneheedu waa nin kaste oo fahma sida loo dhaco dawladdaas wuu dhici karay kumana xirnayn qabiil qabiil, ee waxaa la dhihi karay waxay ku xirnayd hadba intii is fahamta ee isku dan noqota, ha ahaadeen xubnihii dawladda ee wax boobayey ama ha ahaadeen kuwa ugu shaqayn jiray xoolaha ay dhacaan, tusaale aan u soo qaadano; Maxamed Sheekh Cusmaan ninka laga wada markhaati kici karo in uu keligiis u tashaday khasnadii dawladda. Waxaa dhacday in wiilkiisu markuu doonay aroos uu ka soo kiraystay USA diyaarad loogu soo qaaday Eey ka qaalisan diyaaraddaasba. Waxaa kale oo dhacday in wiilkiisa Jeeri ay kaga soo hor bexeen wadadii dad weynaha caamka u ahayd ee Jasiira dhallin yaro baabuurkooda wata, oo iskood isaga socda aanana loo sheegin in uu Jeeri halkaa soo mari doono, markuuse Jeeri indhaha saarayba wuu xanaaqay oo intuu xabbad iska gooyey ayuu baas cardaadiqaha kaga dhigay.

Dawladdii jirtay waxay warfaafinta ku sheegeen in uu shilkaasi dhacay oo ay ka tacsiyeynayaan iyaga oo

sheegay in Jeeri la xiri doono, haddaba xiritaankii Jeeri waxa uu noqday in la seexiyo qolkii martida ee madaxtooyada, waxaana halkaa ku soo booqanayey mas'uuliintii oo dhan, maalintii dambana dhibanayaashii ayaa wax loo tuuray oo la sabrisiiyey, isna iyada oo geesinimadiisa lagu amaanayo dalxiis dibadaha loogu diray.

Waxaaba taas ka sii darnayd oo ahayd mid dadka guud ahaan loogu wada dhibayo markii la siiyey gabadhii uu Maxamed Sheekh Cusmaan dhalay Hotelkii ugu weynaa dalka ee Taleex, oo markaa ay xiratay kulli jidadkii afarta dhinac ka marayey Hotelka iyadoo ku andacoonaysa sharqanta baabuurta ayaa iga dhibaysa dadka Hotelka degan. tiiyoo ay waddanka haysatay ciriiri jid, oo ay aad ugu yaraayeen waddooyinku.
Markii la qaxay waxaa soo baxay boqolaal guri oo ninkaasi ku leeyahay dunida horumartay oo kulligood ay waardiyeeyaan ciidamo dawladahaasi u qoondeeyeen illeen lacag baa shaqaynaysee, tusaale kuwa Yurub ku yaalla oo ay ugu caansan yihiin kuwa Talyaaniga iyo kuwa Switzerland. Sidaa si la mid ah guryihiisa Muqdisho ku yaallaa waxay kor u dhaafayaan laba kun oo guri.

Runtii ma soo koobi karno ficillada naxdinta iyo uur ku taallada leh ee ay ninkaas iyo asxaabtiisu ku kacayeen, keligiisna ma ahayn kuwaasi ee waxaa jiray Muunye, C/raxmaan Jamac - Buluq buluq, C/llahi Cosoble (wasiirkii Bostada oo isagu xaga qabyaaladda kaga dheereeyey), Maxamed Abshir oo isagu Wakaaladdii Xooga Korontada ka dhigay bakeeri gurigiisa u yaallah, iyo kuwa kale.

Keliya waxaa dhacday in xafiisyo ka mid ah kuwii Milateriga markii dambe Marexaanku u bateen xeryihii ciidamada ka dib markii looga kala baxay si loo soo weeraro, inkastoose ay isku dayayeen in ay ka faa'iidaystaan hadana kama aysan faa'iidaysan aqoonin,

Sidaa awgeed waxaa badnaa in badan oo ay hanti nooc walba isugu jirta dayac iyo aqoon darro ay ku luminayeen, waayo kooda aqoonta lihina kun mayl ayuu ka dheeraa dawladaas, kooda jaahilka ah ee xeerada maran lagu maqaar saarayeyna wuxuu ahaa nin cid

walba iska jira oo cadaw u arka, taas oo ku dhisnayd dardaarankii la siiyey.

Eeddaas foosha xun oo iyana marka loo celiyop Barre uu isna ku andacoonayey; Intaan daba dhilifyada iyo calooshood u shaqaystayaalka igu meegaaran ee i weeraraya xukunka uga tagi lahaa ee aan dayici lahaa xilkaan shacabka u hayey waxaa ii dhaanta anoo keli taliye noqda oo aan cidna aaminin.

Wuxuu ku hal qabsanayey si uu taas u meel mariyo; Aqoon yahan Kacaan diid ah, Jaahil Kacaan ah ayaa ka roon. dhanka kalena Jaahiliinta Mareexaanku ma aysan heli karin fursado sallaxan oo ay kaga faa'iidaystaan, maxaa yeelay iyagu ma haysan meel aan xukuumaddaas ahayn oo ay beegsadaan.

Sidoo kale wey ka xukun kululaayeen dadka kale walow la aaminsanaa inaan xukunkuba qaban iyaga, tusaale, iyada oo uu xeerka dhacu dhigayo ciqaab aan dil gaarsiisnayn ayaa todoba nin oo ciidamadii ahaa aanana helin mushaar ku filan iyo waxay dawladda ka dhacaan toona ay haweenay ka dheceen dahab ay ku labisnayd.

Hadaba markii la hubsaday mareexaanimadoodii ayaa si dhaqso iyo ka fiirsasho la'aan ah loogu xukumay dil toogasho ah waana lagu fuliyey, sidaa si la mid ah ayaa boqolaal kale ugu dhimatay kas iyo kama'ba xabsiyadii iyadoo wax maxkamad la soo saaray ay ku yaraayeen, waxay ahayd mid iska caadi ah in lagu adkeeyo ciqaabta qofka Marexaan hadduu dambi galo, iyada oo hadduu kan kiiskiisa hayaa Marexaan yahayna uu ku eedaynayo sumcadduu naga dilayaa, haduu cid kale yahayna uu ugu taagsanayo colaad qabiil awgeed.

Waxaa kale oo la caddaynayaa in laga dhawri jiray qofka iyo qoyska Mareexaan; wax barasho, ilbaxnimo, dhaqaale, dad dhex gal iyo wax kaste oo sare u qaadi kara garaadkooda iyo awoodooda, tusaale; gobolada ay degaan dadkaasi waxay ahaayeen uun beerta Aadanuhu ka soo go'o, oo wiilkooda qaan gaaraba waxaa la isaga dhigi jiray xabadda isagoo jaahil ah oo lagu beer laxawsaday qabiil iyo xukun baad haystaan,

Hadduu ninkaasi ka tago meeshana hilibkiinaa haadda loo warayaa, arintaasina waxay ahayd mid aan isagaba

ka qarsoonayn oo wuxuu ka arkayey bulshada inta kale markuu eego siday ugu ciil cunsan yihiin, ama ugu naqsanayaan iyaga oo isha ku gubaya, faruurtana hoos uga qaniinaya.

Waxaa wax laga naxo ah in goboladaasi ayasan weligood ka helin dawladdaas iyada ahayd wax xuquuq ah oo ay kula siman yihiin gobolada kale, lama arag lamana maqal mashruuc horumarineed oo dhulkaa laga fuliyey iyada oo ay weliba buuxeen Hay'ado deeq bixiya oo keliya sugayey in loo fasaxo maal gelinta halka ay doonaan ama u baahdaan, kuwaas oo malaayiin mayl u soo jaray si ay u hormariyaan reer miyiga Soomaaliyeed.

Sidaa si la mid ah waxaa jiray gobolo dadkoodii qoys qoys gurya loogu dhisay sida magaalooyin ka mid ah gobolada Sh/hose iyo J/dhexe, halka aan ilaa maanta laga helayn xaafiis dawladdu ka dhisatay oo taagan goboladaas dulmanayaasha ah (hal dugsi iyo xabsi laga dhisay G/harey mooyee), sidoo kale waxaa jira kaymo aan cidna degin oo laga dhisay berkado iyo biya xireenno halka ay goboladaasi ilaa maanta la'yihiin biyo ay naftooda  u cabbaan, tusaale Buula-Xaawo hadaad u baahato galaas biyo ah waa in aad u aroortaa Kenya, iyada oo ay mar walba jireen barnaamijyo lagu hormarinayey reer baaddiyaha iyo gobollada.

Waxaaba la yaab leh in aan dhab ahaan loo gaarsiin barista qorista Afka Somaaliga ee ol-olaha lagu gaarsiiyey tuulo iyo baadiye kaste oo dalka ka mid ah. waxaa iiga sii yaab badnayd markaan arkay dad dhallin yaro geel raacataa ah oo la fahamsiin la'yahay sababta dagaalka waddanka ka qarxay iyo in uu jiray nin madaxweyne ah oo iyaga ku cid ah.

Taas waxaa sii dheer in ay Mareexaan u doodayaashu ku adkaysanayaan iyaga oo isku raacsan in uu Barre ka soo dhex xulan jiray hadba kii ugu dhaandhaansan aqoonna aan weligiis urin uuna u magacaabi jiray xil madixiisa ka weyn, ka dibna uu ku dhakhleeyo jaahilkaasi isaga oo aan waxna u aabba yeelaynin.

Wuxuuna middaa iyada ah uga dan lahaa in uu ku qanciyo qoladaas wiilasha xabbadda la isaga dhigo laga rajaynayo, in uu soo dhaweysto mid ay daacadnimana ka suurtowdo aanan lahayn tabar uu ku haweysto, in uu

sidig uga dhigo kuwa kale ee dariiqa la maagan yahay, in ay ka xijaabaan kuwa wax garta ee ka la xiriira xag dhalasho, in uu walacsi uga dhigo qolooyinka kale ee xaggiisa u soo hanqal taagaya, in uu ku mashquuliyo kuwaass isaga damacsan qolada uu ka dhashay si ay foodda u daraan iyaga oo u arkaya xanibka keliya ee hor yaalla ka dibna ay qoladiisu isaga u difaacdo iyaga oo naftooda ku ilaashanaya joogiddiisa, in uu xilligu ku dheeraado muran iyo ficiltan dhex yaalla dhawr qabiil oo aan midkoodna ogeyn waxa uu kan kale ku haysto.

Arintanina kuma ekayn Mareexaan ee qola walba waxaa u joogay maqaarsaar lagu xoodiyo kolka ay kacdoon isku dayaanba, kuwaas oo iyaguna ku ilaashada danahooda, inkastoo ay dantiis ma yaqaan u badnaayeen.

Waxaa ka sii daran in doodayaashu ay caddaynayaan in aysan aslamba arkin xukunka la sheegayey, tusdaale ahaana waxay u garaacayaan in aysan weligood yeelan laba Wasiir oo isku mar ah halka ay qolooyinka ugu hooseeyey ka yeesheen shan iyo lix Wasiir oo isku xilli taagnaa iskuna soo gaaray taliska, tusaale;

**Midgo** waxay ahaayeen dad aan lagu xisaabinin qabaa'ilka Soomaaliyeed, kuna noolaa xaalad dulleysi. hase ahaatee waxaa la arkay iyada oo uu xukunkii Barre ka siiyey jagadii lix wasiir oo isla wada ah qola ka tirsan qolooyinka lagu takoor dambiga la abuuray ee ah Midgaanimo, qoladaas oo ah; Madhibaan, mid ka mid ahayd dawladihiisii faraha badnaa ee maalinba wejiga isu rogayey, waxayna kala ahaayeen wasiiradaasi;

1- Maxamed Cali Samatar; Madaxweyne ku xigeenka koowaad ee dalka, isla markaasna ah Wasiirka Gaashaan dhigga.
2- Maxamed Guleed kaarshe, Wasiirkii Garsoorka iyo arimaha Diinta.
3- Axmed Ashkir Bootaan, Wasiirkii Hiddaha iyo Tacliinta Sare.
4- Amaan Sheekh Cali Samatar, Wasiir ku xigeenkii Wasaaradda Dalxiiska.

Kaasi waa tusaale lagu caddayn karo in Dawladdaasi aysan u janjeerin dhanka qolada Barre, balse ay ku salaysnayd marba koox is fahanta oo isku dan wadaag noqota, waxaana dhacaysay in qolooyin ay mar madax

iyo mijaba isku taxaan qolooyinna ay ka martaan, tusaale qabiilka Dhulbahantaha iyada oo aysan jirin wax uu Barre ugu xilanayey qabiil ahaan ayey isku mar dawladdiisii ku soo bexeen lix wasiir oo isla Dhulbahante ah.

## YAA HANTIDA DALKA GURAN JIRAY?

Waxaa is weydiin mudan sideebay xubnihii dawladdaasi wax u boobi jireen oo ummadda u khayaani jireen? runtii jawaabtu waa mid faallo dheer doonaysa, laakiin haddaan kuu soo gaabiyo akhristow aniga oo ku leh ama rumayso ama ha rumaysan.

Wuxuu hadalkeedu ku yar yahay Maxmed siyaad kuma soo xulan jirin Mareexaanimo kuwa kula shaqaysta hantida dawladda iyo jega ku raaxaysiga, kumana soo xulan jirin tartan aqooneed iyo waxtarnimo ama hawl karnimo ku qotonta wadninimo, kumana soo xulan jirin doorasho Dimoqraaddi ah, ee waxaa ugu weynaa shuruudihii uu waayihii dambe oo dhan uu wax ku soo xulan jiray shuruudahan soo socda, intaas uu soo xushay in ka mid ah iyo in kale ayeyna ahaayeen kuwii wax dhici jiray:

1- waa in uu yahay jaahil ay dadkiisu u haystaan aqoon yahan.
2- waa in uu yahay dammane aan saa u sii fikir iyo aragti dheerayn.
3- waa in uu ka soo jeedo qoys ay qolada uu ka dhashay karaamo u qirsan yihiin.
4- waa in uu ku caan baxay dhuuninimo iyo keli cunnimo.
5- waa in uu yahay xaasid ma jixin jixe ah.
6- waa in uusan lahayn diin loogu soo hagaago oo xumaha ka reebta samahana farta.
7- waa in magiciisa maqal hore laga haystay ee uu san ku soo booddo ku imaan.
8- waa in uu yahay caada qaate, geli kara god kaste oo luqmadi ka gasho.
9- waa in u noqon karaa kaabba qabiil qoladiisa isagoon waxna dhadhansiin.
10- waa in uu yahay doqon kibir ku faanta.

11- waa in ay soo sharraxdaa mid ama wax ka badan oo kamid ah tobaneeya habro ah oo ku khayili jiray agagaarkii Madaxtooyada, ama mid ka mid ah tobaneeyo odayaal khilaaweeyeyaal (sixirooleyaal) ah oo uga dhuran jiray kharashka dalka in ay u ballan qaadaan cimri dheeri iyo xukun waara.

12- waa in uu san Mareexaan ahaanin ayaa iyana ka mid ahayd baan oran karnaa marka aan eegno sida uu uga miiri jiray mar kaste oo uu jagooyin qaybinayo,

Mid midka soo baxaana wuxuu ahaan jiray sabir siin iyo huri weyto, waayo waxay siyaasaddiisu ku dhisnayd kuwakan waadba haysaa oo sinaba kaagama ay go'ayaane kuwa kale kasbo ushaadana u dhiibo mid aad ka qaadan karto, kaas oo kuuna noqon kara maqaar saar iyo hoosaasis. tusaalena waxaa ku filan in aan weli la arag laba Wasiir oo Mareexaan ah oo isku soo gaarta xil wasiirnimo, halka ay ka jiraan qabiillo Mareexaan nuskiis aan dhamayn oo ay isugu soo gaartay shan wasiir isku mar.

Shacabka Somaaliyeed eed kuma leh arintaas waayo waa markii ugu horeysay ee ay dawlad arkaan, waxayna ku soo jireen qabiil qabiil gumaysta.

Tusaalana waxaa kaaga filan kuwii kaga horeeyey taliska Maxmed Siyaad ma ahayn wax ka weyn kaabba qabiillo, taasina ma ahayn mid ay iyagu keensadeen ee waxay ahayd mid ay bulshadu ka dhigaysay, oo waxay oran jireen waa dawladdii reer hebel, waxaana la arkay in aysanba ka qayb gelin dhismaha xubnaha dawladdaas iyaga oo leh tani ma ahan taayadii waa tii reer hebel. tusaale waagii C/lahi Ciise waxaa la dhihi jiray dawladda sacadka (*Governo di sa'a*d),

Haddaba arinta noocan ah ayey ahayd midda uu ka faa'iidaystay Maxamed Siyaad oo u sii seeto dheeraysay xukunkiisii. waayo wuxuu warkiisu ku ekaa in uu yiraaho; Daaroodow anigu adinkaan idin difaacayaa ee waan iska tagi karaa oo meeshaan doonaan adduunka ka mari karaa, xukun iyo nololna uma aan ciil qabo,

laakiin waxaan dhawrayaa waa naftiina, waayo waad arkaysaan in anoo idin dhex taagan hilibkiina haadda

loogu warayo si silic iyo saxariir ah ee bal maxaad u malaynaysaan haddaan idin ka tago oo la idinka gacan sareeyo. hadaba talo idinkay idiin taalla, ama i fasaxa oo wixii la doono ha la idinku falo ama aan idin difaacee igu caawiya. hubaal iyaguna ma haysan meel kale oo ay irkadaan oo waxaa dib ka soo riixayey kuna qasbayey taas ummaddii kale.

## MAXAA TUSAY DADWEYNAHA MARREEXAAN?

Haddiise la is weydiinayo maxaa Mareexaan iyo shacabka kale is tuasay jawaabtu waxa ay ku soo gaaban kartaa, iyada oo dib isha si xaqaani ah loogu celiyo iyo in qodobada soo socda lagu sii dabakho:

1- Tan ugu horaysa uguna weyn waxaa la oran karaa waa ol ole ka socday xagga siyaasadda arimaha dibadda oo qolooyin ajnabi ah ayaa guntiga u dhuuqsaday sidii ay xukunkaas ku ridi lahaayeen, waxayna mar walba isha ku hayeen isha siyaasadeed ee u furani in ay tahay iyaga oo ugu kacsha shacabka hab qabiili ah.

Tallaabadaasina ma ahayn mid ku cusub siyaasadda Soomaaliyeed oo waxa weligeedba uu gumaystuhu ugu cayaarayey waxa ay ahayd adeegsiga qabiilka. Tusaale waxa arintaa inooga filan ficilkii Mingstihii ay dagaallamayeen uu kula dhaqmayey shacabkii Soomaaliyeed ee isaga ku hoos noolaa,

Taas oo ay ka mid ahayd in qolooyinkii Mareexaan ee shacabka u ahaa uu iyagii iyo hantidoodiiba u qaybiyey qolooyinka kale ee la degan isaga oo u tusinayey in ay xoolohoodu dhac ku banaan yihiin, maxaa yeelay waxa ay ka soo rartaan Soomaaliya oo waa hantidii walaalihiin kale.

Sidaa si la mid ah waxaa isna ficiltan ahaan u samaynayey Barre oo tusinayey shacabka reer Ithiopia in ay ku hoos dullaysan yihiin xukun qabiil, waxaadna arkaysaa in ay dad weynaha Soomaalidu dalka Ithiopia oo dhan u yaqaanaan Amxaaro, iyada oo dhab ahaan la

ogyahay in Amxaaro ay tahay uun mid ka mid ah qabiillada reer Ithiopia.

Sidaa si la mid ah waxa aad arkaysaa dadweynaha reer Ithiopia oo u yaqaanna Soomaali oo dhan Mareexaan, gaar ahaan halka ay degaan Mareexaanku ee gobolka Nageyle iyo nawaaxigiisa, waxaana la arkaa in marka ay Soomaali iyo Ithiopia dagaallamyeen ay dad lahaayeen waxaa dagaallamayey Amxaaro iyo Mareexaan.

2- Mucaaradkii gudaha oo iyagu aan marnaba wax aqoon iyo khibrad siyaasadeed ah aan lahayn oo keliya ku dhaqmayey dardaaranno ay soo siiyeen cadawga dibadda iyo falal qabiil siyaasad u adeegsi ah oo ay ka fiirsadeen isla Keli taliyihii ay ku andacoonayeen in ay hagaajinayaan wixii uu halaynayey.

Sidaa darteed aan marnaba isku dayin in ay kacdoonkooda iyo gedoodkooda u adeegsadaan wax aan qabiil ahayn, maxaa yeelay wax war ah uma aysan haynin in ay jirto nooc kale oo siyaasadeed, haddaba waxa ay har iyo habeen kuwaasi ku mashquulsanaayeen ku kicinta shacabka Soomaaliyeed in ay tusinayaan falal qabiil u adeegaya oo loo saarinayo Barre, isla markaasna xalka laga dhigayo aan isaga iyo qoladiisa uu u shaqeeyaba cirib tirno.

Waxayna xukun damaaciyaashaasi ku beer dulucsanayeen qabaailkooda in ay marka ay xukunka qabsadaan iyaga ku wareejin doonaan wax alla iyo waxa uu dalku hanti leeyahay iyo waxa jago ah oo dhanba.

Sidaa darteed waxa ay guud ahaanba shacabka Soomaaliyeed iyo kuwa kale oo badaniba ku dhex noolaayeen ilaa hadana ku dhax nool yihiin xurgufo iyo ficiltanno u dhexeeya laba shakhsi oo ay naftooda iyo maalkoodaba ugu huraan sidii ay qolaba mid ugu adeegi lahayd iyaga oon badanaaba is ogeyn.

3- Faham la'aan dawladeed iyo shaqo dawladeed oo si culus u haysatay shacabka Soomaalida guud ahaantiisba, taas oo keenaysay in ay kuwana aaminaan in ay ku hoos noolyihiin gumaysi iyo isa saraysiin reer hebel, kuwa kalena tusinaysay in ay yihiin boqorro saldano haysta oo ka sareeya inta kale.

4-Ina Barre qudhiisa oo fidnadaas shidayey si uu xoog difaaco uga helo tolkiisa, ka dib marka ay noqdaan dhibanayaal naftooda kala baqanaya kuwa kale, wuxuuna adeegsan jiray xiilado fara badan oo uu u adeegsanayey si uu ugu soo jeediyo aragtida dadweynaha qabiilka isaga lagu tuhmayo, si ay iyaga uun ugu mashquulaan halkii ay isaga ka arki lahaayeen, tusaale:

Waxa uu ka soo xuli jiray Mareexaanka afraad aan loogu dhibcin caqli iyo cilmi toona oo qawlaysato ah, wuxuuna sii xulan jiray dhallin yarada fud fudud ee uu ka rajaynayo in ay wax qasaan ka dibna umal ku reebaan dadweynaha kale, qoladoodana ku dhiiri geliyaan wax qaska, iyo sidaa oo kale dadka laga didayo ama laga hinaasinayo, tusaale:

Waxaan maalin la kulmay inan dhallin yaro ah oo madax ka ahaa Wershaddii yaanyada ee Itop, markaa ayaan weydiiyey waxa uu soo bartay iyo Digriiga uu wato, laakiin isaga oo su'aashayda la yaabban ayuu iigu jawaabay (war anigu nin mutacallin ah ayaan ahay oo 114 ka Qur'aanka ayaan dhameeyey).

Haddaba anoo ninkii iyo xaalkiisii la sii amakaagsan ayaan maalintii dambe arkay walaakiis la dhashay oo Yurub shahaado sare ka soo qaatay, laakiin dalka shaqo ka waayey oo isagii shaxaad ka sugaya, ka dib markii aan weydiiyey sababta uu shaqo ku waayey isaga oo weliba cilmi farsamo oo loo baahnaa yiqiinay waxa uu ii sheegay in marka uu Shirkad shaqo ka doonaba loogu diido Mareexaanimo awgeed, shaqo dawladeedna loogu diiday aqoontiisa awgeed.

Waxaa iiga sii darnayd, ka dib markii ay Ayaan oo aan isla shaqayn jiranay i weydiisatay in aan ku kaalmeeyo xag dhaqaale maadaama aan Mareexaan ahay ee ay hadaladani na dhex mareen:

Ayaan: Waar Qaasimow reerkeennii oo aad ka soo sal kicseen Hargeysa ayaan u la'ahay meel aan dejiyee isii guri ama laba boos oo banaan si aan mid ugu gado oo kan kale ugu dhiso.

Aniga: Walaal, aniguba boos iyo guri toona ma lihi.

Ayaan: Kaama rumaysanayo, waayo kuwii laba sano ka hor ku soo biiray Mareexaanka ayaaba wax walba maanta ka deeqtoon oo laga haqab tiray dhaqaale iyo jago intaba, Tusaalena waxa aan kuu siinayaa:

Xasan Jilicow Maslax, Duqa gobolka Banaadir, saddex sano ka hor waxa uu ahaa Abgaal, ka dib markii uu Mareexaanoobayna waa adigaa arkaya daaraha uu dhistay iyo derajada uu gaaray, Haddaba miyaad iga dhaadhicinaysaa adiga oo kaga soo horeeyey Mareexaanimada in aad weli qatan tahay?

Waxaan si cad u dareemayey in Ayaan ay arintu ka tahay daacad, oo inkastoo ay ahayd qof muddo ku dhex jiray hawlo dawladeed ay ahayd qof ay ka tan badiyeen dacaayaadka la faafiyo iyo waxyaalaha indha sarcaadiska ah ee la isku aad aadiyo.

Waxaan weydiiyey C/qaadir oo aan horay isku meel uga shaqayn jirnay ka dibna laga hoos baxshay shaqadiisii lagana dhigay baagamuuddo, taas oo loo aanaynayey Mareexaanimadiisa awgeed, waxaana ka mid ahaa wixii aan weydiiyey:

Mar hadaad C/qaadirow haysatid shahaadad ugu saraysa aqoonta PHD, aadna ka soo qaadatay weliba dalka loogu tix gelin ogyahay maanta USA, fursad kale oo aad haysatidna ay tahay adoo la qaraabo ah Madaxweynaha dalka oo ay aqoon shakhi iyo qaraabo idin ka dhexayso maxaa kugu kallifay in aad shaqo la'aan ahaato oo aad aniga i shaxaaddo?

C/qaadir wuxuu iigu jawaabay, ma waadan ogay in aan dambiile dalka ka ahay, oo aan ku jiro dambi aan marnaba la ii cafin karin? oo muxuu yahay dambigaasi ayaan weydiiyey, markaa ayuu iigu jawaabay: waxaan noqday Mareexaan Waxna waan bartay, dambi ka weyn oo ina adeerkey Barre laga galaana ma jiro. Haddaba ninkaas waxaa la dhalatay laba nin oo kale oo midna ka yar yahay midna ka weyn yahay, labadoodaasna waxa uu Barre u kala dhiibay shaqooyin sare oo kala ah:

Walaalkiisa ka yar oo haysta shahaadad Dugsiga sare waxa uu Maareeye ka ahaa Shirkadda ugu dhaqaalaha badnayd dalka ee Somalfruit, walaalkiisa ka weynna wax ma qori karin wuxuuna u magacaabay Barre kaaba

qabiilka Jilibka ay ka dhasheen, wuxuuna ahaa ninka isku xira siyaasadda madaxtooyada iyo qabiilka isaga oo isla markaasna ahaa la taliyaha qarsoodiga ah ee madaxweynaha.

Arimaha caynkaa ah waa kuwa ay ku adeegtaan guud ahaanba dadka aan lahayn tabar aqooneed iyo kalsooni ku filan isla markaana isa siiya meel iyo hanti aysan gaarinin. Waxa uu ka baqayaa haddii uu la tashado ama la hawlgalo ruux ka tacliin badan uu dibadda ku soo dhaco, ama ay ugu yaraan soo baxdo maan gaabnimadiisa iyo gefafkiisu. Sidaa darteed waxa uu ka door bidayey wanaagga oraahdiisii uu caddaystay ee ahayd; " Aqoon yahan kacaan diid ah waxaa nooga roon jaahil kacaan ah" taas oo marka si loo eego loo malayn karo suurtagal, waayo kol haduusan ruuxu daacad ahayn aqoontiisu waa kugu lid ee kuma anfacayso, hadana isagu taas kuma salaynin u daacad noqoshada arimaha dalka ee waxa uu ku gaabsaday udaacad noqoshada isaga kursigiisa.

Midda kale ee Soomaalida jiha wareerka gelisay waxa ay ahayd in ay ka damiin ahaayeen macnaha dhabta ah ee ay dawladi leedahay oo aan weligoodba kala saarin dawlad iyo qabiil. Taas oo jirta ayaa waxaa xukunkii majaraha u qabtay dadkii waqtigaa Soomaalida ugu madax taagnaa oo ahaa adeegayaashii, booyaasooyinkii, iyo karaaniyaashii gumaystayaashii, markaa ayey ku sarkhaameen mas'uuliyaddii loo dhiibay waxayna dhaar ku mareen in ay iyada uun ku dhankaxaan. Waxaa ka mid ah waxyaalihii dadka isaga qasmay ee ay isku wadi waayeen; sida lacag badan loo helo, isla markaana dalka wax loogu qabto, sida magac loo yeesho isla markaana dadka kale loo toosiyo, sida geesi caan ah loogu caan baxo isla markaana aan gef loo gelin, iyo kuwa kale oo badan.

Haddaba dhibaatada teeda ugu weyn ayaa ah mid ka timid in ay tooseen dadkeennu waqti ay umadihii dunidu badh-badhaadheen, oo uu qof walbaaba ku nool yahay nolol caaddaas ah, laakiin iyagii ay sagxada fadhiyaan. Markaa ayey hawlihii oo dhami kedis iyo berded ku noqdeen, waxayna shaqo ka dhigteen in ay iyagu uun is daba galaan oo uu mid waliba rumaysto waxa ay maskaxdiisu u sheegayso ee uu kan kale ku tuhmayo. Halkaasna waxaa iska kaashaday cabsidii laga qabay in

ay Fowsiyo geyso caashaqa afka webi ganaane iyo Gedo, iyo bidhbidhaan nafci oo ka muuqanayey dadka qaarkood, halka ay qaarkii kale weli wax ku sari la'yihiin.

Gabangabo; Qofku ma ahan qabiil, Qabiilkuna ma ahan qof, ee qofna waa qof, qabiilna waa qabiil. dawladna waa dad isku dhaf ah oo is wada eeganaya ee ma ahan boqortooyo rayad gumaysata.

Waxaa haboonaan lahayd in uu qofku is weydiiyo waxa uu horta u qaban karo ina adeerkiisa Hay'ad hebla madaxda ka ihi. Waxaa dhab ah in uusan irbad u goyn karin, waxaana sababaya waxyaalaha ay ka midka yihiin;

1- Ina adeerkaaga madaxda ihi waa uu kaa faanayaa, wuxuuna aaminsan yahay in ay derajadani ugu timid fiicnaan uu kaa fiican yahay, oo hadduu dib kuugu soo noqdo, wuu is hoojin.

2- Wuxuu aaminsan yahay in aysan tani marnaba ka dhamaanaynin, oo ay waqti walba derajadiisu kor usii kacayso.

3- Wuxuu aaminsan yahay in adigu aad tahay mid Alle dulleeyey oo aan wax rajo ah lahayn, sidaa darteed aysan wax macno ah samaynaynin in lagu taageeraa.

4- Waxa uu ku fikirayaa in uu shaqaale iyo waardiye kaa dhigto, oo haddii uu ku qiimeeyo waad dhaafaysaa.

5- Waxa uu ka cabsi qabaa in aad ku ciriirido weji iyo sharaf uu ku lahaa bulshada dhexdeeda, kaas oo ahaa; in uu isagu yahay kan ugu wanaagsan tolkiisa dhan walbaba.

6- Waxa uu helaa kuma soo gaari karaan oo waxa aysan weligood ka badnaanaynin baahida isaga, ilmihiisa, iyo xaaskiisa.

7- Waxa uu kaala bakhaylayaa inta uu kuu qabto ama ku siiyo oo uu is leeyahay waa intaas oo ay xeradaada ka dhimanaataa, ama ay kaa horistaagtaa mid kale oo aad heli lahayd.

8- Waxa uu doonayaa in wax taro mid ka sii sareeya oo uu berri isna wax ka heli karo, ama uu ku ilaashanayo meeqaankiisa.

9- Waxa uu doonayaa in uu caawiyo mid ay dad kale ku amaanayaan ama ugu yaraan ogaanayaan waxtarkiisa.

10- Waxa uu iska dhisayaa kuwa ay isku sheekada yihiin, oo haday ku fahmaan in ay ina adeeradiis

ubaahan yihiin u arkaya in uu ka yimid ehel hooseeya. sidaa darteed waxa uu ku leeyahay hana ceebaynin.

11- Waxa uu ka dheeraanayaa in la isku kiin arko, oo markaa uu qab jabo.

12- Waxa uu ka baqayaa indha fara badan oo markaste eegaya dhaqdhaqaaqiisa iyo bal in uu cidiisa wax taray, sidaa darteed waxa uu ka baqayaa in aaad shaqadiisa u baas baxdid, oo lagu soo eedeeyo in uu qabyaaladiiste noqday.

13- Waxa uu diidan yahay in uu layn furo, ama doonayaa in uu layn xiro, oo waxa uu ka dhawrayaa kuwa la shaqeeya in ay iyaguna dadkooda wax u tar is yiraahdaan, kadibna la bililiqaysto hantidii dadweynaha. Halkaasna uu ku waayo dheeftiisii yarayd.

14- Waxa uu diidan yahay in uu ku furmo layn qaraabo oo mid walbaaba uu ugu yimaado waxtar uusan awoodin, isaga oo ka cararaya eed.

15- Waxa uu noqon karaa mid u daacad ah nidaamka, ama Alle ka cabsada oo ka dhawrsanaya in uu xaaraan ku dhaco.

**Cutubka Saddexaad**

# MADAXWEYNE HALAYGA DHIGO

## SIDA MADAXWEYNE LOO NOQDO

Waxaan shaki ku jirin in inta badan shacabka soomaaliyeed ay yihiin kuwa ay madaxweynenimo derdertay oo maskaxdoodii la galay, haddaba waxay ila tahay in daaweyntooda lagu daro iyadoo laga dhaadhiciyo waxa ay tahay madaxweynenimo iyo cidda xaq u leh si aanay u helin xujjo ay ku bannaystaan xadgudubkooda, isla markaasna loogu arko waalane kii sii wada in uu ku sii doonayo xoog iyo bahalnimo.

Magac bixinta Madaxweyne oo maanta ka maraysa dalka marxalad aan la heli karin si loo xaal mariyo, oo looga raalli geliyo ku xadgudubkii iyo dhaamiddii ay ku dhibeen kuwii isaga aabyooday iyaga oo aan wax bawsi

ahna ka haysan ujeedada laga leeyahay ayaa guud ahaanba waxa ay tahay mid uu sharraxeedu aad u ballaaran yahay, loona baahan yahay in loo daayo qoraal u gooni ah si looga bogto sharaxeeda,

Sidaa darteed kani ma ahan qoraalkii aan ku fasiraynay ee keliya waa kii ina tusinayey shuruudaha looga baahan yahay ku kaste oo soo han qaloocsada madaxweynenimo guud ahaanba iyo gaar ahaan Soomaaliya. Si kalena haddaan u dhahno kii ku haboonaan lahaa in uu ka noqdo madaxweyne dalka Soomaaliya. Sidaa awgeed anaga oo ku tabakhayna xaajada gurracan ee dalka iyo sida ay dantoodu ku jirto ayaan isku dayeynaa in aan ku bidhaamino toosh lix qaad ah dariiqa loo marayo madaxweynenimada Soomaaliyeed.

Waxaana dhab ahaantii lagu dari karaa ka wada xaajoodka; Yaa Soomaali Madaxweyne u noqonaya, inta aan la soo hadal qadin erayga Madaxweyne. Haddaan arinta ka eegno sida ay horay ugu faahfaahiyeen culimada diinta Islaamku, waxa ay ku soo aruuraysaa dhawr shardi oo ad-adag kuna wada salaysan Qur'aanka, Xadiiska, Qiyaaska iyo Ijtihaadka. Waxaana shuruudahaas inta la isku waafaqsan yahay lagu soo koobi karaa;

Waa in uu Muslim yahay, waa in uu qaan gaar yahay, waa in uu maskax iyo muruqba u caafimaad qabaa, waa in uu xor yahay, waa in uu nin yahay, waa in uu caabid Alle ka cabsi badan yahay kuna fogaado xagga dhawrsanaanta iyo is ururinta, waa in uu caddaalad yahay, waa in uu caalim yahay,eeg

باب .أبن تيمية -الماودي ، و السياسة الشعية -ألأحكام السلطانية )
الشروط الولي.

Waxaa kale oo jira dhawr fikradood oo kale oo la isku khilaafsan yahay sida; Waa in uu ka dhashaa Qureysh, laakiin ma ahan kuwa aan ku soo qaadan karno halkan faa'iido daradooda awgeed.

Naynaastan ama derajadaan Madaxweynenimada, waxaa jirta in oo loo adeegsado naynaasyo kale oo hogaamin wada tusinaya, sida kuwa kale ee faraha badan ee ay kala isticmaalaan ama kala isticmaali jireen quruumaha dunida ku kala firirsani; sida; Imaam, Amiir, Khaliif, Taliye, Hogaamiye, Maamule, Wakiil, Wali, Gudoomiye, eeg bogga 4- 9 ee;

( علي ابرهيم حسين :حسن ابرهيم حسين و د :د :تأليف -النظم الاسلامية.
مكتبة النهضة الاسلامية).
iyo 130 - 179 ee ( Le droit du Califat. El-mawerdi).

Haddaan mawduuca dhab u taabanno; way jiraan shuruudo mar hore looga dejiyey caalamka in lagu doorto kan noqonaya madaxweyne, inkastoo ay wax xoogaa kala yara duwan yihiin shuruudahaasi marka loo eego xagga mabda'a, caqiidada, dhaqanka, deegaanka, iwm, oo ay qolo walbaaba leedahay shuruudo ay kaga duwan tahay kuwa kale, taas oo u laabanaysa hadba sida ay iyaga maslaxadoodu ku habboon tahay ama ay diintoodu farayso oo ay aakhiradooda ku dhawranayaan.

Haddaba anaga oo taas ka duulayna ayey nala gudboon tahay in aan inana u degsano shuruudo cad cad, si aan midna ugu xad gudbin sharciga u yaalla ummad, ha ahaado mid diini ah ama mid la alliftaye.

Sidaa ayey shuruudaha soo socdaa ugu qotomaan sharciga Islaamka iyo danta ummadda Soomaaliyeed, tiiyoo qodob kaste loola noqonayo asalka diinta, waxaana ka mid ah meelaha aan ka qiyaas qaadanayno shuruudihii Eebbe ku soo doortay qaar ka mid ah Nebiyadiisii iyo Adeegayaashiisii barakadaysnaa, si aan uga cibra qaadano xagga mas'uulnimada iyo maamul hantinta.

Haddiise aan isha ku jalleecno cilmiga hogaamiyenimada (*leadership)* oo ah asalka ugu horeeya ee maanta laga qaato talada, tacliinta iyo maamulka hogaamineed, waxaa jirta in ay in badan ku doodeen culimada cilmigaasi; Hogaamiyenimada waa loo dhashaa ee la iskama dhigi karo iyo looma dhasho ee waa wax uu ninkii doonaa kasban karo. Waxaana la arkaa ay marka la isku xaabiyo fikradihii beri hore ay dadku ka qabeen hogaamiyaha iyo midda ay dad badani iminka ku doodayaan in ay isku raacayaan; Hogaamiye waa loo dhashaa ee la iskama dhigi karo.

Si kastese arintu ha ahaatee waxaa lama huraan ah in qofka hogaamiye bulsho u noqonayaa uu kulansado sifooyin wanaag oo fara badan kuwaas oo uusan la'aantood sii wadi karin maamul xataa haddii marka hore qalad ahaan lagu siiyo.

Tusaale, waxaa lama dhaafaan ah in kan taliyaha reerood ihi uu noqdo mid aragti dheer, mid mustaqbalka wax u diyaariya, mid tala raac iyo tala keenba leh, mid naftiisa xukumi kara, mid dadka kale ku abuuri kara in ay naftooda xukumaan, mid sida uu rabo ugu maamula bulshada isaga oon qasbin ee ay adeecsan yihiin, mid isku xira bulshada iyo dawladda, mid isku xira bulshada, dawladda, iyo abuurohooda.

Anagoo taa sii tixraacayna bal kaalaya aan inaguna soo ban dhigno shuruudaha looga baahan yahay ninka noo noqonaya madaxweyne, tiiyoo aan cuskanayno diinta Islaamka, aanana ku salaynayno xaaladda dalkeenna, duruufteenna, danteenna, dabcigeenna, diinteenna, iyo la noolaansha dunida kale. waxayna noqon karaan shuruudahaasi;

1- Waa inuu muslim yahay.

)War hooy kuwa xaqqa rumeeyow ha ka dhiganina cadawga Eebbe iyo cadawgiina (gaalada)sokeeye aad jacayl u gudbinaysaan) Al-mumtaxina;1.

2- Waa inuu Soomaali yahay. nebi walba Ilaah wuxuu u dirayey qoladuu ka dhashay.

3- Waa in uu lab yahay. dumarka Ilaah wuxuu ku mashquuliyey hawlo ka weyn madaxweynenimo.

4- waa in uu fayow yahay,. waa shardiga mukalifnimada.

5- waa in ay da'diisu ka yaraan 40 jir ilaa 50 jir,

(markuu gaaray xoogiisa oo ekaaday baan siinay xikmad ( xukun) iyo cilmi, saasaanan ku abaal marinaa sama falayaasha) Al-qasas;14.

6- waa in uu yahay caabid u heellan cibaado fal iyo Alle ka cabsi.

7- waa in uu u taagan yahay sama farka iyo xuma reebka.

()Waa kuwa tawbad keena, ee caabuda (Ilaah), ee mahdiya, ee soomana jihaadana, ee rukuuca, ee sujuuda, ee fara wanaagga reebana xumaha, ee dhawra xudduuda Eebbe, ee u bishaaree (mu'miniinta) Attawbah; 112.

8- waa inuusan horay dalka iyo dadka toona dambi uga gelin.

(قال رب اني قتلت منهم نفسا فأخاف ان يقتلون) القصص:33.

(wuxuu yiri (Nebi Muse) Eebow waxaan ka dilay naf oo waxaan ka cabsanayaa in ay idilaan (war ay iga maqlaanba daaye).

8- waa in uu ku haystaa takhasus wax barasho oo heer sare ah hawshiisa.

(wuxuuna yiri Yuusuf iga yeel Masuulka khasnadaha dhulka (dalka), waxaan ahay aamin ku cilmi lehe) Yusuf; 55.

9- waa in uu  yahay mid ku caan baxay aaminimo, iyo karti.

)oo runtii anigu waxaan ahay mid ku xoog badan arinta aamina ku ah) Al-namal; 39.

10- waa inuu yahay mid ku adag wax qabadkiisa.

(runtii cid la ijaarto (la doorto) waxaa ugu kheyr roon mid xoog badan oo aaminna ah) Al-Qasas;26.

11- waa inuu yahay mid leh karti iyo firfircooni uu kaga mira dhaliyo cilmi sare oo uu wax qabadkiisoo dhan ku saleeyo.

(wuxuu ku yiri Nebigoodii; Eebbe wuxuu idiinku soo bixiyey (idiin kaga dhigay) boqor Dhaaluut, say dheheen sidee buu noogu noqon karaa boqor annagaaba uga xaq lehe, lamana siin xoolo badane. wuxuu ku yiri Ilaahay baa u doortay korkiinna (madaxweynihiina), wuxuuna u kordhiyey waasacnimo cilmi iyo jismi (karti)). Al-baqra; 247.

12- waa in uu yahay mid wax ku xukumaya sida xaqqa ah een marnaba eegayn masaalix gooni ah, iyo si la isku raaco oo kale toona..

(Da'udow annagaa kaaga dhignay khaliif dhulka ee dadka ku kala xukun xaqqa, hana raacin hawada yeysan kaa lumin jidka Eebbe) saad;26.

13- waa in uu yahay nin ku caan baxay caddaaladda iyo sinaanta eex la'aaneed.

(Eebbe wuxuu idin farayaa in aad siisaan amaanada ehelkeeda, hadaad kala xukumaysaan dadkana in aad ku kala xukuntaan caddaalad) Annisaa; 58.

14- waa in ay caddaaladdiisu lafaha tahay oo ku dheehan tahay jirkiisa kana dhadhantaa oraahdiisa  dhab iyo kaftanba.

)oo hadaad hadlaysaan caddaalad fala, qaraabadaba ha ahaatee (waxay yihiin caddeeya), oofiyana ballanka

Eebbe, sidaasuuna Alle idiinkula dardaarmay waa intaas oo aad waantowdaane). Al-ancaam;152.

15- waa in ay ujeedadiisu tahay gudashada ballanta Eebbe.

(oofiyana ballanka illeen ballanka waa la is warsane) Al-ancaam;34.

16- waa in uu u tababaraa dadka in ay aqbalaan xukunka Shareecada Islaamka.

( Allahaagaan ku dhaartaye ma aysan rumayn ilaa ay kaaga xukuntamaan (la tiigsadaan quraanka), wax alle iyo wixii dhex mara dabadeedna aysan ka helin naftooda dhib (ku qancin) waxaad ku xukuntay oo ay hogaansamaan hoggaansi dhab ah) Annisa;65.

17- waa in ay madashiisa sharci dejineed ahaataa kitaabka Qur'aanka ah iyo Sunaha oo keliya.

(hana ku gadanina aayaadkayga lacag yar, oo ciddaan ku xukumin wuxuu soo dejiyey Ilaahay, kuwaasi waa gaalo) Al-ma'idda;44.

18- waa in uusan isagu marnaba doonayn una soo halgamin inuu madaxweyne noqdo

(waxaa laga soo weriyey Abii Muuse in uu yri; Aniga iyo laba nin oo ilma adeeraday ah baa u soo galnay Nabiga NNKHA. markaa ayuu midkood ku yiri; Rasuulkii Ilaahayow nooga amiir dhig wax ka mid ah waxyaaluhuu Ilaahay kaaga waliga dhigay (jago noo dhiib), suuye kii kalena tabtaas oo kale. Markaa ayuu Rasuulkii ku yiri; Wallaahi inaanan anagu uga madax dhigin hawshan (hawlaha dawlada Islamka oo dhan) qof isagu soo weydiistay ama mid u soo dadaalay helitaankeeda toona); W.W; Bukhaari, Muslim iyo abu Da'ud.

19- waa in uu ku socdaa Shuuro, wada tashi dimoqraadiga runtaa ah.

20- waa in uu ku aqdaantaa Ilaah tala saarasho iyo ilaah kaalma weydiisi.

(Kalana tasho amarka, markaas hadaad wax go'aansatana tala saaro Eebbe (oo ku dhaqaaq).Al-cimraan:159.

21-- waa inuu ahaadaa mid ku caan baxay Ikhlaas- Ilaah dartiis wax kaste u qabasho.
22- waa inay akhlaaqdiisu ku dhisnaataa Quraanka,
23- waa inaysan ku jirin qalbigiisa inaba haba yaraatee wax kibir iyo isla weyni ah ee uu aaminsan yahay in isaga iyo xamaaligu isku mid yihiin.
(Una raarici garabkaaga (u naxariiso)ciddii ku raacda oo Mu'miniinta ah).Al-shucara': 215.

24- waa in uu yahay mid aan ka xanaaqin wax kaste oo ka soo gaara ummadda kale oo uusan marnaba hawaysan aarsasho, balse ku tarbiyeeyaa dhibihiisa si uusan ugu sii jirin wax dhibaataynta, taasoo uu u marayo jid aan ahayn jid ciqaabeed.

((Ahlu jannuhu waa) Kuwa wax bixiya waqtiga ladnaanta iyo dhibkaba, ee damiya carada ee iska cafiya dadka, Eebana waa jecel yahay samafalayaasha).Al-cimraan:134.

26- waa inuu cuskadaa sabir iyo ad-adkaysi.

(Kuwa xaqqa rumeeyow sabra oo sabirtama kuna negaada dhawridda (xuduuda Islaamka)) Al-cimraan; 200.

27- waa in ay ka mid ahaataa akhlaaqdiisa; sharaf iyo karaamo dhawr, qalbi xaarnaan, sama fal, ixsaan fal, sakhinimo, naxariis guud ee laagu naxariisto kulli noole iyo ma noolaba, run ku aqdaamasho, been iyo malo ka dheeraan, dhawrsanaan, xishood,

28- waa in ay sifooyinkiisa iyo caadooyinkiisa kamid ahaadaan; aakhira dalab, caqli badnaan, xikmad adeegsi, geesinimo, runlownimo, ballan oofin, xaq ku sugnaan, khayaale iyo hallaasi ka dheeraansho, ihtimaam siin maman oo uu u hayo shaqadiisa hogaamineed marka loo dhiibo ka bacdi, xil iska saarid guud ahaanba muslimiinta ku nool gudaha iyo dibadaba, ku dhaqan walaaltinimo ilaahay dartiis ah, iyo danta guud oo uu mar walba ka hormariyo tan gaar ahaaneed.

29- waa in uu yahay nin dhiifoon oo wax walba damcaya inuu helo jawaabtooda. iyo asalkooda.

(xusuuso markuu yiri Nebi Ibrahim Eebow i tusi sidaad u noolayso waxa dhinta, suu Ilaah ku yiri, oo miyaadan rumayn (xaqqa), uuna yiri; waan rumeeyey laakiin (waxaan doonayaa) si uu qalbigeygu u xasilo ) Al-baqra; 260.

30- waa in uu yahay nin haleeli og xujaysiga marka dooda.

(ka waran kii kula murmay Nebi Ibrahim Rabbigiis, (waa namruud) in Eebe siiyey xukun, markuu Nebi Ibrahim yiri Rabbigeygu waa kan waxna dila waxna nooleeya, ee uu yiri (gaalkii) amba waan nooleeyaa waanan dilaaye, markaasuu Nebi Ibrahim yiri hadaba Ilaahay Bari buu Qorraxda ka keenaaye car ka keen galbeed. saa waa la wareeriyey kii gaaloobay, Eebana ma hanuuniyo qoom daalimiin ah) Al-baqra;258.

31- waa in uu leeyahay fasaaxo luuqadeed iyo aftahanimo uu dadka wax uga dhaadhicin karo.
( Oo walaalkey Haaruunbaa iga carrab fasiixsane ila dir, si xoojin ah, ha iirumeeyee, waxaan ka cabsan inay i beeniyaane) Al-qasas;34.

32- waa in uu yahay nin aqoon waafi ah ka haysta hiddaha iyo dhaqanka bulshada ama qawmiyadda, garan karana waxa ay dhibsadaan iyo waxa ay jeclaystaan. Bal eeg Nebi walba waxaa loo dirayey ciddiisa waxaana lala dirayey luuqadooda.

33- waa in uu dhab u yaqaan deegaanka iyo dabeecaddiisa, sida ay tahayba inuu u fahamsan yahay guud ahaanba kheyraadka iyo wax kastoo lagaga faa'iidaysan karo dhulka iyo wixii ku jiraba.

34- waa in uu hayaa qorshe cad oo uu ku hormarinayo dalka dhan walbaba oo quseeya nolosha, jiritaanka, awoodda iyo sharafta mujtamaca.

35- waa in uu la socdaa dhacdo kaste oo ka dhacda meel kaste oo ka mid ah dalka, isla markaasna uu markiiba soo caddeeyaa xal wax tar ah ee uu wax kaga qabanayo. Cumar Bin khidaab oo cabbiraya dhibka mas'uuliyadda uu hayo ayaa yiri; (Wallaahi anigu waxaan ka cabsanayaa in la i weydiiyo Tulud (neef la rarto) ku luntay Ciraaq salkeeda maxay jidkeedii u geftay?).

36- waa in uu leeyahay niyad adag oo bir ah si ugu fuliyo hawlihiisa karti iyo firfircooni isku kalsooni ku jirto, taasoo u sababi karta inuu ahaado nin go'aamadiisa wanaagsanna ku ad-adag, kuwa qaldanna ka noqon og.

(Waxaanan ugu qornay Alwaaxda wax kastoo wacdi iyo caddayno ah, ee ku qaad niyad adag (xoogeedu bir yahay) farna Qoonkaaga inay qaataan, ha qaateen teeda fiicane waxaan idin tusaynaa Daarihii Faasiqiinta) Al-acraaf; 145.

37- waa in uu yahay ninka ugu badiya cilmiyada nafciga leh oo dhan Fanni iyo Saynisba````` kuwa kula jira tartarnka, illeen bilowgiiba Eebe wuxuu u dhiibay maamulka dunida kii ugu aqoon ogaa wixii markaa carrada yiilay, kaas oo ahaa aabbeheen Nebi Aadam wuxuu kaga guulaystay tartankaas Malaa'iktii. Ilaah baa yiri;

(Eebe wuxuu baray Aadam dhammaanba magacyadii, dabadeedna wuxuu u bandhigay Mala'iktii oo ku yiri; ii sheega magacyada kuwaas hadaad runlowyaal tihiin (imtixaan), waxayna dheheen hufnaantaada Eebow, anagu garan mayno waxaan ahayn intaad na bartay waxaad tahay adigu wax oge falsan, markaasuu Alle yiri; Aadamow u sheeg magacyadooda, markuu magacyadoodii uga waramay buu yiri Alle; miyaanan idin ku dhihin anigu waxaan ogahay waxa ku cilan samooyinka iyo dhulka, oo aan ogahay waxaad muujinaysaan iyo waxaad qarsanaysaan). Al-baqara; 31-33. Waa in uu leeyahay dhiiri gelin iyo hididiilo

34- waa in uusan iin lahayn, qaab dhismeedka jirkiisana la aqbali karo.

35- waa in uu leeyahay awood uu dadka ku qancin karo.

36- waa in uu leeyahay awood hadal cabbirid.

37- waa in uu wax kaste u leeyahay xamaasad iyo ku mamanaan.

38- waa in uu wax walba ku caddayn karo Daliil cad oo aan laga daba hadli karinin.

39- waa in ay taariikhdiisii meheradeed leedahay xifdis adag oon liic liicanin.

40- waa in ay balwaddiisu tahay dad kaalmayn.

41- waa in ay maskaxdiisu aqbali karto wax barasho hor leh.

42- waa in uu jecel yahay soo saarka wax cusub oo faa'iido u soo kordhiya bulshada fikrad iyo sheyba.
43- waa in uu ku xeel dher yahay fanka maamulka, qorshaynta, kala dhig dhigidda iyo kala mudnaysiinta shaqada.

44- waa in uu ku hormaraa khibradda shaqo iyo adeeg, oo uu ku soo shaqeeyey duruufo kala duwan, iyo cimilooyin kala duwan, iyo jagooyin kala duwan.
45- waa in laga helaa taariikhdiisa dhacdooyin ka marag kacaya sabirkiisa iyo ad adkaysigiisa.

46- Mid kaste oo soo buuxiya shuruudahaas waxa uu xaq u leeyahay in loo soo doorto Madaxweyne ama jago kale oo sare.

Laakiin waxaa shardi ah in ay si madax banaani ah ku soo doortaan guud ahaanba shacabka uu talada u qabanayo, tiiyoo aan la soo qaadanaynin doorasho qiyaaseed iyo doorasho dirqis toona, ee loo daynayo shacabka ha doorteen dantoodee, weliba taasi waa ka dib marka laga dhaadhiciyo shacabka waxa uu yahay la doortahaasi iyo waxa uu qabanayo iyo guud ahaanba qorsha mustaqbaleedka iyo maamulka dawladooda, ka dibna ay la galaan beecada waajibka ah (haddii nidaamku Islaami yahay),

Waxa uu qoray Dr; Ismaaciil Badawi ( Marxaladda labaad ee Beecadu waxa ay tahay midda guud ee ay dadka oo dhami ku dooranayaan hogaamiyahooda la soo sharaxay, Beecadanina waa lagama maarmaan si ay u ansaxdo in la helo hogaamiye fuliya oo suga hawlaha Muslimiinta.

Ibnu Teymiya ayaa yiri; Nina ma noqon karo Imaam ilaa ay ka waafaqaan oo ka raalli noqdaan dadka tabarta leh (gaar ahaan, guud ahaana bulshada oo idil) oo ay caddeeyaan daacadnimadooda, illeen qasadka Imaamnimadu waa si loo helo awood iyo suldaanimo) eeg bogga 121 ee Kitaabkiisa;

Habka ay u dhacayso doorashada Islaamiga ihi waa uun habka maanta lagu sheego caddaaladda iyo

dimoqraadiga oo laga dhabeeyey loona maray marinka waajibka Islaamigaa ah. Wayse adagtahay si maanta caalamka looga helo caddaalad iyo dimoqraadi barax la' oo dhab ah in uu Islaam dhab ihi soo noqdo mooyee.

Waxaana loo soo gaabin karaa warkakan sida uu qoray Abuubakar Jaabir oo yiri; (Runtii sida keliya ee lagu soo dooran karo Xaakimka dawladda Islaamka waa; iyada oo ay si wada jir ah u soo wada xulaan guud ahaanba:

Ahlu - xali Wal- caqdi (guurti gar naqda), ku kala jira bulshada, Indheer garadka, Culimada, Taliyeyaasha ciidamada, ganacsatada sare, Wershadleyda, iyo Samadoonada nin kulansaday Kifaaya iyo kafaa'a (qanaaco iyo sinaan),

Ka dibna la gala heshiis Beeca ah, oo ay kula baayactamayaan Kitaabka Ilaahay iyo sunada Rasuulka oo la oogo, in la badbaadiyo axkaamta Shareecada Islaamka, iyo in loo kaco u halgamidda saraysiinta kelmadda Ilaaha sareeye ah) eeg bogga 41 aad ee Kitaabkiisa;

47- Haddii ay taasi fusho waa in la adeecaa ku kaste oo ku soo baxa xulashadaas xididada adag, iyada oo laga amba qaadayo oraahdii uu Nebigu NNKHA ku caddeeyey in ay waajib tahay in aan nina la yasin, ee la adeeco ku kaste oo u madax noqda Muslimiinta ka dib marka uu soo buuxiyo shuruudahaas;

(Maqla oo adeeca, haba idin madax noqdo addoon Xabashi ah, oo madax jareer ah leh)

**Cutubka Afraad.**

## DAGAALKA

## WAA MAXAY DAGAALKU?
## SIDEESE LOOGA BAXAA?

Siyaabo fara badan oo kala yara duwan ayaa lagu fasiraa erayga dagaal, guud ahaantooduse waa kuwa ku soo wada dhici kara qofka caqliga leh marka uu maqlo Dagaal.

Si kale haddaan u dhahnana waxay noqon kartaa: su'aashaas waxay culimadu uga kala jawaabeen siyaabo kala duwan marka dhan laga eego, laakiin marka dhanka kale ee hab qiyaaseedka laga eego isku si ay noqonayaan dhammaanba jawaabaha ay ka kala baxsheen cilmi baarayaashaas ama aqoonyahannadaasii.

Haddaanse qaar ka mid ah kuwa su'aashaan ka jawaabay tusaale ahaan u soo qabsanno siyaabaha ay u qeexeen markii ay ka jawaabayeen su'aasha ah waa maxay dagaalku? waxaa ka mid ah wixii ay ku jawaabeen;

Maadiyiinta iyo Maarkisiyiinta waa; (dagaalku waa loollan hunguri oo laga dhaxlo dabeecadda).
Taariikhyahanada; (dagaalku waa natiijada khilaafyo dhaqamo iyo taariikho).
Bay'olojiyiinta ama Ijtimaaciyiinta; (dagaalku waa lagdan liibaan doon oo ay isaga guulaystaan aadanuhu)
Dimoqraadiyiinta; (dagaalku waa natiijada sed buursiga iyo naf jeclaysiga lagu kala jiidanayo; maal, dhul, xukun iwm)
(Dagaalku waa amar iska dabiici ah oon ummadina iyo jiilna ka marnaan karin) eeg; Muqadamada (horudhaca) Ibnu khalduun, bogga; 37-aad.

Inkastoo ay culimadu ka yiraaheen qeexitaano badan macnaha dagaalka, hadaanse isku soo wada duubno waxa aan ka qaadan karnaa hadafka iyo biya dhaca ujeedada oo aan la xiriirinayno sida uu tafsiirku noo quseeyo:

Qaanuunyahanadu iyaguna waxa ay ka dheheen sidatan:Dagaalku waa is ka horimaad hubaysan oo ka dhex dhaca laba iyo in kabadan iyada oo la adeegsanayo xoogag hubaysan, ujeedada loo dan leeyahayna ay tahay in la iskala wareego awood iyo xukun. Dagaalna ma guulaysto ilaa uu nabad ku istaago oo soo xasilo.

Dagaalku waa isku dhac waxashnimo oo ka kala dhex hura laba dal iyo in ka badanba, ha la adeegsado Tikniko ama yaan la adeegsane. eeg bogaga; 4-7 ee (*Criminal Law* ) by; Howard, 4the edition.

**IS DAAFICIDDA**

Mar kastaba oo ay kooxi doonayso in ay koox kale gardaraysato ama carro fasahaadiso waxa ay ku marmarsiyootaa oo bartilmaameed ka dhigataa in ay yihiin kuwa la dulmay oo xaq u dirir ah, isla markaasna uu Eebbe ka raalli yahay dirirtooda oo uu ku garab siin doono guul mid adduun iyo mid aakhiro intaba.

Taasi waa mid isaga dabiici ah aadanaha kol walba iyo goor walba, waxayna ku keenaan hab ah Munaafaqnimo la sharciyeystay oo ka soo fushay Mufsidka fikradda hore u soo dejiya oo xoogga saara sidii uu ku duufsan lahaa tiro dadkiisa ah. Iyada oo taa laga hortagayo ayey sharci dejiyeyaasha cilmaaniyiintu ku fogaadeen ka hadalka cinwaanka Naf difaacid (Self deffence),

Waxa ayna ka dejiyeen qawaaniin fara badan iyo shuruudo ay ku xadidayaan qulqulka garadarrooyinka iyo ilaha lagu banaysto reer ku duulka. Waxa ay shuruudahaas iyo sharciyadaasi wada xadidayaan aragtida is daafaca, waxayna inta badan waafaqsan yihiin isla xadidaadda uu Islaamkuba ku xadiday iyo shuruudaha uu u dejiyey.

Waxaa ka mid ah qodobada caanka ah ee ka degan is difaacidda, ee ka diiwaanka gashan qaanuunka caalamiga ah; (qaanuun kaste oo caalami ama dawlad hoose (Municipal) ah, ee reebaya miciinsiga xoogga waxaa lagama maarmaan ahaan u xadidaya xuquuqda is

difaacidda) eeg; In re Hirota and others-1948, A.D. 336,364.

(Naf difaaciddu waa banaan tahay waase in ay buuxsataa shuruudaheeda)= Diplomacy International Law. 174,177- (1972) G. E. do. nascimento et silva.

(ma dhici karto is difaacid lagala soo horjeedsado is difaacid, ee waa in goor walba la sugaa cidda garta leh) = qodobka 51, ee jarterka UN. (USA. v.von Weizsaeckerotal - 1949, 14. M. M. T. 314,329. lambarka 41A.J.I.L. 872,877 ee (1947) oo lala akhriyo isla qodobkaan 51 ee UN charter wuxuu leeyahay; (is difaaciddu waa waxtar xaaladaha qaarkood, waase in ay shuruudaheeda leedahay.

laakiin marnaba wax macna ah ma keento oo waa laga dayriyey, maadaama uu keenayo munaafaqnimo wadadana u furayo gaashaan weerar iyo dhiig banaysi) eeg; R.R. Baxter (the Law of War). Inkastoo mar dambe qodobka marar kale la sii falanqeeyey oo la dabciyey laguna sii sameeyey xakamayn kale, iyadoo qodobkii 39 aad ee isla arintan isna lagu soo leexshay qodobkaan 51 aad markii la isugu yimid kulankii madaxyada dawladaha iyo istateyada ee lagu qabtay Geneva, Jan-1992 kii.

Hadaba si looga hortago ku gabashada nafdifaacashada ayey qaanuunyahanadu dejiyeen xeerar adag oo xanibaya is difaac sheegashada, ayna ka dhigeen dagaalka gardarrada ah dambiga ugu xun ee la galo kana soo horjeeda nabadda adduunka,

Waxayna maxkamadaha Milatarigu adkeeyaan sugitaanka is difaacidda oo xanib weyn saaraan meel marinteeda, xukuno qabiidna ka qaataan sheegashadeeda. eeg; (The Criminal responsibility of States; 39 I. C. L. Q. 345,360 (1990), by; G. Gilbert. iyo (Difinition of aggression, 1977) by; B. Broms. iyo Article 6(A) of the London Charter of the International Military Tribunal.

Intaas haddii aan isaga soo af jarno macnaha dagaalka iyo xeerarkiisa, waxaa nala gudboon in aan u soo dhaadhacno sidee baa lagu dhamayn karaa dagaalka kol hadduu qarxo?. Haddaba su'aashaas ka jawaabideeda oo

ah mid sal ballaaran waxaan isaga soo gaabsanaynaa hal aragti oo la xiriirta heshiisiinta, maxaa yeelay dheeraanta daba galka mawduucu waxa ay nagu keenaysaa in aanaan fatashin kol haddii aanan joogin goobtiisii.

Heshiisiinta marka aan ka eegno dhanka ay dadka intiisa badani ka eegaan waxa ay noqonaysaa mid aan loo bogi karin balse loo qaadan karo in ay tahay soofayn car-car qabta. Taasi waxa ay tahay habka ay u dhacaan wada hadalada nabadaadintu siiba kan ay dhex dhexaadiyaan dawladaha waa weyni waa mid u dhaca hab magoog ah oo lagu dhameeyo xaajadiisa maldahnaan iyo maslaxo madax salaax sababi kara umal iyo ma hadho,

Taas oo laga yaabo in ay fursadda u banayso ujeedada waqtigaas loo fadhiyo, ayna Baarlamaankaas ku qanciso nacam beenlayn laga tashanayo, laakiin dhab ahaan u abuurta gaashaan qaadnimo iyo hub aruursi hor leh, ayna dib u soo kiciso eel colaadeed oo looga duulayo aarsasho iyo is difaacid, tiiyoo lagu adkaysanayo waxaygii, xaqaygii, dhiigaygii, sharaftaydii, dhulkaygii, iwm.

Ma yara inta dagaallo maanta iyo maalin hore intaba socday ee ka kacay eelka caynkaas ah, kuwaas oo ahaa boogo xaydh lagu dhayey oo dib loo dhimiyey ama loo damqiyey. Jiilkii aarsan waayaa waxa uu ubadkiisa ku anqariyaa agoontii aabeheed reer hebel dileen baad tahay, hantidiinii reer hebel baa dhacay, hooyadaa hebel baa kufsaday, hoog iyo ba', halaag iyo kala hantaa wilif, iyo dan darrada maanta reer habel baa ku baday ee ku hayso maankaaga in aad maalin uun ka aarsatid.

Musiibadanina waxa ay joogtaysaa ama ilaa qarniyo sii daba dheeraysaa fidnadii la xabaal duugay iyada oo mar kale sii hurisa dhamacdii bislayd, babiskana la dul taagan qaxankaas tan iyo intii dhab looga daaweeyo oo laga qanco. Sidaa darteed heshiisiinta badankeeda siiba tan maanta dhacda ma ahan nabadayn la hubo, mana ballan qaadi karto heshiis walaaltinimo iyo wada noolaansho oo ku dhisan niyad sami iyo calool fiyoobi.

Waxaana dhici karta in ay cid walbaaba maslaxa ahaan u arkayso heshiiska marxaladaas hiira hiirada ah ee lagu jiro awgeed bal si mar uun loo soo caadiyeeyo nolol iyo

wax u eg, laakiin mar dambe oo ay noloshii sugnaatay uu isla kii shalay heshiiska nabadeed saxiixay dib u soo soofaysto isaga oo ay ku soo maaxanayso colaad baas oo uu horay ula illowsanaa duruufta adag awgeed, ka dibna waxa ay si hal haleel ah foodda isu darayaan libin ku joogihii shalay oo doobinaya isna aaminsiiyey in uu goor walba ku dambayn doono guusha iyo gacan saraynta gar ama gardarro.

Intaas keli ah ma ahan duruufaha qasbaya heshiisyada deg degta ah ee dib ka soo fufa ee waxaa jira caqabado kale oo fara badan, waxayna intooda badani sii raaciyaan fiirsi la'aantooda mushkilado kale oo ka sii wada qota dheer fiirsi la'aanta, kuwaas oo intooda badani ay dhaqso u soo dedejiyaan eelkii colaadeed, qaar badanina ayba hor istaagaan heshiis magoogga, oo ay dhicisiiyaan heshiis magoogga, siina damqiyaan boogta, waxaana ka mid ah fidnooyinkaas khatarta ah; dhisid la'aan, tabar la'aan, aqoon la'aan, salayn la'aan, qiimayn la'aan iyo guud ahaanba hawl ka harid iyo is dhaafsiin ku qotonta doqonimo ama dano gaar ah.

Haddaba marnaba lama dhihi karo wada hadalo nabad raadineed oo la isku af gartay waa heshiis ilaa inta laga arkayo qulqulkiisa oo laga dhadhaminayo mirihiisa, hubaashiina heshiis la dirqiyey waa magoog la isu qarinayo, waxaana mar kaste lagama maarmaan ah in loo kala saaro wada hadalada nabadeed ee dhaca heshiis siyaasadeed iyo heshiis colaadeed.

Waase inaan maanka laga saarin in kol hadaan la helayn heshiis colaad dhamayn ay dantu keeni karto in lagu sii harsado heshiis siyaasadeed ama heshiis danaysi si looga sii baqoolo halkaa marka la xuurto gooyo ee ay cabbaartu fusho. Waxaa kale oo iyana haboon in lagu sii daaqo hab nabadeedka la yiraahdo; isu fasixid wadaag deysan oo maldahan (*implied mutual concent*).

Marka la doonayo in dhab ahaan loo gaaro heshiis waa in la sifeeyaa quluubaha qolooyinka is qoonsan, iyaga oo si xorriyadi ku jirto u caddaysanaya cuqdadahooda iyo waxa ay kala qabaan lagana wada hadalsiinayo oo la is fahamsiinayo, lagana dhaadhicinayo qola walba sida ay qolada kale wax isu tusisay,

Waxaaba la arkaa in ay wada wanaag doon yihiin ayse isla garan waayeen habka loo jiidayo oodda ay isku meesha u wadeene, sidaasina waaba sida ugu badan ee sababta is af garan waayada ay dhiigaga badani ku daataan. Hadaba marka la raaco dariiqadaan xaldoon waxaa laga yaabaa in rukumada loo qotomiyo nabad ku taagan xidido qota dheer oo uu sal adagi ku taagan yahay.

Waxaas oo dhami wey u hirgalin karaan aadanaha kol haddii ay ku waajihaan niyad bir ah oo uu ka buuxo ikhlaas iyo daacad doon baraxla' , wuxuuna Alle weyne la garab geli karaan marka ay daacadnimada caynkaas ah u qaadaan wadadii uu u jeexay ee toobiyaha ahayd, taas oo ku ridi karta tubta Jannada adduun iyo tan aakhiro.

In loo aqoonsado Eebbe wax tarkiisa waa midda lagu gaari karo baraaraha iyo bala la'aanta, waxa aan sharraxa faaladaan ku soo xiraynaa hal tusaale oo xusuus u ah kuwii aan horay u soo xusnay, kaas oo ah in aan masaal ugu soo qaadano arinta Wershad wax soo saar oo aad iskaa u leedahay dabadeedna lagula maamushay, iyada oo aan wax ogolaansho ah inaba haba yaraatee lagaa haysan, ma laga yaabaa in aadan caroonin haddii aad aragto qayb ka mid ah alaabadii ceeriinka ahayd ee aad u soo diyaarsatay wershadaynta ama qayb ka mid ah qalabkii lagu shaqaynayey oo iyadu iska maamulanaysa wershadda inteedii kale.

Si kale haddii loo dhaho, ka waran haddii aad arki lahayd mid ka mid ah shaqaalihii xoogsatada ahaa ee hayey shaqooyinka ugu hooseeya Wershadda oo iskood isaga maamulanaya, si aad u qaldanna ugu tasarufaya wax alla wixii yiillay Wershadda, sow ma xanaaqdeen oo ma fidnayseen?

Haddaadse aragto qaar ka dambeeya oo u muujinaya mid shaqaalahaagii hoose ah ixtiraam dheeri ah oo aad adigu uun ku lahayd goobta, isla markaasna aan adiga waxba kuu arag, wax kastana kala xiriiraya ninkaas aan waxba u haynin sow kama aad masayrteen oo ka cayriseen shaqada ugu yaraan? haddaba ogsoonow Ilaah wuu kaa sii masayr iyo hinaanso badan yahay.

Si kale haddii loo sii eego, ka soo qaad in aad tahay khabiirka iyo mulkiilaha Wershaddaas oo nin aan adiga ahayni uusan hagaajin karin birtii ka hallowda, maxaad ku oran lahayd haddii aad ku kari weydo shaqaalihii war i weydiiya sida loo isticmaalo qalabka Wershadda inta aadnaan faraha la gelin oo aadnaan isku goynin? ee aad weliba aragto iyagii oo raadsanaya khubaro kale oo ay ka cilmi dalbayaan, weydiinayaana sida loo kiciyo Matoorka Wershadda?

Haddaba ogsoonow in aad Eebbihii ku abuurtay ka qaadan la'dahay war bixintii uu ku siiyey ee ku saabsanayd sidii aad ugu noolaan lahayd dunidiisa, inkastoo laga yaabo in aad toban jeer weydiiso su'aalo dheeri ah oo ku saabsan sida loo isticmaalo qolka iyo musqushiisii ninka aad habeen ka kiraysato Albeergo, weliba ka dib marka uu ku siiyo buug yaraha ka sheekaynaya sida loo isticmaalo qalabka qolka yaalla iwm.

## FAA'IIDADA DAGAALKA

Way jirtaa in ay dagaalladu yihiin hoog iyo ba' laga magan galo Ilaahay, oo aan ka tagin waxaan ahayn burbur iyo basanbaas dhaxla balaanbal, tiiraanyo, calool xumo, uur ku taallo, dad la'aan, duunyo la'aan, guri ba'ay iyo galaan-gal, wiil iyo walaal la'aan, aabbe la'aan iyo hooyo la'aan, cayr iyo qaawanaan.

In kastoo uu raadka dagaalku reebo intaas oo musiibo ah iyo in ka sii badanba haddana shaki la'aan wuxuu reebaa faa'iidooyin kale oo la taaban karo, sidaas darteed sama wadow sabir sedkaaga waad heliye. xifdisana maahmaah Soomaaliyeed oo oranaysa (Haddaan fidno dhalan Farxadi ma dhalato).

Akhristow intaadan la yaabin faa'idada uu dagaal leeyahay horta ogow in wax kaste oo yimaadaa ay leeyihiin faa'iido iyo khasaaraba, oo hadday dhan ka faa'iideeyaan ay dhan kale ka khasaariyaan, sidoo kale ogsoonow in wax kaste oo dhaca ay ku yimaadeen maamul iyo qorshe uu u kasay Eebbe, taas oo loo baahan yahay in lagu sabro oo lagu cibri qaato. Waxaana

hubaal ah in uu Alle ku xallinayo dhib jiray mar kaste oo uu dhib qolo taabsiiyo, sidoo kale uu ugu gogol xaarayo kheyr iyo horumar baraare ah oo la gaari doono.

Waxaad kale oo ku qalbi qabowsataa in kan ku waxyeeleeyey ee dalkaagii iyo dadkaagiiba dabar gooyey uusan u dan lahayn in uu wax kugu dhibo ee ay tabari intaa ka noqotay, illeen waa garaadkiisiiye, waxaaba laga yaabaa in uu wax wanaaji is lahaa oo ay aqoontiisa iyo garashadiisu halkaa ku ogaatay. Waxaadna rumaysataa in kan naftiisa ku aaminay birta uu yahay caruur xamaaranaya ama guur guuranaya oo dhuxulaha dabka ah timir u malaynaya, ayna haboon tahay in faraha laga qabto oo laga ilaaliyo midiyaha iyo sakiimaha uu liqayo.

Maahmaah Soomaaliyeed baa ah (Allow nimaan wax ogeyn ha cadaabin), nasiib darrase waxaa ah in kuwa wax ma garadka ah ee aan indhahanaga ku arkayno heerkooda garasho aysan barri marka la is xisaabinayo maalinta kulanka weyn aan lagu darayn xoolaha ee loo xisaabinayo sida dadka kale ee wax garadka ahaa. Waxaanse weli eebbe uga baryeynaa hanuun iyo dambi dhaaf, anaga oo leh; (Ilaahow isaga dhaaf, ma ay garanayaan waxa ay samaynayaane).

Waxaadna Samawadow taas ku garataa in aan aslanba Soomaali horey u soo marin mid aqoontiisa iyo garaadkiisu ay kaamil yihiin oo tala u qabta, oo bal dib u xasuuso dhammaanba kuwii isaga kala dambeeyey boobka iyo bililiqaysiga dalka iyo dhiigga dadka magac kaste ha ku yimaadeene.

Marka laga eego xagga Cilmiga Nafsaaniga, waxaa la ogyahay in haddii isaga oo qofi uu ku jiro xaalad murugo ama dhib, la dul saaro dhib iyo culays kun jeer ka sii xoog badan kii hore uu judhiiba iska illoobayo horta kii hore, ka dibna uusan waxba u arkayn kan dambe qudhiisa, haddaba si ku dhisan Cilmi nafsigaas ayuu Eebbe wax walba oge ina tusayaa isaga oo noogu masal garaacaya tii ku habsatay Muslimiinta maalintii Uxud, ee ay goobtaas dagaal ku jabeen ayna Kabteydii ma aragtaydu ka dhacday, wuxuuna Ilaah leeyahay;
( فأثابكم غما بغم لكيلا تحزنوا علي مافاتكم ولاما أصابكم والله خبير بما
تعملون) العمران:153

( Oo ay idinku dhacday Murug ay la sii jirto Murug kale, si aadnaan ugu walbahaarin wixii idinka tagey, iyo wixii idinku dhacay, Eebbana waa ogyahay waxa aad falaysaan).

Waxaanan tusaale ugu soo qaadan karaa qodobkaan sheeko uu iiga sheekeeyey dhibanihii ay qabsatay, kaas oo iigu warramay in uu dagaalka u soo diray 7 wiil oo uu dhalay, ka dib markii la dilay wiil ilma adeer labaad la ah, oo nin laba Xaniinyooda ahaa, dilkiisiina nagu noqday ka sabri waa, laakiin dhaqso ayaan isagii iyo wax qabadkiisii hore oo dhanba uga samray ka dib markii la raacsiiyey 7 dii aan dhalayba, maantana waan faraxsanahay, oo waxaan ku mahdiyaa Eebbihii aniga iga reebay, maadaama aan fidna walaha koowaad ahaa, ee igu simay heerkii Tawbad keen.

Hadaan intaas ku dhaafno ararta qoraalkeenan aan u soo dhaadhacno ujeedadii qoraalka.

Eebe weyne ayaa yiri;
( ولو لادفع الله الناس بعضهم ببعض لفسدت الآرض ولكن الله ذوفضل علي العالمين) البقرة:251,

(Haddaynan jiri lahayn ku reebidda Eebbe dadka qaarkood qaarka (kale), waxaa fasahaadi lahaa dhulka, haseyeeshee Eebe waa fadli u saaxiib (u deeqe) caalamka).Al-baqara;251.

Akhristow haddaad aayaddan ku cabirtid habka ay dagaalladu uga dhacayeen Somaliya waxaad arkaysaa in goob kaste oo la isku galay ay ahayd jasada qolada lagu jebiyey, oo waxaad yaqiinsanaysaa hadaad sii daba gashid wixii ay qoladaasi ka gashay ama isla qoladaas legdatay ama kuwa kale ama cibaadada Alle oo ay ku caasiyoobeen iyo waxyaalo kale oo badan aad oran lahayd allaylehe baga wey tahay abaal marin ku haboon falfal xumadoodii, taasna maahan inaad ka eegto meel keliya sida;

Reer hebel yey dileen ee waxaad ka eegi kartaa reer hebel maxay guud ahaan dambi ilaahay ka galeen noocuu doono ha ahaadee, sidoo kale ha ka eegin reer hebel xabbadu ma layn ee ogsoonow in uu Ilaah si kale u ciqaabi karo sida; abaaraha, faqriga, cabsida, sal la'aanta, miyir la'aanta iyo iimaan darrada.

Wuxuu kale oo Ilaah inoo sheegay in dunidaba aan wax qumani ka hari lahayn mar haddaynan dadyowgu is reeb reebayn oon qoladii kibirtaba loogu salidayo qola kale oo ka jaasaysa, si loo edbiyo loona badbaadiyo baakhigooda guud ahaanba. oo Eebbe oge wuxuu yiri; (Hadaynan jiri lahayn ku difaacidda Eebe dadka qaarkood qaar (kale ku difaacayo), waxaa la dumin lahaa Macaabid, Sanagogyo, (mawlac suufiyeedka Kiristaanka), Kaniisado iyo Masaajid lagu xuso dhexdooda magaca Eebe wax badan, Allana wuu u gargaarayaa ciddi u gargaarta (diintiisa) Eebana waa xoog badane adkaada) Al-xajj; 4o

Haddaba dagaalku wuxuu idleeyaa oo soo afjaraa cuqdado, ciilal, uur ku taallooyin, murugooyin, sheegashooyin, aragtiyo gardarro oo qaldan, aabyood, anshax xumo, kibir, isla qab weyni, isa silcin, is xaqirid, is gumaad hoosaadyo, iyo is jugeynno fara badan oo u dhaca si tartiib tartiib ah,

Sidaa awgeed wuxuu cirib tiraa fidnooyinka yar yarka ah ee socodkoodu uu cuuryaamiska ku hayey wanaagyo iyo hormarinno badan oo la gaari lahaa iyada oo markaas looga gudbayo huritaanka fidno weyn oo qaxankeedu halaagyo culus sababo,

Waxayna taasi waafaqsan tahay habka ay dadkii hore ku raadin jireen daaweynta iyo xalka wanaagga, oo waxaa dhacda in haddii qof ay asiibto mid uun jirrooyinka ka mid ah lagu gubo dab shiila jirkiisa, ama in la garaaco iwm, sidaa si la mid ah ayey haddaba aadanuhu u qabatimeen in ay wax walba dawadooda ku raadshaan wax dhib iyo shiddo wata, maahmaah Ksawahili ah ayaa oranaysa (*dawa ya moto ni moto*) oo macneheedu yahay (dawada dabku waa dab).

Laakiin waxaas oo dhan macnohoodu ma ahan in la is laayo oo la is wada gumaado si laa gaaro barwaaqo maqan, sidaa oo kale macnahoodu ma ahan ha laga sii daro dhibkii dhacaba si daawadiisa loo helo, mana ahan dhib baa dheef dhaliya ama dhib baa lagu tanaadaa toona.

Macnaha dhabta ihise waxaa weeyey dhibka iyo fidnada waa laga digtoonaadaa oo god kastaa loogaga cararaa, laakiinse kol hadday dhacdo waxaa la arkaa halka ay kaa

soo gashay markaa ayaa la iska awdaa, oo waxaa lagu cibra qaataa xumaanaha ka xasilay markaa ayaa dhawr geeddi oo kale laga sii guraa.

Isku soo duuduub oo haddii uu qoonku wax garad yahay waa uu ka faa'iidaa dhibka iyo musiibada soo marta taariikhdiisa oo waxa uu uga sii tallaabsadaa guri barwaaqo iyo raaxo, laakiin hadduu qoonku daman yahay weligii kama soo waaqsado jabkii iyo halaaggii mar ku habsada.

## HORUMAR BUU DAGAALKU DHALIYAA

Waxaa la sheegaa in ay ilbaxnimadu asal ahaanba tahay natiijadii dagaalka, haddii la eego xagga wax barashada, dhaqaalaha, bulshaynta, wax soo saarka iyo horumarka dhan kastaba leh. Bal aan tusaale u soo qabsano bilowgii adduunka iyo bilowgii dadka waxaan helaynaa in ugu horayntiiba uu Ilaah noo sheegay cillada ugu weyn een dunida ku fasahaadinayno in ay tahay anagoo dhiig iska daadina oo arlada ku fasahaadina dirirteena.

(xus markuu Rabbigaagu ku yiri; Mala'ikta waxaan yeelayaa dhulka cid u harta, oo ay dheheen ma waxaad yeelaysaa dhexdeeda cid fasahaadisa oo ku daadisa dhiig anagoo ku hufayna mahaddaada awgeed oo ku weynaynayna, markaas uu yiri; anigu waxaan ogahay waxaadnaan ogayn) Al-baqara;30.

Ka dib markuu Eebe ogaal badne si kas ah ugu soo daayey Aadanihii Arladatan ayaa waxaa dhacday sidii horayba loo sii sheegay inay dhulkii fasahaadiyaan oo lama aqoon cid amarka Eebe khilaafta iyaga ka hor (Ibliis mooyee) saa waxayba cuneen geedkii looga digay cunistiisa, taasina waxay keentay in uu Eebe inta uu ku xanaaqo ka soo cayrsho Jannadii isaga oo ku yiri;
(waxaanan ku niri ka hoobta Jannada, qaarkiina qaarka kale col buu u yahaye, waxaana dhulka idiinku sugnaaday meel aad ku nagaataan iyo raaxo tan iyo muddo).Al-baqara;37.

Haddaba iyada oo ay sunnadaas Rabbaaniga ihi fulayso ayaa waxaa markiiba foodda is daray labadii ilmo Aadan ahayd Qaabiil iyo Haabiil. Hase ahaatee inkastoo uu midkood goobtaas ku naf waayey hadana faa'iidooyin badan baa ka xasilay fal dambiyeedkaas, oo waxaaba ka mid ah; soo saaritaankii fikradda dad aasidda iyo habka qabri qodista, kala ogaansho la kala ogaado kii gardarnaa iyo kii kale, is jacayl cusub oo dhexmara walaalihii kale iyo ka taxadarid dil dambe oo dhaca.

Sida uu Dr; Maxamed Cali Dhanaawi ku qoray kitaabkiisa;
مقدمات في فهم الحضارة الاسلامية,
bogiisa; 39-49;
sababta keenta ilbaxnimadu waa tijaabooyin iyo dhibaatooyin la maro, dhibaatooyinkaas iyo shiddooyinkaas la marayana waxaa ugu horeeya dagaallada la isku gumaadayo goob walba oo ka dib markay dhacaan gadaashooda laga xasiliyo wanaagyo dib dambe loogaga faa'iidaysto oo ay taasi hooyo u noqoto, Faylasoofka caanka ah ee Will dewrant ayaa ku qoray kitaabkiisa; Taariikhda Ilbaxnimada;

(Runtii Dagaalladu waa kuwa abuura Madaxweyne, waana kuwa abuura boqortooyo, waana kuwa abuura Dawlad. Dawaldda hooyadeedu waa boqortooyada aabeheeduna waa Dagaalka)

Sumner isna wuxuu yiri; (Runtii dawladi waa natiijada awoodeed, waxayna hoos harsataa tiir awoodeed).

Nitasha, isna wuxuu yiri; (Runtii koox wuxuush ah (ama dad duur joog ah) hadday ku qaadaan duullaan habaysan kooxo fara badan oo dad degan ah, kuwaas oo aan waayin tiro, laakiin waayey tayo iyo nidaam habaysan, waxaa laga yaabaa in ay taasi noqoto asal dawaldeed) eeg,; History of civilization, ama قصة الحضارةee uu qoray Will Dewrant ama مقدمات في فهم الحضارة. ee uu qoray Dr; Maxamed Cali Danaawi, boggiisa; 39 - 49.

Haddii aan ku noqono qeexitaanka macnaha Ilbaxnimo si aan u dhadhansano ujeeddada qoraalkan ayaa waxaa lagu soo aruuriyaa sidatan Ilbaxnimadu waa (Islaamka ka sokow): kacaan cusub oo ka dhasha natiijada

dhibaatooyin lagu jiray si uu u reebo dhibaatooyinkaas una horseedo nolol cusub oo lagu badbaadayo ama lagu hormarayo sida;

kacaankii wershadaha, ilbaxnimadii giriiga, tii Roomaanka iyo kuwa kale oo badan. kuwaas oo dhami waxay ku tusayaan in marka ay dadku leeyihiin ilbaxnimaa la gaaray ay macneheedu tahay silic iyo saxariir lagu jiray baa xal looga boxo la helay. Hadaba dagaallada, dhibabka iyo gaajadu waa hooyada wax soo saarka iyo ilbaxnimada.

Sida la ogsoon yahay dagaal culus oo ka dhex qarxay laba gobol oo ka mid ahaa dawladdii Islaamka ee waagii Umawiyiinta ayey ahayd sababtiisu; nin Barasaab cusub ah ayaa labada gobol midkood gobolka kale u soo diray, wuxuuna Imaamku u soo dhiibay warqad ay ku qoran tahay (Hadduu idiin yimaado ninkani qaabila) waagaasna ma aynan jirin dhibcaha shaqalka ah ee lagu kala garto xarfaha afka carabiga sida B, T, TH, erayga dilana waa Faqtuluuhu, erayga Qaabilana waa Faqbaluuhu af carabi ahaan,

Sidaa darteed waxay noqonayaan isku dhigmo mar haddaynan dhibcuhu kala caddaynayn, taasina waxay sababtay in ay u fahmaan (haduu ninkaasi idiin yimaado dila) say waa dileen, kuwii kalena waxay u maleeyeen in ay qoladaasi gedoodeen oo ay xumaan doon ahaan u dileen ninka, halkaasaana la isaga bilaabay, laakiin dagaalkaas ka dib waxaa la isla gartay in lakala duwo qoraalka xarfaha oo lagu kala sunto dhibco iyo shaqal.

Faa'iidooyinka la taaban karo ee maanta caalamka ka muuqda kowoodii kale ee ugu dambeeyey, waxaa ka mid ah; raadadkii ay ku reebeen labadii dagaal ee dunida waddamadii ay  sida ba'an u saameeyeen. Masalan Ingiriis iyo Jarmal waxay maanta ku adeegtaan noocyada Wershadihii hore ee noocoodu dhacay, halka ay Jabaan iyo wadamo kale ka isticmaalaan Wershado casri ah oo xiiraya, ka dib markii looga burburiyey kuwoodii hore dagaalkii labaad ee adduunka.

Guntii iyo geban gebadii dagaaladu waxa ay sababaan ilbaxnimo iyo horumar laakiin waa ciddee cidda ay taas u keenaani? Dhab ahaantii Soomaalidu uma eka cid ka fa’iidaysanaysa waayaha iyo cilmiyada qoran toona sidaa darteed way adagtahay in ay ka dhaxlaan wanaag

iyo taba qaadasho wacan waxa duruufo kharaar uu dagaalkaan dabada dheeraaday soo mariyey. Hase ahaatee aan iska rajayno in ay kuwa dhabaradooda ku jiraa wax gartaan ka dib markii ay wax ka bawsadaan waxa ka socda dunida ku wareegsan. Sidaa darteed aan Alle ka barino in uu kuwa cimrigoodu horay u socday ee doonaya in ay seejiyaan samaha kuwa soo koraya ka qabto oo soo saaro xaqqa ay leeyihiin kuwa ku dhashay waqti fidneedka ay aabayaashood abuureen iyo kuwa ka sii dambeeyaba.

***Cutubka lixaad***

# SIDAY ANIGA ILA TAHAY

Inta aanaan u sii dhaadhicin tala soo jeedintayda ayaa waxaa ila quman in aan kolka hore isla garano waa kee hab wanaagga iyo xalka aannu doonaynaa? ma dhalanteedyada ay dad badani ku daalaan ee ah heshiisyo khayaaneedkaa mise waa heshiisyo dhaqameedkii hore ee ay odayaasheenu sida ku meel gaarka ugu kala saxiixan jireen geedka hoostiisa?, sidoo kale ma is khayaanaynta iyo is daba mardaamaynta ay kuweenna siyaasi iska yeelaka ihi ay isku khayaanaynayaane uu mid walba ku doonayo in uu kana kale jaraha uga boodaabaa?.

Dhabtii haddii uu mid ku fikirayo noocyada dhalanteed ee ay kuwaasii ka mid yihiin yuusan isku daalin akhriska Kitaabkaygan ilaa iyo inta uu ka soo garawsanayo waxa xaqiiqa ahaan u suurtoobi kara ee ruux la gudboon in uu ku fikiro ama ku han weynaado.

Akhristow ma ogtahay in dhakhtarkuba uusan dawaynta bukaanka ka bilaabin qalliin (*surgery),* ee u soo maro heerar kala duwan oo kala hooseeya, kuwaas oo uu midba midka kale u sii gudbinayo dariiqooyin iyo tabooyin loo maro oo ay keentay lagama maarmaanimadeedu.

Marka hore wuxuu dhakhtarku ku siiyaa Kiniinka xummadda jebiya iwm, marka labaad ee aad isla xanuunkii ugu soo noqotana wuxuu kugu caawiyaa xabbado Kaniiniyo ay heerarka Garaamkeedu sareeyaan ah, marka saddexaadna waxaysan daweyntaadu ka fursanaynin Irbado, marka afraadna in lagu jiifiyo, ilaa iyo marka dambe oo ay xaaladaadu gaarayso heer qalliin.

Bal haddaan anna isku dayo in aan ka dhiibto ra'yigeyga arintaan murugsan oo madaxa iskula jirta, aan qodobyo kooban ku soo aruuriyo qaabka ay iigu muuqato in lagu gaari karo dhismo dawladeed oo ka fiyow calool xanuun iyo daacuun cuqdadeed, kuna shaqaysata dhiifoonaan iyo hididiilo ay ku tiigsanayso dhaamankii socdee ka hor wabxay. waxayna yihiin qodobadaasi sidatan;

1- Ha la helo doonis dhab ah oo maman laguna doonayo dawladnimo, taas oo ka dhar la' guud ahaanba malabsiga iyo ciilkaambiga ku dhisan Munaafaqnimada, una go'doonsan Ilaahay dartiis.

2- Ha laga tanaasulo isla weynida iyo isla qumanaanta, oo ruux walbaa ha aqoonsado jiritaanka iyo dadnimada kan kale.

3- Ha loo liqo dib dhammaanba is huruufiddii iyo ficiltan foodleygii la caadaystay oo ha lagu mashquuliyo maskaxda samafallo dhaama.

4- Ha ku mashquulo waddani kastaaba wax soo saar uu naftiisa iyo ehelkiisa ku anfacayo, hadduusan cid ka dheer wax ku tarayn.

5- Ha loo baddelo isugu gargaarkii iyo isku kaalmaysigii reer hebelka iyo ina hebelka ee ku salaysnaa dulmiga reer hebel iyo ina hebel, mid kale oo ah isugu kaalmayn iyo isugu gargaarid horukicin, wax tacbasho iyo Naar Aakhiro iyo halaag adduun iska badbaadin.

6- Ha la faafiyo tacliinta Islaamiga ah iyo midda maadiga ahba.

7- Ha ku soo noqdeen dalka aqoonyahannadii iyo wax garadkii ka qaxay, oo ha abuureen tartanno dhaqaale iyo wax barasho si ay ugu meelaysmaan halkii tartanka xukun doon.

8- Ha midoobeen dhaq dhaqaaqyada Islaamku, maadaama aysan isku khilaafsanayn wax asal diin ah ee ay isku afjigayaan arimo furuuc hoose ah, oo kala tagoodu yahay (Ikhtilaafu Tanawuc), ayna aad uga fog yihiin (Ikhtilaafu Tadhaad), ugu yaraana ha wada shaqeeyeen guud ahaanba wadadada diintu iyaga oo ka soo wada go'aya qabiilladooda iyo hunguriga., oo ku wada walaaloobaya dar Alle iyo diinta u gargaarideeda.

9- Ha laga masaxo qalbiga dadweynaha daxalka iyo urugada qabqablayaasha dagaalka.

10- Ha laga soo jeediyo dadweynaha Kaaba qabiillada, Suldaanada, Ugaasyada, Boqorada, Wabaryada, Malaakhyada, Sayidyada, Imaaanada, Islaanada, iwm.
taasna macneheedu wuxuu yahay; way ku mahadsan yihiin intay oday qabiileedyadaasi bulshada soo dhaqayeen, nasiib darrase maanta xilkoodii wey la kufeen, ceebna kuma ahan taasi waayo waxaa is baddelay samankii oo hawlahani ma ahan kuwii ay yiqiineene looga dambeeyey, ee waa dawladnimo iyo in lagu shiro dayaxa korkiisa halkii geed hoostiis bacaadka lagu saldhaysan jiray. Sidaa awgeed ha ku soo wareejiyeen xilka dhallinta curdoon ee ku hagi karta ummaaddaan tubta ay waalkood ku socdaan iyo tan ay ku badbaadayaan Adduun iyo Aakhaba.

11- Ha la soo celiyo, hana la hormariyo is dhex galkii bulshada sida; kala guurigii iyo xididnimadii, ganacsi is dhaafsigii, is magan gelintii iyo is badbaadintii, isu xeraysigii, iyo guud ahaanba is bahaysiyadii kale ee ku dhisnaa samafalka ama isku danaysiga iyo kheyr isku kaalmaysiga iyo guud ahaanba wixii kale ee soo celin kara wada noolaansho iyo horumarin arimo bulsho.

12- Ha iska dhiseen gobol walba iyo qola walba dhexdooda dawlad yar oo aan go'in ( Precinct) iyaga oo si dimoqraadi ah isaga soo dhex dooranaya kuwa u qalma in ay maamulaan.

13- Ha u wada qaybsadeen si caddaalad korjoogto leh maamulka qabiillada kala duwan ee hal gobol isla degani.

14- Ha la isugu yimaado shirweyne dhexe oo loo dhan yahay, ayna ka soo qayb galaan ilaalo shisheeye oo lagu kalsoon yahay la islana wada doortay.

15- Ha la dhiso guddi wadaag ah oo masala dawlad dhexe oo loo dhan yahay, kuwaas oo u wada shaqeeya sidii dawlad rasmi ah oo dhisan.

16- Ha iska soo dhex doorteen gudoomiye guud oo masala booskii madaxweyne, kaas oo aan marnaba gaari karin wax go'aan ah keligiis.

17- Ha dhisteen gudigaasi Dastuur iyo nidaam u gooni ah oo waafaqsan sidii ay isku af gartaan iyagu dhexdooda.

18- Ha loo daayo gobol walba maamulkiisa iyo hawlihiisa, oo ha isku xukunto qola walba sharciga iyo nidaamka ay doonto, goboladii doonaana ha midoobeen.

19- Ha la kala goboleeyo hay'adahii dawladeed ee xarunta keliya lahaa, kala ahana sida; Poliska, Waxbarashada, War faafinta, Garsoorka, Arimaha bulshada, Arimaha diinta, Arimaha gudaha, Shaqaalaha, Wershadaha, Ganacsiga, Dhaqaalaha, Malliyadda iyo guud ahaanba inta caynkaas ku socon karta.

20- Ha la hanti gaareeyo (*Privatization)* dhammaanba hay'adahii dawliga ahaa sida; Poliska, Waxbarashada, Warfaafinta, Caafimaadka, Wax soo saarka, Biyaha, Dabka, Gaadiidka, iyo guud ahaanba wixii la mid ah.

21- Ha ka shaqeeyaan guddiga dhexe wixii la xiriira hanti isu celin, dib u dejin, iyo dib isugu soo celin dadkii kala baytamaalay, dhidibadana ha u aaseen rajo

dawladnimo oo xidideedu qotomaan, jirideeduna xajmi culus leedahay, laameheeduna sal iyo baar bexeen, sidaa oo kale ha askumaan cilaaqaad dawli ah.

22- Ha soo dhiseen guddigaasi xubnihii dawladda dhexe iyo hay'adeheeda masali lahaa, oo ka kala yimaada gobolada, laguna soo wada doorto hab ku dhisan maxaad taqaan iyo maxaad tari kartaa ee aan ku dhisnayn saami qabiileed oo keliya, hana ku kala shaandheeyaan tartan lagu qiimaynayo wax qabadkooda ka dib markii ay hawlgalaan, iyada oo qola walba indhaha loo saarayo dhaliilaha kii ay ceelka keensadeen.

23- Ha ka qayb qaateen guud ahaanba dhismahaas iyo tabaabushahaas dawladeed dhammaanba Aqoonyahannadu, Culima'u diinku (aqoonyahanka diinta Islaamka), Waayo araggu (qurbaawiga khibradaystay), Ganacsatadu, Xoogsatadu, iyo kulliba wax garadka ummadduu. Iyada oo qof walba uu ka qaadanayo hawsha halka ay uga soo aaddoo ee ay tabartiisa iyo aqoontiisu dhigto, aanana u hanqal taagayn ama ku doodayn wax uusan cilmi u lahayn ee u daynaya kan u ehelka ah.

24- Ha u madax banaanaado gobol walba horumarinta iyo meel marinta dadkiisa iyo goofkiisa, oo dhammaanba mashaariicda horumarineed waxay ku xirnaanayaan hadba sida dadka deegaankaasi ugu dadaalaan horumarintooda, waxaana u fasaxan in ay xiriir iyo heshiisyo la galaan ciddii ay doonaan mar hadduunan xiriirkaasi wax u dhimayn masaalixda guud iyo mid gobol kale toona, sida; kuwa dumiya diinta iyo sharfka guud.

25- Ha la dhiiri geliyo iskaashatooyin isugu dhafan qabiillo kala duwan oo xiriirro la yeesha iskaashatooyin ajnabi ah, hawshooduna ha gaarto heer caalami ah, iskaashatooyinkaasina ha ahaadeen nooc walba oo hawlaha aadanuhu galaan sida; kuwa ganacsi, kuwa wax soo saar, kuwa dhismo, kuwa wax barasho, kuwa fikir, kuwa dhaqan, kuwa diin faafin, kuwa cayaartooy, kuwa abwaanno iyo hal abuurro ah, iyo wixii kale ee aan mucaaradayn hiddaha Islaamka.

26- Ha abuureen guud ahaanba mas'uuliyiinta iyo wax garadku kaadirro u bisil la qabsiga habsami u socodka

dunida, iyo jiilal hanta hawlaha mustaqbalka oo loo carbiyey siday u xamili lahaayeen hawshooda.

27- Ha soo dhiseen guddigu waax u xil saaran qiimaynta iyo daba galka (monitoring and evaluation) habsami u socodka guud ahaanba shaqada waddanka ka socota , kuwaas oo guud ahaan isla jira gaar ahaanna u kala jira gobol gobol. hadhowna kala raaca hay'adaha dawladda.

28- Ha sameeyeen guddiga dhexe ee dawladda masalayaa ila dhaqaale iyo wax soo saar oo hadhow noqda hanti qaran, taas oo aan ahayn mashaariic nafci ah, ee ah diyaarin mustaqbal.

29- Ha ku shaqeeyaan dhammaanba xubnaha ma'uuliyiinta ihi iskaa wax uqabso iyo nafhurudnimo, oo mid walbaa ha iska biilo jeebkiisa.

30- Ha la sameeyo guddi xisaabi xil ma leh, oo daba gala hanti dhawrka, iyo hawl wadeenadaba.

31- Ha la ogeysiiyo guud ahaanba shacabka rayidka ah wax kaste oo dalka soo wajiha iyo wixii soo galaba.

32- Ha la abuuro laan ay dadweynuhu ku dhiibtaan ra'yigooda, taas oo kala munaaqashoota ruux walba fikraddiisa.

33- Ha la abuuro golayaal fikirka iyo fiirooyinka lagu kala qaato oo madax banaan, lana dhiirri geliyo.

34- Ha la abuuro ilo qoondayn oo dhaqso loo quud darreeyo.

35- Ha la cusboonaysiiyo, dabadeedna ha lagu mideeyo meel ka gedisan tan iyo heerka ay maanta joogaan Dabeecadaha dadweynuhu.
36- Ha la faafiyo qodobo cusub oo looga hadlo maalinle ahaan.

37- Ha la is daba taxo Mashaariic mustaqbaleed oo hufan.

38- Ha la tix geliyo, oo ha la daraaseeyo Taariikhda macallinka ah.

39- Ha lagu ol-oleeyo galab iyo subax sidii looga guuri lahaa raas nololeedka aan subax walba ku soo waabariisanno ama aan ku cabbaar furanno.

40- Ha loo ogolaado gobolkii doona go'itaan iyada oo shardi lagaga dhigayo in uusan weerar soo qaadayn, in uusan dhul dheeri ah qaadanayn, in uusan dacaayad colaadeed abuurayn, in uusan cuuryaamin dhaqaale iwm abuurayn, in uu ogolaanayo xiriir saaxiibtinimo iyo walaaltinimo oo uu la lahaanayo guud ahaanba goboladii uu ka go'ay, oo uu kula noolaanayo derisnimo iyo wax wada qabsi.

41-- Ha laga samro aslanba gobollada maqan u doodistooda.

42-- Ha laga caago dagaal shisheeye iyo mid sokeeyaba, oo ha la taagto callan nabadeed.

43-- Ha laga dhigo dadka hubka, taas oo macneheedu yahay yaan ninna hantidiisa (qorigiisa) lagu qabsan laguna handadin ee maskaxdiisa ha laga baddelo oo ha loo geliyo maskax aan hubaysnayn.

44- Ha ka heshiiyaan guddigu halkii xarun u noqon lahayd fadhigooda iyo dawladda mustaqbalkaba, iyada oo laga taxa darayo hurgun fidno oo dambe oo ka yimaada eelka dhul sheegasho iyo goof is xijisiin.

45- Ha u gogol xaareen guddigaasi midnimo Soomaaliyeed oo aan ku salaysnayn hab reer baadiyood iyo reer guuraanimo ee ah mid la haysata nolosha casriga ah, ee ay adag tahay si aannu utiigsanno fogaanta ay naga fog tahay awgeed, marka ugu horaysa ee la xaqiijiyo in ay dadweynuhu taas u bislaadeenna, ha loo ol-oleeyo tallaabada xigta.

46- Ha qaban qaabiyeen guddiga iyo guddomiyahoodu doorasho caam ah oo ku salaysan dimoqraadiyad dhab ah (caddaaladda Islaamka), iyada oo la soo doorte kaste lagu xirayo shuruudaha aan horay u soo xusnay ee loogaga baahan yahay ku kaste oo mas'uul ka noqonaya shacab Muslimiin ah.

47-- Ha la joojiyo kaalmada shisheeye, kol haddaynan ahayn mashaariic horumarineed si ay dadku u gartaan wax soo saar iyo harjad.

48- Ha weydiisteen guddiga dhexe hanti yar oo hawl fulineed shirkadaha iyo hantiileyda ladan ka dib marka ay wax soo saarkooda soo ban dhigaan oo kobcaan.

49- Ha la furo guriga tartanka dhaqaalaha, ama isugu faanka maalka iyo awlaadda.

50- Ha la furo guriga tartanka Qur'aanka iyo cilmiga Islaamiga ah.

51- Ha la dhiiri geliyo guurka iyo awlaad korinta iyo tarbiyeyntooda.

52- Ha xisaabtamo qof kaste oo hadana xisaabtankiisa ha u sii gudbiyo qoladiisa iyo kooxdiisa, iyaga oo kuwada xisaabtamaya kana tashanaya, maxay danteenna shakhsi ahaaneed inoogu jirtaa? tusaale; Haddii aan dagaalka joojiyo dagaal la'aanta ma ku heli karaa intii aan dagaalka ku heli jiray hadday tahay magac iyo hadday tahay maalba.

53- Ha lahaadeen shirar joogto ah oo qiyaastii maalin dhaaf ah, guud ahaanba guddiyada; talo go'aaminta, hawl fulinta, daba galka, qiimaynta iyo isku xirka.

54-- Ha la xaqiijiyo in aan madaxweyne dal xukumin ee uu shacabku is xukumo, isla markaasna uusan madaxweyne hormarin karin qaran kol haddaynan iyagu is horumarinaynin.

55- Ha laga dhawro awoodda in ay cid gooni ah ama shakhsi gooni ah faraha u gasho, oo ku kaste oo talo loo dhiibtaa ha ku ekaado hawl fuliye isku agaasima dadka iyo talooyinkooda.

56- Ha la kala saxiixdo mar walba heshiisyo qoraallo iyo markhaatiyo leh (contracts) oo haddii la jebiyo la qaadi karo tallaabooyin jebiyahaas isna lagu jebinayo.

57- Ha ku wareejiyaan guddigii soo halgamay xilka dawladda la soo doorto, dawladdaasina marnaba ma

noqon doonto mid awood ku dhisan, sida aysan u yeelan karin awood sharci dejin oo ay u madax banaan yihiin, iyo sida aysanba u gaari karin go'aan kelitalisnimo.

58- Ha garawsado ruux walbaa in uu Insaan qaldami kara yahay, Eebbana uusan gar daraysanaynin ee uu falkiisa ku abaal marinayo.

59- Ha ku deg dago ruux walbaa Tawbad dhab ah oo ku dheehan khushuuc iyo Eebbe isu dullayn.

60- Ha bilaabo ruux walbaa in uu ka guurayo falalkiisii qaldanaa ee uu dareemay, hana saaro cagta toobiyaha toosan ee ay ku hagaagayaan shuquladiisa oo idili.

Waxaan hadalkeyga ku soo afjarayaa halku dhegayga ah;

Mar haddaad gar leedahay xagso gartaada.
Hadduu xaqqu kula jiro caddayso oo ku dheg.
Hadaadan gar lahayn, xaqna ku taagnayn -
madaxaaga ku garaac miiska ku horyaal.

Waxa yiri: **Qaasim Xirsi Faarax**.

## GABAGABO

Buuggan waxaa loogu tala galay in uu wax ka taro ol-olayaasha loo tafa xaytay ee loogu jiro sidii dib loogu soo noolay lahaa qarankii Soomaaliyeed ee dhintay, kaas oo dhawr sano mootan ayna weli qabrigiisii ku hardamayaan dhurwaayo hilibkiisii feen feenanaya,

kuwaas oo raqda ay dul joogaan ku mintidsan oo nafta dul dhigaya.

Haddaba buuggani waa mid xambaarsan yahay macluumaad fara badan oo jacbur ah kuna wada salaysan hab tusaalayn iyo tilmaan tusid ah. Waxaase ka weyn oo uu xambaarsan yahay waanooyin iyo caqli celinno fara badan oo loo cuskaday kitaabka Ilaahay iyo ku dayashada sugnaaday ee Nebigiisii NNKHA. Sidaa oo kale loola noqday taariikho iyo dhacdooyin lagu waana qaadan karo, iyo cilmiyo sugan oo la soo dhiraandhiriyey.

Buuggaan waxaa la rajaynayaa in uu u gogol xaaro midnimo iyo jiritaan dambe oo Soomaaliyeed, taas oo loo maleeyo in qof kaste oo ka mid ah qabiilka laf gaabka ah ee Soomaaliya marka uu akhristo uu guntiga dhiisha isaga dhigi doono sidii uu u abuuri lahaa qoyska Soomaaliyeed oo mid ah.

Waxaana la rajaynayaa in macluumaadka isku dhafan ee laga helayo buugga ay ku abuuraan akhristaha qalbi xaarnaan, daba gal, cilmi baaris, xog doon, munaaqasho ama dood, saraaxo ama ku dhiiranaan caddaysasho waxa qalbiga ku jira ee umal iyo ciil iyo murugo ah.

Ka dib marka akhristaha taas laga helana waxaa la arkaa in ay usoo baxdo baadi goob nolol cusub, tiiyoo uu ka baqoolayo gurigii qabiileed ee uu taagnaa kuna harbaajinayo hooy kaste oo reerka Soomaaliyeed leeyahay. Haddaba taasi waxa ay horseedi kartaa dhabta iyo xaqiiqada oo dhaqso loo helo, boogaha oo la dhayo lana daweeyo, xorriyada qof ahaaneed ee af iyo addinba leh oo la garto, in la kala saaro san iyo xun.

Waxaa kale oo ay tani qayb libaax ka qaadan kartaa dhiiri gelinta dhalinta iyo aqoonyahanada Soomaaliyeed ee afkii juqda gabay, kuwaas oo la arko in uu mid walbaa soo bandhigo uurkutaalladii uu la taahayey iyo cuqdadihii dahsoonaa, iyada oo taasi ay isla markaas dabar goonayso dawrkii isla qumanaanta iyo dhan isu buufinta ayna furayso is barasho furan, uguna baaqayso kuwa indhaha kala qaaday baraarug ah in la gaaray gurigii xaqiiqada, loona baahan yahay in ay ka muujiyaan dawrkooda.

# TUSMO

1-Gogol dhig.
2- Hordhac
3- cudur daarasho
4- Wax ku saabsan silsilada Qoraalka
5- Cutubka Koowaad.: KEENNEE GARDARAN?
waraysiyo dadban
Hana loo gar naqo
Iidoor, Ogaadeen, Majeerteen, Marreexaan, Habar gidir, Abgaal, Raxan weyn.
Inta aan Qabiil ku dooneyn
Jawaabo runta lagu taabtay
Yaa isku keen diray
Kuwa inoo eedaysan
Xaajada ina Barre
Dambiga guud ee Fidnoolayaasha
Maxaa iska keen horkeenay?
Sidee looga gaashaantaa Fidno dambe?
6- Cutubka Labaad.: MUSLIM IYO MARREEXAAN MIYAA?
Waa maxay Dawlad?
Qaraabo xiriirinta iyo qabyaalad abuuridda
Qisadii Madexey
Qisadii Faarax
Aragtida Culima'udiinka ee la xiriirta fikradda
Siduu u dhacayey xaalku?
Yaa guran jirey Hantida Dalka?
Maxaa tusay Dadweynaha Marreexaan?

7- Cutubka Saddexaad;
SIDA MADAXWEYNE LOO NOQDO.
Madaxweyne halyga dhigo.

8- Cutubka Afraad; DAGAALKA.

Waa maxay dagaalku, sideese looga baxaa?
Is difaacidda
Faa'iidada Dagaalka
Sida ay aniga ila tahay
Geban gabo.
Tusmo.